
# Xeerka Astaamaha Qoraalka

Sidee Loo Isticmaalaa Astaamaha Qoraalka?



Qoraaga Buugga
**Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud**

# XEERKA ASTAAMAHA QORAALKA

## Sidee Loo Isticmaalaa Astaamaha Qoraalka?

CABDIRAXMAAN XUSEEN DAA’UUD

**Copyright © 2019 by Abdirahman H. Daud**

All rights reserved. No part of this book may be reproduced or used in any manner without written permission of the copyright owner except for the use of quotations in a book review.

For information about permission to reproduce selections from this book. Write to Permissions: Abdirahman H. Daud, abdihdaud@yahoo.com

# TUSMADA BUUGGA

Mahad-naq
Qoraaga Buugga
Maggaca Astaamaha
Goggol-dhig
Shaa-shadaha Youtube iyo Facebook ee Buugga
**Cutubka 1**: Xarf-ku-Dheg
**Cutubka 2**: Joogsi **.**
**Cutubka 3**: Hakad **,**
**Cutubka 4**: Astaanta Su'aasha **?**
**Cutubka 5**: Kolmo **" "**
**Cutubka 6**: Moos **:**
**Cutubka 7**: Far-Suul **;**
**Cutubka 8**: Astaanta Dareen **!**
**Cutubka 9**: Jiitin **-**
**Cutubka 10**: Mareeg **( )**
**Cutubka 11**: Ardaa **[ ]**
**Cutubka 12**: Fullul **. . .**
**Cutubka 13**: Qo-qob **/**
**Cutubka 14**: Ham'se **'**
**Cutubka 15**: *Jan-jeedh* & Hoos Xariiq
**Cutubka 16**: Boqoley (**%**)
**Cutubka 17**: Astaanta Lacagta (**$**)

# MAHAD-NAQ

Buuggan qoraalkiisa waxaa talooyin, taageero, iyo dhiiri-gelinba kaga qayb-qaatay dad-badan oo aanan halkan kusoo koobi-karin mahad-naqooda. Dhamaantood waxaan si niyad ah ugu mahad-naqayaa sidii niyad-samidda ahayd ee ay uga qayb-qaateen qoraalka buuggan.

Inkastoo aannan magacyada dadkaas halkan kusoo koobi-karin, waxaan halkan ku xusayaa oo aan aadna ugu mahad-naqayaa: Gar-yaqaan Xuseen Jaamac Cabdiraxmaan, Ku-xigeenka Gar-yaqaanka Guud ee Soomaaliland, ahna Mulkiilaha Horn Legal and Consulting Services; Dr. Cali Xassan, oo ah Gudoomiyaha Hay'adda Social and Animal Welfare Service (SAWS) oo degaan-keedu yahay caasimada Hargaysa, Soomaaliland; Qoraa Axmed Ismaaciil Yuusuf; indheer-garad Cumar Cabdikariin Xirsi (Xaaxi), oo ah mulkiilaha Hudheel-ka Xaaxi; Dhaqaale-yahaan Cabdisalaan Faarax; abwaan Cabdillaahi Xaaji Jaamac Siciid (Faroole); Sheekh Mahdi Mujaahid Samow Nuur; weriye Cabdiaar Cabdi; Engineer Axmed Xasan; Engineer Xasan Aadan (Time-jilic).

Waxaa kale oo aan u mahad-naqayaa ardaydaydii Jaamacada Hargaysa oo ila-wadaagey baahida ay u qabaan fahanka *xeerka astaamaha qoraalka*. Ardaydaasi waxay si-hufan oo qoto-dheer uga jawaabeen su'aalo aan waydiiyey oo aan ku baadhaayey baahida ay u qabaan qoraalka buuggan.

Maadaama buuggani uu yahay buug tabaruc ah (*sadaqatul jaariyah*) oo aannan wax dhaqaale ah ka samaynin, uguna talo-gelin in aan dhaqaale ka sameeyo, dhamaantiin Illaahay xasanadkiisa haydin-siiyo, AAMIIN!

Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud

# QORAAGA BUUGGA

Qoraaga buuggan oo magiciisa la yidhaahdo Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud, wuxuu wax-barashadiisii kusoo qaatay wadanka Soomaaliya iyo wadanka Maraykanka.

Cabdiraxmaan wuxuu Bachelor of Arts (BA) ka qaatay University of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku takhasusay *Cilmiga Siyaasadda* (Political Science) iyo *Barashada Caalamka* (Global Studies). Ka dib, wuxuu Masters Degree (MA) ka qaatay Saint Mary's University of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku takhasusay *Maamulka iyo Maaraynta Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada* (MA in Health and Human Services Adminstration). Ka dib, wuxuu Cabdiraxmaan mar labaad Masters Degree (MA) ka qaatay Saint Mary's University of Minnesota, U.S.A., waxaanu Masters Degree-ggan labaad ku takhasusay *Dhakhtarnimada Dhimirka* (Master of Counseling and Psychological Services).

Cabdiraxmaan wuxuu bare-sare (Professor) ka ahaa Jaamacada Hargaysa muddo uu degenaa caasimada Hargaysa, Soomaaliland. Isla muddaddaas uu degenaa Soomaaliland, waxaa kale oo uu kasoo qabtay shaqooyin kala duwan. Cabdiraxmaan waxaa kale oo uu ka mid yahay aasaasayaasha *Hayadda Daryeelka Bulshada iyo Xayawaanka* (Social and Animal Welfare Service) ee marka lasoo gaabiyo loo yaqaano "SAWS," degaankeeduna yahay caasimada Hargaysa, Soomaaliland.

Cabdiraxmaan waa qoraa caan ka ah mareegaha Soomaalida (Somali Websites), waxaana uu qoray qoraalo aad u tirro-badan. Wuxuu wax ka qoraa arimaha siyaasadda, bulshada, dhaqanka, iyo taariikhda.

Inkastoo aanu weli dibeda usoo saarin ama soo daabicin, Cabdiraxmaan waa hal-abuur sameeyey suugaan isugu-jirta gabayo, maansooyin, iyo heesaba. Dhawaana wuxuu umada la wadaagi-doonaa suugaantiisaas kala duwan.

Cabdiraxmaan wuxuu degen-yahay wadanka Maraykanka. Waxaad kala xidhidhi kartaa: abdihdaud@yahoo.com

## *MAGACA ASTAAMAHA*

| *NO* | ENGLISH | ASTAANTA | SOOMAALI |
|---|---|---|---|
| *1* | Capital Letter | **B, T, J, X** | Xarfa-ku-Dheg |
| *2* | Punctuation | **.** | Joogsi |
| *3* | Comma | **,** | Hakad |
| *4* | Question Mark | **?** | Astaanta Su'aasha |
| *5* | Collons | **:** | Moos |
| *6* | Quotation Mark | **" "** | Kolmo |
| *7* | Semicolon | **;** | Far-Suul |
| *8* | Exclamation Mark | **!** | Astaanta Dareen |
| *9* | Hyphen | **-** | Jiitin |
| *10* | Parentheses | **( )** | Mareeg |
| *11* | Brackets | **[ ]** | Ardaa |
| *12* | Ellipses | **. . .** | Fullull |
| *13* | Slash | ***/*** | Qo-qob |
| *14* | Apostrophe | **'** | Ham'se |
| *15* | *Italics* &Underline | ***J* & __** | *Jan-jeedh* & Hoos-Xariiq |
| *16* | Percentage | **%** | Boqoley |
| *17* | Currency Sign | **$** | Astaanta Lacagta |

# GOGOL-DHIG

BISHII LUULYO, 2016, WAXAAN maamule ka ahaa hay'ad ka shaqaysa caasimada Hargaysa, Soomaaliland. Hay'addan aan ka shaqeynaayey ayaa u baahatay in ay shaqaaleysiiso laba qof. Shaqadii ayaanu kusoo daabacnay jaraa'iddadda iyo mareegaha Soomaaliland (Somaliland websites). Sidii caaddaddu ahayd, waxaanu dadka waydiiney in ay e-mail noogusoo diraan "Curriculum Vitae" (CV-gooda) iyo warqad (Cover Letter). Dad aad u tirro-badan ayaa shaqadii soo dalbaday oo noosoo diray CV-yo iyo warqado.

Talaabadii ugu horaysay ee aanu dadka ku kala reebaynay waxay ahayd: in aanu eegnay, oo si huffan u akhrinay, CV-yadii iyo warqadihii ay noosoo direen dadkaas shaqada soo dalbaday. Dad aad u tirro-yar ayaanu ka xulanay, oo aanu u yeedhnay si aanu ula-yeelano waraysi-shaqo (interview). Dad aad u tirro-baddana waanu iska reebnay, sababtoo ah waxaanu aragnay in aanay xirfadii shaqadda ee loo baahnaa aanay lahayn.

Sababta aanu dadkaa tirradda-badan uga reebnay waxay ahayd: markii aanu akhrinay CV-yadooddii iyo warqada-hoodii, ayaanu aragnay in qoraalkooda uu khaladaad badan oo xagga qoraalka ahi ku jiro, arinkaas oo noo cadeeyey in aanay aqoonba u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*. Maadaama aanay *xeerka astaamaha qoraalka* aqoon u lahyna, waxaa noo cadaatay in aanay ahayn dad shaqada qaban kara. Dadkaasi waxay u bad-naayeen arday kasoo "qalin-jabisay" jaamacadaha wadanka, sida ay kusoo qoreen CV-yadoodda.

Si aad u fahanto khaladaadka qoraalka ee aanu ku aragnay CV-yadoodda iyo warqadahooda ee sababay in aanay shaqada helin, aan tusaale usoo qaadano laba qof oo dadkaas shaqada soo dalbaday ka mid ah.

(*Labadda qof ee aan tusaalaha usoo qaadanayo, magacooda dhabta ah halkan kuma xusayo, anigoo ilaalinaaya sharaftooda, jecelna in aan asturo oo aanan dadka ogaysiinin. Magacyadda aan isticmaali doonaa waa magacyo aan malle-awaaley. Laakiinse, waxaan halkan kusoo gudbinayaa qoraalkoodii ku qornaa CV-yadoodda iyo warqadahooda*).

Tusaalaha koowaad:

Wiil dhalinyaro ah ayaa markii aanu eegnay CV-giisa, markiiba waxaanu aragnay khaladkii qoraalkiisa ee ugu horeeyey intii aanaan sii akhriyin CV-ga dhamaantii. Sida caaddadda ah, CV-ga waxaa ugu horeeya ee ku qorani waxaa weeye qofka magiciisa oo saddexan. Wiilku wuxuu magiciisa u qoray sidan:

Mohamed xasan farah.

Ma arki kartaa inta khalad ee ku jira magaciisa sida uu u qoray? Dhowr khalad ayaa ku jira habkan uu u qoray saddexdiisa magac. Kow, magiciisa ugu horeeya—Mohamed—wuxuu ku qoray Ingiriisi, si sax ahna wuu u qoray. Laba, magaca aabihii wuxuu ku qoray Soomaali, waxaanu ku bilaabay xaraf-yar (**x**asan), waana khaladkii ugu horeeyey ee uu sameeyey. Saddex, magaca awoowgii wuxuu isna ku qoray Ingiriisi, waxaanu ku bilaabay xaraf-yar (**f**arah), waana khaladkii labaad ee uu sameeyo. Shuruucda qoraalku waxay dhigayaan in magacyada dadka dhamaantood lagu bilaabo xaraf-weyn (Tusaale: **X**asan ama **F**arah). Taas wuu khalday. Waayo wuxuu maggaca aabihii iyo maggaca awoowgii ku bilaabay xarfo yar-yar.

Khaladka kale ee uu sameeyeyna waxaa weeye: inuu magiciisa ugu horeeyana ku qoray Ingiriisi, magaca aabihii iyo awoowgiina uu ku qoray Soomaali. Shuruucda qoraalkuna waxay dhigayasaa inuu qofku magiciisa oo saddexan dhamaantii ku wada-qoro Ingiriisi ama uu ku-qoro Soomaali.

Shuruucda qoraalka waa ka mamnuuc ah in aad is-dhex-galiso saddex magac oo ku kala qoran laba luqadood (ama saddex luqadood) oo kala duwan. Dad aad u tirro-badan ayaana khaladkan sameeyey oo magacoodii, ama kii aabahood, ama kii awoowgood, ku bilaabay xaraf-yar, ama ku qoray luqado kala-duwan. Markii aanu aragnay in ay si khaldan u qoreen magacooda, markiiba waanu ka saarnay dadkii aanu qaadan-lahayn; sababtoo ah, qof aan si sax ah u qori-karin magiciisu, maxaa kale ee uu sixi-karaa? Qof aan magiciisa si sax ah u qori-karini, ma qaban karo shaqada aanu u baahanay in naloo-qabto.

Tusaalaha labaad:

Innan (gabadh) ayaa markii aanu akhrinay warqadeeda, waxaanu aragnay khaladaad badan oo qoraalkeeda ku jira. Kow, iyadoo meelo badan si khaldan u isticmaashay (ama aan isticmaalinba): “joogsi,” “hakad,” “xarfaha la-waa-weyneeyo,” iyo “xarfaha la-yar-yareeyo.” Laba, iyadoo meelo badan si khaldan u isticmaashay (ama aan isticmaalinba) “mareeg,” “kolmo,” “jiitin,” iyo “far-suul,” iwm. Taasina ay keento in aanu si fiican u fahmi wayno ujeeddada ama mic-naha qoraalkeeda. Aan soo qaato qaybo ka mid-ah qoraalkeedii khaldanaa.

Waxaa qoraalkeeda ay warqada kusoo qortay ka mid ahaa: “waxaan kaso Qalinjabiyay jaamacada hargaysa waxaan kaso shaqeeyey Hayado kala duwan sida aan kusoo qoray cvgayga, waxaa kale oo aan wax kasoo dhigay iskuulo kala duwan . . .”

Imisa khalad ayaa ku jira qaybtan gaaban ee aan kasoo xiggtay qoraalka innantani ay warqadeeda kusoo qortay? Kow, khaladka ugu horeeya ee ay samaysay wuxaa weeye: ereyga ay qoraalkeeda ku bilowday; waxay ku bilowday xaraf-yar “**w**axaan.” Waxay ahayd in ay ku bilowdo siddan: “**W**axaan.” Laba, khaladka kale ee ay samaysay waxaa weeye, in ay ereyga “Qalinjabin” si khaldan u qortay. Ereyga “**Q**alinjabin”

> waxay ku bilowday xaraf-weyn, waana khalad. Waayo? Ereyga "qalin-jabin" maaha magac, ama magac-u-yaal; sidaa awgeed-na, xaraf-ka ugu horeeya waxaa lagu bilaabaa xaraf-yar. Dhinaca kale, ereyga "qalin-jabin" wuxuu ku-jiraa badhtan-ka qoraalka; sidaa awgeed-na, erey aan ahayn magac, ama magac-u-yaal, oo hadana ku-jira badhtan-ka qoraalka, waxaa lagu bilaabaa xaraf-yar. Saddex, qoraalkeedan umay dhaxaysiinin wax "hakat" ama "joogsi" ah. Waa qoraal isu-furan (isku-dhex-daadsan) oo aanay kala saarin meesha ay ku dhamaadeen, ama ay ka-bilowdeen, weedhaha dhamayska-tirrani (weedhaha dhamayska-tirran waxaan ku sharaxayaa buugga cutubadiisa soo socda). Intaas oo khalad markii aanu aragnay, ayaanu markiiba innantaas ka reebnay dadkii aanu shaqada siin-lahayn.
>
> Waxaanu qoraalkeeda ka aragnay in aanay wax-aqoon ah u lahayn sharciyadda qoraalka. Sidaa awgeed-na, aanay qaban karin shaqada aanu u baahanay in ay qabato.

Inkastoo ay tusaalooyin-ku aad u badan-yihiin, labaddan tusaale ee aynu soo qaadanay waxay ina-tusayaan in marka aanu qofku aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka* ay sababto inuu shaqooyin badan oo uu heli-lahaa ku guul-daraysto. Waxaa kale oo ay ina tusayaan in aanu qofku lahayn aqoon qoto-dheer.

Aqoon la'aanta *xeerka astaamaha qoraalku* waa mid aad-iyo-aad ugu baahsan bulshada dhamaanteed; hadday noqoto meelaha ugu sareeya ee wadanka laga maamulo ilaa bulshada inteeda kale. Mar-kasta waxaad arkaysaa, qoraalo kasoo baxay madaxtooyada, xisbiyadda siyaasadda, wasaaradaha dowlada, dowladaha hoose, iskuulada, jaamacadaha, buuggaagta la daabaco, TV-yada, masaajiddada, xayeysiinta baayac-mushtarka, warbaahinta (mareegaha iyo jaraa'iddada), email-lada, iwm, oo dhamaantood ay ka buuxaan khaladaad aad u tirro-badan oo *xeerka astaamaha qoraalka* ahi. Waxaa kale oo aad arkaysaa, bulshada inteeda kale oo baraha-bulshada kusoo qoraya qoraalo ay ka buxaan khaladaad

aad u tirro-badani; sida, Facebook, Twitter, Instagram, WhatsApp, Viber iyo wixii la mid ah.

Markii aan in-badan baadhitaan ku sameeyey, waxaa iisoo baxay in dadku aanay wax aqoon-ah u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*. Waxaa jiray dad badan oo isugu jira maamuleyaal, dad masuuliyaddo kala duwan haya, iyo bulsho-weynta, oo aan su'aalo ka waydiiyey qoraalo khaldan oo ay qoreen. Waxaa jawaabahoodii iigasoo baxay dhowr arimood. Kow, dadka qaar way ogyihiin in aanay aqoonin *xeerka astaamaha qoraalka*; sidaa awgeed-na, kala-garan-maayaan in ay qoraaladooddu saxan-yihiin iyo inay khaldan-yihiin. Laakiin waxaanay haysanin cidii ka caawin-lahayd sidda saxda ah ee wax loo qoro. Laba, dadka qaar waxay u haystaan in uu qoraalkoodu saxan-yahay, maadaama aanay wax fikrad-ahba ka haysanin *xeerka astaamaha qoraalka*. Sidaa daraadeed, marka ay dadkani wax qorayaan waxay sameeyaan khaladaad aad u tirro-badan. Saddex, dadka qaarkood-na waxoogaa ayay ka yaqaanan *xeerka astaamaha qoraalka*, laakiin qaybo badan ayaa ka dhiman.

Taasi waxay ina-tusaysaa in aqoon-la'aanta *xeerka astaamaha qoraalku* ay tahay mid aad ugu baahsan bulshada dhexdeeda—heer maamul-sare ilaa bulsho-weynta. Hadaba, waxaa is weydiin-leh: sidee looga bixi-karaa aqoon-la'aanta inaga haysata *xeerka astaamaha qoraalka,* si ay bulshadeenu uga-baxdo aqoon-la'aanta *xeerka astaamaha qoraalka*?

**Sababta aan Buuggan u Qoray**

Sidaan kor-kusoo sheegnay, markii aan arkay dhibaatada qoraalka ee bulshada ku baahdey iyo baahida loo qabo fahanka *xeerka asmaaha qoraalka*, ayaan go'aansaday in aan buuggan qoro, si aan ugu faa'iideeyo bulshaddaydda Soomaaliyeed, meel kasta oo ay dunida ka joogaan. Aan soo qaato (ama aan xuso) afarta sababood ee ugu waaweyn, uguna muhiimsan, ee igu kalifay qoritaanka buuggan. Kow, waxaan arkay in dadka badankiisu (maamul-sare iyo shacab-weynuhuba) aanay wax aqoona u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*. Laba, waxaa kale oo aan arkay in aanu jirin buug laga qoray, ama sharaxaya, *xeerka astaamaha qoraalka*. Saddex, waxaa kale oo aan ogaadey in aan ardayda dugsiyda iyo

jaamacadaha loo dhigin *xeerka astaamaha qoraalka*. Afar, waxaa kale oo aan arkay in aanay shaqaalaha dowlada, culimada, ciidamada (boolis iyo military), baayac-mushtarka, bulsho-weynta iyo qaar kale oo badan aan la barin *xeerka astaamaha qoraalka.* Sidaa daraadeed, buuggani waa buug bulshada ka caawinaya sida saxan ee loo isticmaalo astaamaha qoraalka; waana buug ka jawaabaya baahidaas loo qabo fahanka *xeerka astaamaha qoraalka.*

**Muxuu Buuggani ku Barayaa?**

Guud ahaan, qoraalku wuxuu leeyahay xeerar badan oo kala-duwan, xeer walibana wuxuu leeyahay shuruuc u gaar ah (sida, naxwaha; qoraalka warqadaha kala-duwan; qoraal-ka buuggaagg-ta, iwm). Buuggani kuma baraayo naxwaha Soomaaliga, kumana barayo sida loo-qoro qoraalada kala duwan (sida: buggaagta, maqaalada, CV-ga, iwm). Buug kale ayaan ku sharixi doonaa qoraaladaas, haduu Eebe igu simo.

Buuggani wuxuu ku barayaa xeerrarr-ka caalamiga ah ee u-yaala *astaamaha qoraalka*. Astaamaha qoraalku waa *laf-dhabarta*, ama *ubucda*, qoraalka. Hadii uu naxwaha qoraalku saxan-yahay, laakiinse *xeerka astaamaha qoraal*-kiisu uu khaldan-yahay, waxay keentaa in aan la-fahmin ama si khaldan loo-fahmo qoraalka. Marka si khaldan loo isticmaalo astaamaha qoraalka, waxaa kale oo ay keentaa inay ka-dhalato khasaare aan lagasoo waaqsan. Khasaarayaasha ka dhashay marar badan oo si khaldan loo isticmaalay astaamaha qoraalku aad ayay u tirro-badan-yihiin. Inkatoo ay jiraan dhacdooyin taariikheed oo aad u tirro-badan oo ina-tusaya khasaaraha, iyo dhibaatada, ka-dhalata marka si-khaldan loo isticmaalo astaamaha qoraalka, aynu soo qaadano hal tusaale oo caan ah.

Waxaa jirta qiso dhab ah oo dhacday, oo ku tusaysa dhibaatada, iyo khasaaraha, ka-dhasha marka si-khaldan loo isticmaalo *xeerrarka astaamaha qoraalka*. Qisaddan aan halkan ku sharixi-doono, wuxuu qoraagu si khaldan u-isticmaalay astaanta *hakad* ( , ). Qoraaga warqada qoraayey wuxuu meel khaldan geliyey astaanta *hakad*, waxaanay sababtay in lagu toogto (oo la-dillo) nin aanay ahayn in la-dilo.

Qisadan waxaa luqada Ingiriisida lagu magacaabaa: "*The Comma that Killed the Man*," oo micnaheedu yahay, "*Hakad-kii Ninka Dilley*." Qisaduna sidan ayay u dhacday:

Waxaa jiray laba ciidan oo dagaalamaayey. Ciidamadii mid ka mid ah ayaa waxay qabteen nin kasoo jeeda ciidankii ay la-dagaalamayeen. Sarkaalkii qabtay ninka maxbuus-ka ah ayaa la xidhiidhay sarkaalkii kasii sareeyey oo jooga meel u jirtaa qiyaastii 500 Kiiloomitir. Wuxuu waydiiyey siday u waxay ka yeeli lahaayaan ninka maxbuuska ah ee ay hayaan. Sarkaalkii ka-sareeyey ayaa usoo jawaabay. Wuxuu usoo qoray warqad ay ku qorantay: "Kill him not**,** wait for me." Micnaheeduna yahay: "Ha dillin, ee ila sug." Sarkaalkii warqada loosoo diray wuu fahmay, ninkiina muu dillin, ee wuu xidhay uun, waxaanu la-sugaayey amar danbe oo kasoo baxa sarkaalka sare.

Muddo ka dib ayaa sarkaalkii ninka maxbuuska ah hayey lagu amray in uu ninka maxbuuska ah u gudbiyo xero ciidan oo meel kale ku-taal. Wuxuu sarkaalkii go'aansaday in uu ninka maxbuuska ah u gudbiyo xeradii ciidanka ee kale. Warqadii hore ee loosoo qoray—ee ay ku qornayd "kill him not**,** wait for me"—way ka luntay sarkaalka. Laakiin, sarkaalku wuu xasuusnaa amarkii la siiyey. Sidaa awgeed, wuxuu sarkaalkii go'aansaday inuu isagu warqada gacantiisa ku qoro si uu amarkii hore ee la siiyey ugu sheego sarkaalka cusub ee uu maxbuuska u gudbinayo. Wuxuu qoray amarkan: "Kill him**,** not wait for me." Taas oo macnaheedu noqonayo: "Dil ninka, hayla sugin."

Hadii aynu is bar-bar-dhigno labadii amar (ama fariimood) ee labada warqadood ku kala qornaa, sidan ayay noqonayaan:

**Sarkaalkii koowaad**: "Kill him not**,** wait for me."
"Ha dilin, ila sug."

**Sarkaalkii Labaad**: "Kill him**,** not wait for me."
"Dill ninka, hayla sugin."

Ma aragtaa kala-duwanaanshaha u dhexeeya labada qoraal? Sarkaalka kowaad meesha uu hakad-ka geliyey, iyo sarkaalka labaad meesha uu hakad-ka geliyey ayaa sababtay in micnihii fariintu is-bedesho, sidaana ninkii lagu dillo. Sarkaalka koowaad wuxuu hakad-ka galiyey meesha ka danbaysa kelmeda “not,” sarkaalka labaadna wuxuu hakad-ka galiyey meesha ka danbaysa “him,”.

Dhibta waxaa keenay, sarkaalka labaad oo aan aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*; waxaanu aqoon u lahayn meesha ku haboon ee uu hakad-ku galo.

Sheekdani waxay ina tusaysaa khatarta iyo is-fahan-waaga ay keento marka uu qoraagu si khaldan u isticmaalo *xeerka astaamaha qoraalka*. Dhibaataduna kuma koobna in hakad-ka oo kaliya si khaldan loo isticmaalo; laakiin, marka astaamaha qoraalka dhamaantood si khaldan loo isticmaalo, dhibaatadu way dhacdaa.

*Xeerka astaamaha qoraalka* oo qofku si khaldan u isticmaalo (ama aanu isticmaalin) waxay keentaa:

1. in ay ka dhalato khatar, ama khasaare, aad u wayni,
2. in shaqo uu qofku dalbatay uu ku-guul-daraysto; sababtoo ah, qoraalkiisa ama qoraalkeeda oo khaldan owgii (sida aynu ku aragnay labada tusaale ee kor ku xusan),
3. in aan la-fahmin qoraalka micnihiisa,
4. inuu qofku fikradiisa, ama dooddiisa, u gudbin-kari-waayo bulshada inteeda kale,
5. in sumcada qofku hoos u-dhacdo oo loo arko qof aan aqoon-lahayn,
6. inuu qofku dareemo niyad-jab iyo kalsooni-darro,
7. inuu qofku ka-qajilo (ku dhici-waayo) in uu wax-qoro,
8. inuu qofku ku noolaado canaan iyo is-ciil-kaanbi.

Maanta aduunku wuxuu noqday “tuulo-yar” oo isku-wada xidhan; waxaana isku-xidhnaanta aduunka aad u-fududeeyey heerka-sare ee laga-gaadhay tignooloji-yadda (technology) casriga ah. Tignooloji-yaddan casriga-ahi waxay fududaysay xidhiidhkii aduunka. Adiga oo wadankaaga hooyo jooga ayaa waxaad shaqaale ka-noqon-kartaa shirkad Maraykan ah oo degen wadanka Maraykanka. Tusaale ahaan, iminka waxaa jira dad badan oo Hindi ah oo u shaqeeya shirkado Maraynkan ah, oo deggen wadanka Maraykan-ka. Dadkan shaqaalaha ah ee Hindidda ahi weligood may teggin Marykan. Waxa u sahlay in ay shirkad Maraykan-ka deggen u shaqeeyaan (iyagoo Hindiya jooga) waxaa weeye, tignoolojiyadda casriga ah iyo iyagoo shaqaalahaasi aqoon fiican u leh shaqadooda iyo *xeerka astaamaha qoraalka*.

Maadaama uu aduunkii sidaa isugu-xidhmay, waxaa la-isku-raacay in qowmiyaddaha aduunka deggen dhamaantood ay bartaan oo raacaan *xeerka astaamaha qoraalka*, si uu dadka kala duwan ee aduunka deggeni isu fahmo, lagana foojignaado khaladaad iyo is-fahanwaa dhaca. Shuruucdaas qoraalkuna ay-noqdaan qaar lagu taba-barro ardayda, shaqaalaha shirkadaha iyo dowladaha, ciidamada, war-baahinta, shacab-waynaha, iyo cid walba.

Marka adigoo deggen wadankaaga hooyo (ama wadan kaleba) aad qoraal kula xidhiidhayso qof shaqaale ah oo jooga wadanka Maraykan-ka, Ingiriiska, ama wadanka Jabaan, waxaad ku khasbantay in aad si saxan u isticmaasho *xeerka astaamaha qoraalka*, oo runtii ah qaybta ugu muhiimsan qoraalkaaga. Hadii aad khalado meelo yar-yar oo naxwaha luqadda ah, akhristahaagu wuu fahmi kara ujeeddadaada. Laakiinse, hadii aad khalado *xeerka astaamaha qoraalka*, waxaa dhacaysa in aan la-fahmin ujeeddada qoraalkaaga, ama si khaldan loo fahmo, taasina ay keento khasaare aan lagasoo waaqsan.

Waxaa kale oo jira in wadankeena ay joogaan hay’addo, dhakhtaro, shirkado, iyo iskuulo ajnabi ahi—qaar Reer Galbeed ah, qaar Afrikaan ah, qaar Carab ah, iyo qaar dunida inteeda kala ahiba, mustaqbalka-dhowna ay aad ugusoo badan-doonaan wadanka. Marka aad doonayso inaad shaqo u raadsato hay’addahaas, dhakhtaradaas, shirkadahaas, iyo iskuuladaas ajnabiga ah, meelaha

ugu horeeya ee lagaa eegayaa, laggugguna qiimaynayaa, waxaa weeye: qoraalka, oo ay ka dheehanayaan aqoonta aad u-leedahay *xeerka astaamaha qoraalka*, taas oo tilmaamaysa heerka aqoontaada. Taasi waa sababta ay dadka u waydiiyaan inay warqad (cover letter) soo qoraan; ka dibna, imtixaan qoraal ah ay uga-qaadan. Marka ay arkaan in aanu qofku aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*, markiiba waxay go'aansadaan in aanay qofkaa shaqaalaysiinin.

Ta kale, marka uu ardaygu doonaayo in uu jaamacad wadanka dibediisa ah dalbado, waxa ugu horeeya ee ay jaamacadu eegtaa waxaa weeye: habka uu wax u qoro ardaygu, oo ay ka dheehdaan aqoonta uu u leeyahay *xeerka astaamaha qoraalka* (marka laga yimaado heerkiisa-aqooneed ee kale).

Barashada iyo fahamka *xeerka astaamaha qoraalku* wuxuu, xaqiiqdii, qayb aad u weyn ka qaataa guushaada nololeed. Waxaa kale oo qoraalkaaga laga dheehanayaa heerkaaga-aqooneed. Marka aanad baranin, ama aanad aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka* waxay qayb aad u weyn ka qaadataa khasaare, dib-u-dhac iyo guul-darro nolooleed oo kaala kulma meelo-badan oo nolosha ka mid ah. Hadii aad doonayso in aad noloshaada guulo-badan ka-gaadho, waxaa muhiim ah in aad si fiican u barato, una fahanto, *xeerka astaamaha qoraalka*. Duniddan casrigga ah ee isku-xidhantay, kuuma suurto-galayso in aad guulo baddan ka gaadho hadii aanad aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*.

**Qaabka uu Buugu u Qoran-yahay**

Buuggani wuxuu u qoran-yahay qaab aad u fudud oo aan ugu-tallo-galay in qof-kasta oo bulshada ka mid ihi si fudud u fahmi karo. Ta koowaad, waxaan ku qoray af-Soomaali aad u fudud oo uu qof waliba fahmi karo. Waxaan iska ilaaliyey—oo aan ka taxadirray—inaan isticmaalo ereyo cul-culus oo Soomaali ah. Ta labaad, waxaa jiray qaabab badan oo kala duwan oo aan markii hore doonaayey inaan u qoro buuggan; laakiinse, waxaan dareemay in hadii aan u qoro qaababkaa kale in ay dadka qaarkood ku adkaanayso in ay si fudud u fahmaan.

Sida ka muuqata "Tusmada Buuga," buuggani wuxuu ka kooban-yahay toddoba-iyo-toban (17) cutub. Cutub waliba wuxuu si gaar ah, oo dhamays-tirran, u sharaxayaa "astaan" gaar ah. Cutub walibana wuxuu ka kooban-yahay qaybahan:

- Bilowga cutubku waxaa ku-qoran magaca astaanta ee uu sharaxayo cutubku. Ka dib, wuxuu cutubku sharaxaad ka bixinayaa astaanta qoraalka ee uu sharaxaayo, iyo inta nooc ee loo istcmaalo astaantaas.
- Intaas ka dib, marka uu cutubku sharaxo astaanta qoraalka, waxaa ku xigga laba qoraal oo isku mid ah. Labadaas qoraal, ka hore (ka sare) wuxuu u qoran-yahay si KHALAD ah, oo waxaa si khaldan loo isticmaalay astaanta qoraalka ee uu cutubku sharaxayo. Qoraalka ku xigga (ka hoose) wuxuu u qoran-yahay si SAX ah, oo waxaa si sax ah loo isticmaalay astaanta qoraalka ee uu cutubku sharaxayo. Tusaale ahaan, cutubka sharaxaya "Joogsi," waxaa ku jira qoraal si-khaldan loo isticmaalay "joogsi-ga," iyo qoraalkii oo hadana si sax loo isticmaalay astaanta "joogsi-ga." Cutubka sharaxaya "Hakad," isna waxaa ku jira qoraal si-khaldan loo isticmaalay astaanta "hakad," iyo qoraalkii oo si saxan loo isticmaalayo astaanta "Hakad." Waxaan ardayga (ama akhristaha) laga doonayaa in uu marka hore isku-dayo inuu saxo qoraalka sida khaldan loo isticmaalay astaanta qoraalka. Marka uu saxo qoraalka khaldan, ka dib uu bar-bar-dhiggo qoraalka saxda ah si uu u ogaado inuu fahansan-yahay isticmaalka saxda ah ee astaantaas. Qoraaladan waxaan ugu talo-galay inuu qofku tijaabiyo aqoonta uu u-leeyahay astaaanka cutub-ku ka hadlayo, inta aanu akhriyin ama baranin isticmaalka xeerka astaantaas.
- Marka uu akhristuhu imtixaankaas yar ka gudbo, waxaa bilaabmaaya sharaxaad uu cutubku ka bixinaayo xeerrarrka (ama shuruucda) ay leedahay astaanta qoraalka ee uu cutubku sharaxayo, iyo weliba sida loo isiticmaalo iyo sida aan loo isticmaalin astaantaas.

- Sharaxaada astaantu markay dhamaato, waxaa ku xigga qoraal gaaban oo ciwaankiisu-yahay “Tallo.” Waa qoraal aan tallo ku-siinaayo ardayga (ama akhristaha), runtiina aad muhiim u ah. Waxaa akhristaha aan kula talinayaa inuu akhriyo jarraaiddada, mareegaha (websites), qoraalada kasoo baxa hay’addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsatooyinka, hay’addaha samo-falka, iwm. Ka dib, akhristuhu uu u-fiirsado sida loo-isticmaalay astaanka qoraalka ee uu bartay (akhriyey). Ka dibna, uu baadho inta khalad ee ku jira qoraaladaas uu akhriyey, isagoo tix-raacaya casharkii uu soo dhigtay.
- Cutubku wuxuu kusoo gebo-geboobayaa (ama kusoo dhamaanayaa) laylis (homework). Laylis-ka waxaa lagguggu waydiinayaa in aad saxdo qoraalo si khaldan loo isticmaalay astaanta qoraalka ee uu cutubku sharaxayo. Si aad u hubiso in aad saxday qoraaladaas layliska ah, waxaad eegtaa boggagga ugu danbeeya ee buugga oo ay ku qoran-yihiin qoraaladaas layliska jawaabtoodu. Marka hore, isku-day in aad layliska ka shaqayso oo aad saxdo qoraladaas sida khaldan loo isticmaalay astaanta.

Cabdiraxmaan Xuseen Daa’uud

# SHAASHADA YOUTUBE IYO FACEBOOK

Markii aan dhameeyey qoraalka buuggan, waxaan hadana sameeyey in aan duubo fiidyow (video clips) aan ku sharaxayo buuggan oo maqal-iyo-muuqaal ah. Sida aad ku aragtay Tusmada Buugga, buuggani wuxuu ka kooban-yahay 17 cutub, oo cutub waliba sharaxayo astaan ka mid ah astaamaha qoraalka. Fiidyow-yaddan aan duubayna waxay ka kooban-yihiin 17 fiidyow, oo uu fiidyow-waliba si maqal-iyo-muuqaal ah u sharaxyo astaan ka mid ah astaamaha qoraalka. Fiidyow-yaddani waxay ku salaysan-yihiin habka uu u qoran-yahay buuggani. Si aad u daawato fiidyow-yaddan, waxaad booqataa bogga **Youtube**. Ka dib, waxaad ku qortaa: **Xeerka Astaamaha Qoraalka**. Waxaad ka doorataa astaanta qoraalka ee aad doonayso in aad si qoto-dheer u fahanto.

Waxaa kale oo jira **Facebook Page** uu leeyahay buuggani. Isagna waxaa ku jira fiidyow-yaddaas aan ku diyaariyey Youtube-ka. Marka aad booqato boggaggaas Facebook iyo Youtub, labadaba waxaad iigu dhaafi-kartaa wixii su’aalo, talooyin, fikrado, iyo aragtiyo ahba. Maxaa igu kalifay in aan duubo fiidyow-yaddan?

In aan duubo fiidyow-yaddan waxaa igu kalifay waxaa weeye: waxaynu wada ogsoon-nahay in dadka Soomaalida badan-koodu aanay ahayn dad buuggaagg-ta akhriya. Dadka Soomaalidu waa dad warrarrka, iyo wax-walba, isugu gudbiya hadalka (oral society). Inkastoo ay taasi jirto, hadana waxaa iminka soo badanaya dadka wax akhriya; waxaana muuqata in dhaqanka akhrintu uu sare u kacay. Sidaa awgeed, waxaan go’aansaday in maadaama aynu hadalka wax isugu-gudbino, oo akhrintu inagu yartahay, aan buuggan dadka aan wax akhriyin ugusoo gudbiyo maqal-iyo-muuqaal.

Runtii wakhti aad-u-badan, oo dheer, ayaa iggagga baxay qoraalka buuggan iyo duubista fiidyow-yadaas. Wax lacag ah, ama aduunyo ah, kuma doonayo. Hay’add, shirkad, ama ururro wax

dhaqaale ah aan kaga-qaatayna ma-jiraan. Waxaa kaliya ee igu kalifay waxay ahayd: waxaan ka damqaday dadkayga oo aan arkay baahida ay u-qabaan in ay fahmaan xeerka astaamaha qoraalka. Ka dibna, aan sidayda isu xil-qaamay oo masuuliyad iska saaray in aan fahansiiyo intii aan awoodo. Hor-Illaahay iyo in uu buuggani ii-noqdo *Sadaqatul-Jaariya* ayaan uga jeedaa. Illaahayna hay aqbalo, aamiin!

Hadii ay jirto wax su'aalo, talooyin, ama sharaxaad siyaaddo ah oo aad u baahantay, waad ilasoo xidhiidhi-kartaa, si aan kuusii caawiyo oo aan kuugu sharaxo meelaha uu mad-madowgu kaa-galo, ama aad fahmi waydo.

Waxaad igalasoo xidhiidhi kartaa bartaydda Youtube, Facebook, ama email-kayga: abdihdaud@yahoo.com

Mahadsanid,
Cabdiraxmaan Xuseen Daa'uud

# CUTUBKA 1

## *Xaraf-ku-Dheg*

XARAFKA LA WEYNEEYO WAXAA luqada Ingiriisida lagu yidhaahdaa: “capital letter.” Hadaba si loo helo erey u dhigma “capital letter” oo af-Soomaali ah, waxaa lagama-maar-maan noqotay in la sameeyo erey-bixin cusub. Ereyga u dhigma “capital letter” ee af-Soomaaliga ahi waxaa weeye “xafar-ku-dheg.” Erey bixintanna waxaa la sameeyey wakhtigii dowladii hore ee Soomaaliya. Xaraf-ku-dheg micnihiisu waxaa weeye: xaraf ka weyn xarfaha kale ee ka horeeya, ka danbeeya, ama uu ku-dhex-jiro; xarafkaas oo ka dhex-muuqda xafaraha kale, una muuqda inuu khadka qoraalku “ku-dheggey.” Waxaa suurto-gal ah in la helo erey kale oo kagasii haboon ereyga “xaraf-ku-dheg.” Marka aad cutub-kan akhriyeyso, waxaad arki-doontaa laba erey oo kala ah “xaraf-ku-dheg” iyo “xarfaha-la-waaweyneeyo.” Labadaas erey ee “xaraf-ku-dheg” iyo “xarfaha la weyneeyo” isku si ayaynu ugu isticmaalaynaa buuggan. Waxaan uga jeedaa, marka aad aragto ereyga “xaraf-ku-dheg” waxaan uga jeedaa “xarfaha-la-weyneeyo.” Sidoo kalena, marka aad aragto “xarfaha la weyneeyo,” waxaan uga jeedaa “xaraf-ku-dheg.”

Marka wax la qoraayo, waxaa jira xarfo-la-waa-weyneeyo iyo xarfo-la-yar-yareeyo. Xarafka la weyneynaayo la’iskama weyneeyo; laakiin, waxaa jira sababo iyo ujeedooyin loo weyneeyo. Marka xarfaha la weyneeyo, waxay tilmaamaan, ama ay asteeyaan, micne-yaal kala-duwan oo aad u muhiim ah. Sababaha ama ujeedooyinka xarfaha loo waaweyneeyo waxaynu ku sharixi doonaa tusaalooyinka soo socda.

Hadii xarfo la-weyneeyo aad ka dhigto xarfo yar-yar, ama xarfo ay tahay in la yar-yareeyo aad ka dhigto xarfo waa-weyn, waxaa si khaldan loo fahmayaa ujeeddada qoraalkaaga. Micnaha qoraalkaagu wuu is-bedelyaa, oo micnihii aad u jeeday wuu bedelmayaa. Ta kale, waxaa qoraalkaaga laga arkayaa in aad tahay qof aan aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*.

Marrarka qaarkood ayaa waxaan arkaa qoraalo uu ciwaankoodu isoo jiito; waxaanan jeclaystaa in aan akhriyo qoraaladaas. Laakiinse, marka aan arko in qoraagu si khaldan u isticmaalay *xeerka astaamaha qoraalka*, markiiba waan joojiyaa in aan sii akhriyo qoraalkaas. Sababta aan u joojiyaana waxaa weeye: mar hadii aanu qoraagu garanaynin-ba isticmaalka *xeerka astaamaha qoraalka*, aqoon kale oo aan kasii faa'iidayaa in aanay jirin. Taas micnaheedu waxaa weeye: isticmaalka *xeerka astaamaha qoraalka* waxaa laga dheehdaa aqoonta uu leeyahay qoraagu.

◆◆◆

## AQOONTAADA TIJAABI

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah; qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo si SAX ah u qoran. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

**Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).

## KHALAD

saadam-baad garan dhallin illeeye murtiddan waxaa loo cuskadaa, qofka tallada kugu diida, murtiddan waxaa bixiyey nin la

odhan jiray dhallin illeeye oo qarnigii 19 aad horaantiisii noolaa dhallin wuxuu ahaa nin aftahamo badnaa oo hadalka afkiisa kasoo baxaaba uu ahaa xikmad ama maad lagu qoslo  dhallin wuxuu kaloo ahaa nin dagaal neceb sidaa daraadeedna waxa lagu xaman jiray cabsasho ama fulaynimo dhalin murtiddan kor ku xusan wuxuu bixiyey mar ay isaga iyo saaxiibbadii ku balameen in ay duullaan qaadaan laakiin dhallin raali kamuu ahayn in la duullo markay laba cisho ka hadhsanayd maalintii duullaanka ay qaadi lahaayeen ayaa dhallin oo faras ku joogaa la kulmay nin ka mid ah ragii duullaanka lagu qaadi lahaa ninkii oo dhallin ka maadaysanaaya ayaa dhallin ku yidhi dhallinoow faraskaagu ma dheereeyo saadan-baad garran ayuu dhallin ugu jawaaabay ninkii ninkii ayaa gartay in saadanbe lagusoo duullaayo. ninkiina wuxuu war geliyey asxaabtiisii in lagusoo duulaayo sidaas ayaanu duullaankii ku baaqday.

**SAX**

“**SAADAM-BAAD GARAN**”

Dhalin Illeeye

Murtiddan waxaa loo cuskadaa, qofka tallada kugu diida.

Murtiddan waxaa bixiyey nin la odhan-jiray “Dhallin Illeeye” oo qarnigii 19$^{aad}$ horaantiisii noolaa. Dhallin wuxuu ahaa nin aftahamo badnaa, oo hadalka afkiisa kasoo baxaaba uu ahaa xikmad ama maad lagu qoslo. Dhallin wuxuu kaloo ahaa nin dagaal neceb; sidaa daraadeedna, waxa lagu xaman jiray “cabsasho” ama “fulaynimo.”

Dhalin murtiddan kor-ku-xusan wuxuu bixiyey mar ay isaga iyo saaxiibbadii ku balameen in ay duullaan qaadaan. Laakiin, Dhallin raali kamuu ahayn in la duullo.

Markay laba cisho ka hadhsanayd maalintii duullaanka ay qaadi-lahaayeen, ayaa Dhallin oo faras ku joogaa la kulmay nin ka mid ah ragii duullaanka lagu qaadi lahaa. Ninkii oo Dhallin ka maadaysanaaya, ayaa Dhallin ku yidhi: "Dhallinoow faraskaagu ma dheereeyo." "Saadan-baad Garran," ayuu Dhallin ugu jawaaabay ninkii. Ninkii ayaa gartay in saadanbe lagusoo duullaayo. Ninkiina wuxuu war-geliyey asxaabtiisii in lagusoo duulaayo. Sidaas ayaanu duullaankii ku baaqday.

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Xaraf-ku-Dheg*

1. *Xaraf **WEYN** ku bilow magacyada Illaahay (SW), mar kasta.*

Tusaale:

- **I**llaahoow noo gar-gaar! Aamiin!
- **J**abbaarow dunidan **A**diga ayaa iska leh. Cid aan **A**diga ahayna kama taliso.
- Marxuumka waxaanu **E**ebe uga baryaynaa in uu u naxariisto.
- Nimcadaada nagu manayso **R**axmaanoow.
- Waar **I**llaahay ka yaaba!
- Yaa **R**axmaan! Yaa **C**asiis! Yaa **M**aalik!

**Digniin**: *Marka aad qorayso magac-u-yaal, ama erey tilmaamaya, Illaahay (SW), laakiinse aan ka mid ahayn magacyada Illaahay (SW), ku bilow Xaraf Weyn.*

Tusaale:

- **R**abiyoow noo naxariiso, **A**diga ayaan ku magan-galaye. (**U fiirso**: *ereyga "Adiga" waxaan ku bilaabay xaraf weyn; sababtoo ah, waxaan ka hadlayaa waa Illaahay [SW]. Marka aad ka hadlayso Illaahay, magac-yadiisa, iyo erey kasta oo tilmaamaya Illaahay, waxaad ku bilowdaa xaraf WEYN. Waa ixtiraam iyo weyneyn lagu muujinayo awooda Illaahay [SW]*). *Laakiin, marka aad qorayso macag-u-yaal aan ahayn Illaahay, waxaad ka dhigaysaa xaraf-yar)*.
- **I**llaahay (SW) umadiisa **I**saga ayaa u kala cadaalad qaadaya. **E**ebow, aniguna waxaan ku kalsoonay **A**diga cadaaladaada. (**U fiirso**: *ereyga "Isaga" [oo ah magac-u-yaal tilmaamaya Illaahay], oo weliba ku jira badhtan-ka qoraalka, waxaan ku bilaabay xaraf-weyn; sababtoo ah, waa magac-u-yaal tilmaamaya Illaahay)*.

2. *Xaraf **WEYN** ku bilow weedhaha dhamays-tirran. (Weedhaha dhamayska-tirrani waxaa weeye: weedho ka kooban ereyo dhowr ah oo micne buuxana samaysanaya "sentence").*

Tusaale:

- **M**aanta waxaan tegay suuqa.
- **W**axaan ahay arday dhigta jaamacada.
- **I**minka guriga ayaan joogaa.
- **B**errito waxaan u safrayaa Magaalada Burco. **K**a dib waxaan tegayaa Magaalada Laas-caanood.
- **H**ay'addaha samo-falku wadankeena aad ayay ugu badan-yihiin. **M**a faa'iido ayay inoo leeyihiin? **M**ise khasaare ayay inoo leeyihiin?
- **W**axaa la yidhi, "**D**oqon hana-gar-gaarsan, hana-u-gar-gaarin."

- **D**ugsiyada wadanka wax-barashadoodu miyey hoosaysaa? **M**ise way saraysaa? **M**ise waa dhex-dhexaad?
- **S**haqadu waa sharaf. **W**aa in aad shaqaysataa.

**Digniin**: *Hadii qoraalka aad ku bilaabayso "lambar" (sida 3, 4, 5, 18, iwm), waxaad u qortaa xarfo-ahaan, ha u qorin lambar-ahaan)*.

**SAX**: Shan gaadhi ayaanu kiraysanay.

**Khalad**: 5 gaadhi ayaanu kiraysanay.

**SAX**: Laba-iyo-siddeetan qof ayaa kasoo qayb-galay shirkii maanta.

**Khalad**: 82 qof ayaa kasoo qayb-galay shirkii maanta.

3. *Xaraf **WEYN** ku bilow magac-yadda.*

Tusaale:

- **Magaca dadka**.
  - Ardaygan cusub magiciisa waxaa la yidhaa **C**ali **X**asan **D**ucaale, anigana magacayga waxaa la yidhaa **M**axamed **F**aarax **Y**uusuf.
  - Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaalilaan Mud. **A**xmed **M**axamed **M**axamuud (**S**iilaanyo).
  - Nabigeenii suubanaa ee **M**axamed (CS).
  - Hambalyo! Hambalyo! Hambalyo! Waxaan halkan hambalyo uga diraynaa **S**aalax **C**igge **G**uuleed iyo marwadiisa **C**anbaro **G**eedi **H**aybe oo meherkoodu uu maanta ka dhacay Caasimada Muqdisho, Soomaaliya.
  - Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha Mud. **C**abdirxmaan **C**ali **D**ucaale.

- **Magacyadda maal-maha iyo bilaha**.

- Waxaan dhashay <u>I</u>sniin oo ahayd 4tii <u>A</u>briil ee 1980kii.
- Wuxuu dhashay <u>I</u>sniin, 04 <u>A</u>briil, 1980.
- Maanta waa maalin <u>S</u>abti ah, bishuna waa <u>M</u>aarso.
- Af-genbiggii <u>S</u>oomaaliya wuxuu dhacay <u>S</u>alaasa, 21 <u>O</u>ktoobar, 1969.
- Maalin-kasta oo <u>J</u>imce ah waxaan tagaa masaajidka weyn.
- <u>M</u>aal-maha <u>K</u>hamiista iyo <u>J</u>imcaha waxaan ahay fasax oo ma shaqeeyo.
- Waxaan imtixaanka gelayaa <u>S</u>alaasada ugu danbaysa bisha <u>M</u>aarso, haduu Alle idmo.

- **Magacyadda qaaradaha, wadamada, magaalooyinka, tuulooyinka**.
  - <u>H</u>argaysi waa magaalada ugu weyn <u>S</u>oomaaliland.
  - <u>Q</u>aarada <u>A</u>frika waxaa ku yaala 54 wadan.
  - Waxa ay <u>S</u>alaxley ku taalaa <u>S</u>oomaaliland.
  - <u>C</u>aasimadda <u>S</u>oomaaliya waa <u>M</u>uqdisho.
  - Waddamo badan oo aduunka ah ayaan soo arkay: <u>S</u>ucuudiga, <u>I</u>ngiriiska, <u>T</u>alyaaniga, <u>S</u>hiinaha iyo <u>J</u>armalka.
  - <u>Q</u>aarada <u>Y</u>urub imisa wadan ayaa ku yaala?
  - Keebaa weyn labada qaaradood ee <u>K</u>oonfurta <u>M</u>araykanka iyo <u>W</u>aqooyiga <u>M</u>araykanka?
  - Beri hore ayaa waxaan booqday <u>T</u>uulada <u>C</u>adaada.

- **Magacyadda xayawaanka**.
  - Awr-kayga waxaa la yidhaa <u>C</u>adaawe.

- Bisada jaarka waxaa la yidhaa Idho-cad.
- Faraskii uu jeclaa Maxamed Cabdulle Xasan waxaa la odhan-jiray Xiin Finiin.
- Waxaan leeyahay diggaaggad yar oo la yidhaahdo Uur-cad.
- Ri'da jiiraanka (deriska) waxaa la yidhaa Kolmo-ley.
- Xaafada jiiraanka (deriska) waxaa jooga e'y aad u weyn oo la yidhaa Coon.
- Bisadayadda Casuuso waan jecelay.

- **Magacyadda meerayaasha**.
  - Inta ilaa iminka la "og-yahay," waxaa jira sagaal meerayaal: Meerkuri, Fiinas, Dhul, Maaris, Jubitar, Saaturan, Yuraanus, Nebtuun iyo Buluuto.
  - Dhulku wuu ka yar-yahay Jubitar.
  - Maaris iyo Dhulka keebaa weyn?
  - Fiinas wax yar ayuu ka yar-yahay Dhulka.

- **Magacyadda webiyadda iyo baddaha.**
  - Webigga Juba wuu ka weyn-yahay Webiga Shabeele.
  - Webigga Niilku wuxuu dhex-maraa Suudaan.
  - Webigga loo yaqaano Congo River (Webiga Koongo) waa webigga igu qotodda-dheer Qaarada Africa.
  - Sida la sheego, webigga aduunka ugu dheeri waa Webigga Amison.
  - Aduunka waxaa ku yaala shan baddood oo waaweyn: Bad-weynta Hindiya; Bad-weynta Baasifig; Bad-weynta Atlaantic; Bad-weynta Aartic; iyo Bad-weynta Koonfureed.
  - Bad-weynta Atlantic way ka weyn-tahay Bad-weynta Hindiya, inkastoo Bad-weynta Atlantic ay

ka yar-tahay Bad-weynta Baasifig.

- **Magacyadda wadooyinka**.
    - Waddada Cad waxay ku taalaa Caasimada Hargaysa.
    - Waddada ugu dheer Burco waxaa la yidhaa Siirroo-ga.
    - Caasimada Muqdisho waxaa ku jaala Waddada Makka al-Mukarama.
    - Caasimada Hargaysa waxaa dhex-marta Waddada Tog-dheer.
    - Caasimada Muqdisho waxaa ku yaala Jidka Soddonka.

- **Magacyadda dhismayaasha caanka ah**.
    - Cimaaradda City Center waxay ku taalaa Caasimada Hargaysa.
    - Masjidka Muste-jaamacu wuxuu ku yaalaa badh-tanka Caasimada Hargaysa.
    - Cimaarada Deero Mall waxay ku taalaa badh-tamaha Caasimada Hargaysa.
    - Hudheelka Qurtuba wuxuu ku yaalaa Xaafada New Hargaysa ee Caasimada Hargaysa.
    - Dhakhtarka International wuxuu ku yaalaa Xaafada Masalaha ee Caasimada Hargaysa.

- **Magacyadda buuraha**.
    - Buurta ugu dheer Afrika magaceeda waxaa la yidhaa Kilimanjaaro.
    - Buurta ugu dheer Soomaaliland waxaa la yidhaa Surad.

- Buurta Gacan-libaax waxay ku taalaa Soomaaliland.
- Buurta Gollis waa buur aad u dheer.
- Sida la sheegay, Buurta Aferest (Averst) ayaa aduunka ugu dheer.

- **Magacyadda hay'addaha**.
  - Hay'adda Social and Animal Welfare Service (SAWS) waxay ka howl-gashaa Caasimada Hargeisa.
  - Hay'adda Horn of Africa Voluntary Youth Committee (HAVOYOCO) waa hay'ad ka howl-gasha Caasimada Hargaysa.
  - Somaliland National Youth Organization (SONYO) waa hay'adda dhalinyarrada Soomaaliland.
  - Hay'adda World Food Organization waa hay'ad aad u weyn.

- **Magacyadda jaamacadaha**.
  - Waxaan kasoo qalin-jabiyey Jaamacada Camuud.
  - Waxaan macalin ka ahay Jaamacada Hargaysa.
  - Inan (wiil) aanu walaalo nahay wuxuu dhigtaa Jaamacada Golis, innan (gabadh) aanu walaalo nahayna waxay dhigataa Jaamacada Admas.
  - Jaamacada Harvard waxay ka mid tahay jaamacadaha ugu waa-weyn Wadanka Maraykanka.
  - Wadanka Ingiriiska waxaa ugu weyn Jaamacada Oxford.

- **Magacyadda xarumaha ganacsiga**.
    - **S**hirkada **D**ahabshiil waxay soo kordhisay qalab casri ah.
    - Telefoonada wadanka lagu isticmaalo badankooda waxaa iska leh **S**hirkada **T**elesom.
    - Wiigan soo socda waxaanu shir ku-leenahay **M**aansoor **H**otel, wiiga soo socdana waxaanu shirka labaad ku qab-sanaynaa **A**mbassador **H**otel.
    - Aniga Internet-ka guriga iigu jira waxaan kasoo gashaday **S**hirkada **S**omcable.

- **Magacyadda kooxaha ciyaaraha**.
    - Sanadkii 2011, waxaa ciyaaraha gobolada Soomaaliland isugu yimi: **K**ooxda **G**obolka **A**wdal, **K**ooxda **G**obolka **H**awd, **K**ooxda **G**obolka **G**abiiley, **X**ookda **G**obolka **S**ool, **K**ooxda **G**obolka **T**ogdheer, **K**ooxda **G**obolka **S**anaag, **K**ooxda **G**obolka **S**aaxil, iyo **K**ooxda **G**obolka **M**aroodi-jeex.
    - Kooxaha ugu waa-weyn Wadanka Ingiriiska ayay ka mid tahay **K**ooxda **M**anchester **U**nited.
    - **K**ooxda **R**eal **M**adrid wadan-kee ayaa iska leh?
    - Wadanka Isbayn (Spain) ayaa iska leh Kooxda **FC B**arcelona.

- **Magacyadda diyaaraddaha, maraakiibta, tareenadda, iwm**.
    - **D**iyaaradda **I**mareetis (**E**mirates) waa diyaarad aad u fiican.
    - **D**iyaaradda **D**aalo **A**irlines waa diyaarad gaar loo leeyahay.

- Wadanka Itoobiya waxay leeyihiin diyaaradaha Ethiopian Airlines.
- Markabkii ugu dagaalka badnaa ee Wadanka Jermani wuxuu ahaa Bismark.
- Tareenka Lunatic Express waa tareenka ugu caansan Wadanka Kiiniya.
- Markaan kusoo socday Dubaay (Dubai), waxaa Caasimada Hargaya aan kasoo raacay Diyaaradda Fly Dubai.

- **Magacyadda allaabadda lasoo saaro (la sameeyo)**.
  - **S**aliida Sabaad Sesame waxaa lagu sameeyaa Wadanka Soomaaliland.
  - Khirkad ku taala Soomaaliland ayaa soo saarta saliida taimaha ee loo yaqaano A-haibeh.
  - Biyaha Saxansaxo waxaa lagu sameeyaa Soomaaliland.
  - Caanaha Nido waxaa lagu sameeyaa Wadanka Holland.
  - Gaadhiga Toyota waxaa sameeya Wadanka Jabaan.
  - Computer-ka Mac waxaa sameeya Wadanka Maraykanka.

- **Magacyadda maalmaha dabaal-degga**.
  - Maalintee ayaad debaal-degtaa: Ciida Carafa, Maalinta Xoriyada, Maalinta Calanka, Maalinta Haweenka, mise Maalinta Caruurta?
  - Sanadkan (2017) looma dabaal-deggayo 18 May.
  - Waa in aynu xusnaa Maalinta Shaqaalaha Aduunka.

    - Markii aan yaraa, waxaanu u debaal-deggi jirnay Kacaankii 21kii Oktoobar.

- **Magacyadda tilmaamaya dhacdo taariikheed**.
    - Noloshu way adkaatay markii ay dhacday Abaartii Daba-dheer.
    - Abaartii Hargo-cuna xoolo aad u badan ayaa dhintay.
    - Dagaalkii Labaad ee Aduunka waxaa ku dhintay dad aad u tirro-badan.
    - Dowladii Dhexe ee Soomaaliya waxay bur-burtay 1991kii.
    - Soomaaliland waxay madax-banaanideedii lasoo noqotay 1991kii.

- **Magacyadda diimaha**.
    - Diimo badan ayaa aduunka ka jira, waxaana ka mid ah: Islaam, Kiristan, Hindu, Budhiis, Shinto, iwm.
    - Diinta ay qaataan (ku biiraan) dadka ugu tirrada-badan ee aduunku waa Diinta Islaamka.
    - Soomaalida 100% waa dad haysta Diinta Islaamka.
    - Diinta Shinto waxaa haysta dad ku nool Wadanka China.
    - Diinta Kiristaanku waxay u kala baxdaa firqaddo aad u tirro-badan.
    - Diinta Yuhuuda waxaa haysta dadka Yuhuuda ah.

- **Magacyadda luqaddaha**.

- Wakhtiggan aynu ku jirno, luqadda caalamiga ah ee aduunku ku xidhiidhaa waa **L**uqadda **I**ngiriisiga.
- Qur'aanku wuxuu kusoo deggay **L**uqadda **C**arabida.
- Waxaan ku hadlaa **I**ngiriisi, **C**arabi, **F**aransiis, iyo **R**uush.
- Wadanka Jabuuti, waxaa wax lagu bartaa, dowladduna ku shaqaysaa **L**uqadda **F**aransiiska.
- Barashada **L**uqadda **X**abashigu miyey ka adagtahay barashada **L**uqadda **O**romada?

- **Magacyadda qoomiyadaha**.
  - Waxaan ahay **S**oomaali.
  - **S**ucuudiga waxaa ku nool dad Carab ah.
  - **M**araykanka waxaa ku nool qowmiyaddo kala duwan.
  - **I**ngiriisku isagoo ah dad tirro-yar ayuu hadana aduunka badankiisa gumaystay.
  - **I**toobiya waxaa degaan u leh qowmiyaddo aad u kala duwan oo badan.

4. *Xaraf **WEYN** ku bilow marka aad qorayso hadal ama qoraal aad soo xiggatay.*

Tusaale:

- **Xiggashada hadalka**:
  - "**S**alaamu calaykum," ayuu Sheekh Mustafe igu salaamay markaan suuqa ku arkay.
  - Nin aannan garanaynin oo aan suuqa ku arkay ayaa igu yidhi, "**S**uuqa hoose roob badan ayaa ka da'ay maanta."

- Macalinkii ayaaa i waydiiyey, "**<u>H</u>**alkeed ku habsaantay?"
- Madaxweyne Siilaanyo wuxuu yidhi, "**<u>N</u>**abada hala ilaashado."
- Maah-maah Soomaaliyeed ayaa tidhaahda, "**<u>N</u>**in kuu digey, kuma dilin."
- "**<u>W</u>**axbara-shada ku dedaal," ayuu igu yidhi aabahay.

- **Xiggashada Qoraalka**: Berrito xaruntayda caafimaadku way xidhan-tahay. Dr. Cali. (*Qoraalkan waxaa qoray Dr. Cali oo inoo sheegay in xaruntiisa caafimaadku xidhan-tahay barrito*).

**Xiggasho**:

- Dr. Cali wuxuu jaraa'iddada kusoo qoray, "**<u>B</u>**errito xaruntayda caafimaadku way xidhan-tahay."

**<u>Digniin</u>**: *Hadii aad soo xigganayso qayb ka mid ah hadal ama qoraal qof kale, haku bilaabin xaraf-weyn, hadii aanu qoraalku xaraf-weyn ku qornayn markiisii hore.*

Tusaale:

- Dr. Cali wuxuu sheegay in ay maalinta berrito ah ay "xidhan-tahay" goobtiisa caafimaadku.
- Dr. Cali wuxuu soo qoray in aanay furnayn xaruntiisa "caafimaadku" berrito.

5. *Xaraf **<u>WEYN</u>** ku bilow derejada qofka, marka uu magaca qofku ka horeeyo darajeddiisa (derejaddeeda).*

Tusaale:

- Waxaan la kulmay **M**adax-weyne Siilaanyo.
- Waxaan la hadlay **Dr**. Gaboose.
- **B**orofaysar Axmed Ismaaciil Samatar ayaa maanta Hargaysa ka dhoofay.
- **G**udoomiye Saleebaan Gaal shirkii wuu xidhay maanta.
- **W**asiir Xasan Xuseen Xasan ayaa iska casilay xilkii uu u hayey dowlada.

**Digniin**: *Marka derejadda qofku ay ka horayso magaca qofka, waxaad derejedda qofka ku bilaabaysaa xaraf weyn (tusaalaha sarre eeg). Laakiin marka magaca qofku ka horeeyo derejadda qofka, waxaad derejadda qofka ku bilaabayaa xaraf yar (tusaalaha hoose eeg).*

Tusaale:

- Cabdiramaan Axmed Cali (Tuur) waa **m**adaxweynihii ugu horeeyey ee Soomaaliland.
- Gaboose waa **d**hakhtar maskaxda ku takhasusay.
- Siilaanyo waa **m**adax-weynaha Soomaaliland.
- Axmed Ismaaciil Samatar waa **bo**rofaysar wax ka dhigi-jiray koolaj (college) ku yaala Gobolka Minnesota ee Wadanka Maraykan-ka.

6. *Xaraf **WEYN** ku bilow jihooyinka.*

Tusaale:

- Waxaan jecelay in aan ku noolaado **W**aqooyi **G**albeed Soomaaliya.
- Aabahay wuxuu ku noolaan-jiray **K**oonfur Soomaaliya.
- Gobollka **G**albeed ee Soomaaliland waxuu leeyahay beero aad u tirro-badan.

- **W**aqooyiga Maraykanku waa dhul aad u baaxad weyn.
- **K**oonfurta Soomaaliya waxaa mara laba webbi oo la yidhaa Juba iyo Shabeele.
- Cad-ceedu waxay kasoo baxdaa **B**ari.

7. *Xaraf **WEYN** ku bilow marka aad tilmaamayso wax-isu-ahaanshaha qoyska. (Marka aad tilmaamayso inta aydun isu jirtaan qof qoyskaaga ka mid ah [sida: adeer, eedo, inaadeer, inaabti, iwm] ee aad magiciisa ka horaysiinayso waxa isu tihiin, waxaad ku bilowdaa xaraf weyn).*

Tusaale:

- Waxaa ii yeedhay **E**edo Safiya.
- Sawirka waxaa igula jira **A**deer Axmed.
- Waxaa nala joogtay **I**naadeertay Samsam.
- Caawa waanu farax-sanahay oo waxaa aroostay **I**naabtigey Maxamed Dheere.
- Waxaan maanta gurigiisa teggey **A**btigay Saalax.

**Digniin**: *Laakiin haku bilaabin xaraf weyn hadii aanad magacaabin qofka qoyskaaga ah ee aad ka hadlayso. Hadii aad ka hadlayso qof aan la garanayn oo aanad magiciisa sheegin, waxaad ku bilawdaa xaraf yar.*

Tusaale:

- Waxaa ii yeedhay **e**edaddey. (*Eedadee? Tuma? Maad sheegin eeddada aad ka hadlayso ta ay tahay. Sidaa awgeed, ereyga "eedo" ku bilow xaraf yar*).
- Waxaa nala joogta **i**naadeertay.
- Miyaad aragtay **h**abar-yartay?
- Miyaad taqaanaa **a**deerkay?
- Caawa waanu faraxsanay oo waxaa aroostay **i**naabtigay.

- Waxaan maanta gurigiisa taggey **a**btigay.

8. *Xaraf* ***WEYN*** *ku bilow markaad tilmaamayso meel dhisme ah oo caan ah.*

Tusaale:

- Hudheelka ugu quruxda badan xaafada New Hargaysa waxaa la yidhaa **Q**urtuba.
- Waxaan ku dhashay **D**hakhtarka **H**argaysa.
- Cimaaradda Hargaysa ugu dheeri waxaa weeye **D**ahabshiil **B**ank.
- Suuqa Hargaysa badh-tankiisa waxaa ku yaala **M**asaajidka **C**ali **M**ataan.
- Waxaa xafladii arooska lagu qabtay **A**mbassador **H**otel.
- Shirkii ugu horeeyey waxaanu ku qabsanay **M**aansoor **H**otel.

**Digniin**: *haku bilaabin xaraf weyn marka aad ka hadlayso dhisme aan laysla garanaynin*.

Tusaale:

- Waxaan ku dhashay **d**hakhtar Hargaysa ku yaal. (*Dhakhtar-kee? Halkan maad magacaabin dhakhtarka aad ka hadlaysid. Sidaa daraadeed, xaraf weyn haku bilaabin. Xaraf yar ku bilow*).
- Markaan suuqa tagey maanta, waxaan sonkor kasoo iibsaday dukaanka. *(Dukaan-kee? Halkan maad tilmaamin magaca dukaanka aas wax kasoo iibsatay; sidaa daraadeed, haku bilaabin xaraf weyn. Ku bilow xaraf yar*).
- Waxaanu maanta tagney cimaarada ugu dheer Caasimadda Hargaysa (*Cimaaradee? Halkan maad*

*sheegin cimaarada aydun tagteen ta ay tahay; sidaa daraadeed, xaraf weyn haku bilaabin. Xaraf yar ku bilow*).

9. *Xaraf **WEYN** ku bilow magacyada caanka ah ee ashyaada.*

Tusaale:

- Waxaan isticmaalaa **K**ombuyuutarka **M**ac.
- **G**aadhiga **M**azda waa gaadhi fiican.
- **S**haraabka **C**oca **C**ola yaa sameeya?
- Ma jecli **S**aacada **Z**iko.
- **B**iyaha **S**amsam ma jeceshay?
- Waxaan soo iibsaday gaadhi **T**oyota ah.
- Waxaan cabay caano **N**ido.
- Wuxuu sitay telefoon **I**phone ah.

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Imisa sababood ayaa loo isticmaalaa Xaraf-ku-Dhegga? Maxay kala yihiin?

2. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalaay Xaraf-ku-Dhegga:
   1. ciyaarta aad ayaan u xiisaynaayey. markii danbana waan ka xiiso-jabay.
   2. Ciyaarta aad ayaan u xiisaynaayey. markii danbana waan ka xiiso-jabay.
   3. Ciyaarta aad ayaan u xiisaynaayey. Markii danbana waan ka xiiso-jabay.

3. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga:
   1. “halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “Baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.
   2. “halkeed ku habsaantay,” Ayuu macalinkii i weydiiyey. “baska ayaa ilasoo raagay,” Ayaan ugu jawaabay.
   3. “Halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.
   4. “halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “Baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.
   5. “Halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “Baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.

4. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga:
   1. Dad soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa Kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla Af-soomaaliga.
   2. dad soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla af-soomaaliga.
   3. Dad Soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa Kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla af-Soomaaliga.
   4. Dad Soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla af-soomaaliga.

5. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga:
   1. Waxaanu raacnay diyaaradda daalo airline markii aanu ku soconay dubay.
   2. Waxaanu raacnay diyaaradda Daalo airline markii aanu ku soconay Dubay.
   3. Waxaanu raacnay Diyaaradda daalo airline markii aanu ku soconay Dubay.
   4. Waxaanu raacnay diyaaradda Daalo Airline markii aanu ku soconay Dubay.

6. aniga, xasan cali faarax, iyo yaxye maxamed yoonis ayaa waxaanu tagnay suuqa shiraaqle ee caasimada hargaysa soomaaliland (***Waxaa ku jira 12 khalad***).

7. waxaan ka qalin-jabiyey jaamacada golis laba sanadood ka hor.waxaanan dhameeyey shahaaddada koowaad ee jaamacada ee loo yaqaano bajolar (***Waxaa ku jira 5 khalad***).

8. buurta gacan libaax iyo buurta sheekh keebaa weyn? (***Waxaa ku jira 5 khalad***)

9. labadda webi ee juba iyo shabeele waxay ku yaalaan koonfurta soomaaliya (***Waxaa ku jira 5 khalad***) .

10. gabayga gud-gude ee uu tiriyey abwaaan maxamed ibraahim warsame hadraawi (***Waxaa ku jira 7 khalad***).

# CUTUBKA 2

## *Joogsi .*

MARKA AY DADKU HADLAYAAN, waxay hadalkooda u dhaxaysiiyaan “nasasho” ama “joogsi,” si loo fahmo. Suurto-gal ma’aha in uu qofku hadalkiisa oo dhan dabada-isugu-qabto, ama uu du-ddubiyo, isaga oo aan “nasasho” u dhaxaysiinin. Qof walibana wuu yaqaanaa meelaha uu nasashada hadalka galinayo iyo meelaha kale. Sidaas oo kale, marka uu qofku hadalkiisa kusoo gudbiyo (ama uu kusoo ban-dhigo) qoraal ahaan, waxaa loo baahan-yahay in uu muujiyo meelaha ay “nasashadu” ku jirto qoraalkiisa, si loo fahmo qoraalkiisa. Sidaa awgeed, si uu qofku u muujiso meelaha “nasashadu” kaga jirto qoraalkiisa, waa in uu isticmaala “joogsi.”

Joogsigu waxaa weeye, dhibic yar (.) oo tilmaamaysa inuu dhamaaday (joogsaday) hadal aad qoraysay, ama nasasho dhex-gashay qoraalkii. Astaanta joogsigu kuma koobna hadalka nasashadiisa ama joogsigiisa oo kaliya, ee waxaa kale oo joogsiga loo isticmaalaa meelo kale oo badan oo aynu cutub-kan ku sharixi doono.

Astaantan Joogsiga dad aad u tirro-badan ayaa si khaldan u isticmaala. Had-iyo-jeer waxaan arkaa qoraalo badan oo dhaa-dheer, hadana aan lahayn joogsi kaliya. Waxaa kale oo aan arkaa qoraalo dhaa-dheer oo la dhex-galiyey joogsiyo aad u badan oo si khaldan loo isticmaalay. Waxaa kale oo aan badanka arkaa, qoraalo “joogsiga” meelo khaldan la geliyey. Saddexdaas siyaaboodba waa khalad: in aan la isticmaalin “joogsi” waa khalad; in meel walba “joogsi” la geliyaana waa khalad; in meelo khaldan “joogsi” la geliyaana waa khalad.

Cutubkan waxaynu ku sharaxaynaa xeerarka joogsigga.

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

aduun i qatal markii aan taag lahaana tallo ma hayn maanta oo aan tallo hayana taag ma hayo aadan gallaydh murtiddan waxaa loo cuskadaa marka uu qofku ku kibro *xoolaha iyo ubadka baddan* ee Illaahay siiyey murtiddan waxaa curiyey aadan gallaydh oo qarnigii 18-aad noolaa aadan wuxuu ahaa nin xoolo iyo xawalba illaahay ku manaystay wiilashiisu waxay ahaayeen 12 wiil oo dhaamaantood gaashaan-qaad ah geeliisuna intii uu noolaa marna kunka may hoos marin aadan wuxuu is bidday oo u been-sheegay xoolaha iyo raga badan ee uu dhalay wuxuuna is taawiyey kibir iyo haybad maalin maalmaha ka mid ah ayaa inamadiisii mid ka mid ahi nin ay isku

beel ahaayeen warran ku dhuftay oo diley sidii dhaqanka soomaalidu ahaa diinteenuna ina farayso, waxaa la goaamiyey in magtii ninka la diley la bixiyo markii qoysaskii uu ka dhashay aadan ay kala qayb sadeen magtii waxaa aadan kusoo haggaagay beegmay in uu bixiyo hal kaliya aadan wuu diidey in uu bixiyo hashii kibir iyo isla weyni awgii ayuu aadan ku jawaabay haddii aanu hal bixinayno ninka maanu dilleen waxaa cadhooday reerkii ninka laga diley waxaana bilaabmay dagaal lagu rogmadey nin la odhanjiray boos cawar oo uu berry hore aadan caayey ayaa warran ku maguujiyey aadan aadan oo dhaawac ah ayaa intuu boos cawar soo dul-istaagay ku yidhi aadan-noow maantana ka talli aadan wuxuu ku jawaabay aduun i khatal markii aan taag lahaana tallo ma hayn maanta oo aan tallo hayana, taag ma hayo

**SAX**

“**ADDUUN-I-QATAL**
*Markii aan taag lahaana, tallo ma hayn;*
*maanta oo aan tallo hayana, taag ma hayo*.”

Aadan Gallaydh

Murtiddan waxaa loo cuskadaa marka uu qofku ku kibro xoolaha iyo ubadka baddan ee Illaahay siiyey.

Murtiddan waxaa curiyey “Aadan Gallaydh” oo qarnigii 18[aad] noolaa. Aadan wuxuu ahaa nin xoolo iyo xawalba Illaahay ku manaystay. Wiilashiisu waxay ahaayeen 12-wiil oo dhaamaantood

gaashaan-qaad ah. Geeliisuna intii uu noolaa marna kun neef oo geel ah kamuu hoos-marin. Aadan wuxuu is bidday (oo u been-sheegay) xoolaha iyo raga badan ee uu dhalay, wuxuuna is taawiyey kibir iyo haybad.

Maalin maalmaha-ka-mid-ah ayaa inamadiisii mid-ka-mid-ihi uu waran ku dhuftay nin ay isku beel ahaayeen. Sidii dhaqanka Soomaalidu ahaa (diinteenuna ina farayso), waxaa la go'aamiyey in magtii ninka la diley la bixiyo. Markii qoysaskii uu ka dhashay Aadan ay kala qayb-sadeen maggtii, waxaa Aadan kusoo haggaagay (beegmay) in uu bixiyo "hal" kaliya (hal neef oo geel ah). Ayaan-darro'se, Aadan wuu diidey inuu bixiyo hashii. Kibir iyo isla-weyni awgii ayuu Aadan ku jawaabay: "Haddii aanu 'hal' bixinayno, ninka maanu dilleen."

Waxaa cadhooday reerkii ninka laga diley, waxaana bilaabmay dagaal lagu rogmadey. Nin la odhan-jiray Boos Cawar—oo uu beri-hore Aadan caayey—ayaa waran ku maguujiyey Aadan. Aadan oo dhaawac ah (oo naftii kasii gurmayso), ayaa waxaa soo dul-istaagay Boos Cawar. Boos Cawar ayaa Aadan ku yidhi, "Aadan-noow! Maantana ka talli!" Aadan wuxuu ku jawaabay, "Aduun i Qatal! Markii aan taag lahaana, tallo ma hayn. Maanta oo aan tallo hayanna, taag ma hayo."

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Joogsiga*

1. *Joogsi isticmaal marka aad qorayso weedhaha dhamayska-tirran*. (*Weedhaha dhamyska-tirrani waxaa weeye: dhowr weedhood oo wada socda, micne dhamays-tirrana samaynaya*).

Tusaale:

- Dad badani waxay aaminsan-yihiin in Madax-weyne Maxamed Xaaji Ibraahim Cigaal uu ahaa madax-weynihii dhiddibada u taagay Soomaaliland.
- Maxamed Saleebaan Tubeec iyo Maxamed Axmed Kuluc labaduba way cod-macaanaayeen.
- Barre-sarre (borofesoor) Maxamed Yaasiin ayaa maanta khudbad muhiima ka jeedin doona Jaamacada Hargaysa. Fadlan, kasoo qayb-gal.
- Maanta waxaa lasoo sheegay in roobab badani ka da'een wadankeenii.
- Marka aad dhoofto, lacag iisoo dir.

2. *Joogsi isticmaal marka aad qorto waqtiga saacada.*

Tusaale:

**SAX**: Berrito waxaynu isugu imanaynaa xafiiska marka ay saacadu tahay 8:00 A.M. (***Xasuuso**: A.M. iyo P.M. waxaad ku qortaa xarfo waaweyn*).

**Khalad**: Berrito waxaynu isugu imanaynaa xafiiska, marka ay saacadu tahay 8:00 am (*Khaladka halkan ku jiraa waxaa weeye: dhibco looma dhaxaysiinin **AM**. Waa in loo qoraa sidan: **A.M.** oo ay dhibcuhu u dhaxeeyaan "**A**" iyo "**M**"*).

**SAX**: Waxaan iskuulka kasoo rawaxaa markay saacadu tahay 9:00 P.M.

**Khalad***:* Waxaan iskuulka kasoo rawaxaa markay saacadu tahay 9:00 pm (*Khaladka halkan ku jiraa waxaa weeye: dhibco looma dhaxaysiinin **pm**. Waa in loo qoraa sidan: **P.M.** oo ay dhibcuhu u dhaxeeyaan "**p**" iyo "**m**"*).

3. *Joogsi isticmaal marka aad qorto weedh tilmaamaysa amar la bixinayo, codsi, ama tilmaan*.

Tusaale:

- Dhulka ka qaad buuga.
- Bidix u laabo.
- Ii dhiib qalinka.
- Dil.
- Qaad.
- Rid.
- Dhufo.

4. *Joogsi isticmaal marka aad qorayso miisaanka.*

Tusaale:

- Waxaan soo iibsaday 3.80 litir oo caano ah.
- Foostadu waxay qaadaa 80.5 litir oo biyo ah.
- Jirikaanku wuxuu qaadaa 10.50 litir oo shiidaal ah.

5. *Joogsi isticmaal marka aad qorayso lacagta aad qoraysaa inta ay tahay.*

Tusaale:

- Buuggii aan soo iibsaday waxaa layga siiyey $5.00 (shan doolar).
- Booyadda waxaa lagu iibiyaa $12,000.00 - $15,000.00.
- Maalin walba waxaan telefoonka ku shubtaa lacag dhan $1.00 (hal doolar).
- Waxaan mushahar u qaataa $100.00 (boqol doolar).

6. *Joogsi isticmaal marka aad qorayso xarfaha lasoo-gaa-gaabiyo*. (*Marka aad qorayso xarfaha lasoo-gaa-gaabiyo*

*[sida, UN, USA, EAE, iwm], waxaad joogsiga dhex-gelisaa xarfaha dhexdooda. Laakiin hadii xarfaha lasoo-gaa-gaabiyaa ay yihiin xarfo laysku jimciyo marka lagu dhawaaqayo [sida, AIDS, NATO, TV, iwm], ha u dhaxaysiinin joogsiga. Tusaalooyinkan soo socda ayaan si fiican ugu sharaxyaa* ).

Tusaale:

- AIDS (*Waa xarfaha laysku jimciyo marka lagu dhawaaqayo. Sidaa awgeed, xarfaha ha u dhaxaysiin joogsi*).
- U.S.A waxay u taagan-tahay United States of America. (*Waa xarfaha mid-mid loogu dhawaaqo ee aan laysku jimcinin. Sida awgeed, xarfaha u dhaxaysii joogsi*).
- NATO (*Waa xarfaha laysku jimciyo marka lagu dhawaaqayo. Sidaa awgeed, xarfaha ha u dhaxaysiin joogsi*).
- U.A.E waxay u taagan-tahay United Arab Emirates. (*Waa xarfaha mid-mid loogu dhawaaqo. Sida awgeed, xarfaha u dhaxaysii joogsi*).
- NASA (*Waa xarfaha laysku jimciyo marka lagu dhawaaqayo. Sidaa awgeed, xarfaha ha u dhaxaysiin joogsi*).
- A.U waxay u taagan-tahay African Union. (*Waa xarfaha mid-mid loogu dhawaaqo. Sida awgeed, xarfaha u dhaxaysii joogsi*).
- Mr. (*Waa xarfaha lasoo gaabiyo ee lagu gunaanado joogsigga*).
- Miss. (*Waxaa loo isticmaalaa gabadha aan xaaska ahayn ee aan la qabin. Waa xarfaha lasoo gaabiyo ee aan lagu gunaanadin joogsigga*).
- Mrs. (*Waxaa loo isticmaalaa gabadha xaaska ah ee la qabo. Waa xarfaha lasoo gaabiyo).*
- Ms*. (Waxaa loo isticmaalaa gabadha aan la kala garanaynin in la qabo iyo in ay madax-banaantay).*

- Dr. (*Waa xarfaha lasoo gaabiyo ee lagu gunaanado joogsigga*).
- Buuga waxaa qoray Dr. X. A. Bulhan

**<u>Digniin</u>**: *Iska ilaali sida khaldan ee loo isticmaalo joogsiga. Tusaalooyinkan hoose waxay ku tusayaan sida khaldan ee loo isticmaalo joogsiga*.

**Tusaalaha Koowaad**:
Astaamahan haka danbaysiinin "joogsi."

- Astaanta Su'aasha **?**
- Astaanta Dareen **!**
- Moos **:**
- Far-Suul **;**

Labada calaamadood ee u horeeyaa **?** iyo **!** waxay u dhigmaan "joogsi." Sidaa daraadeed, labadaa calaamadood haka danbaysiin "joogsi." Labada calaamadood ee ku xiggana **:** iyo **;** iyagana haka danbaysiinin "joogsi."

- **SAX**: Jaamacadee ayaad dhigataa?
- **Khalad**: Jaamacadee ayaad dhigataa?.
- **Khalad**: Jaamacee ayaad dhigataa.?

- **SAX**: Wuxuu ku dhawaaqaayey, "Hayaay!"
- **Khalad**: Wuxuu ku dhawaaqey, "Hayaay!".
- **Khalad**: Wuxuu ku dhawaaqey, "Hayaay!."
- **Khalad**: Wuxuu ku dhawaaqey, "Hayaay.!"

- **SAX**: Hadalkayga waxaan uga jeedaa: buuqa joojiya.
- **Khalad**: Hadalkayga waxaan uga jeedaa:. buuqa joojiya.

- **Khalad**: Hadalkayga waxaan uga jeedaa.: buuqa joojiya.

- **SAX**: Hadalkayga waxaan uga jeedaa; buuqa joojiya.
- **Khalad**: Hadalkayga waxaan uga jeedaa;. buuqa joojiya.
- **Khalad**: Hadalkayga waxaan uga jeedaa.; buuqa joojiya.

**Tusaalaha Labaad**:

Astaanta Kolmo **“ ”** marka aad isticmaalayso, waxaa jira qaabbab gaar-ah (ama nidaam gaar-ah) oo kala duwan oo uu “joogsigu” u raaco. Marka aad soo xiggato qoraal uu qof kale qoray, joogsigga waxaad gelisaa meesha uu kaga jiro qoraalka aad soo xiggatay. Waxaan uga jeedaa, meesha uu qoraaga aad wax kasoo amaanaysatay geliyey joogsiga, adna sidiisa u geli. Yacnii, siduu u qoray u qor.

Hadiise aad qorayso hadalo uu yidhi qof kale, sida madax-wayne oo kale, sidan u isticmaal astaanta kolmo: joogsigga waxaad gelisaa, astaanta kolmo dhexdeeda. Joogsiga haka danbaysiinin astaanta kolmo. Tusaale ahaan, eeg xiggashadan:

**Hadalkii Madaxweyne Siilaanyo**: Maanta shaqaalaha dowladu waa fasax.

**Xiggasho**:

- **SAX**: Madaxweyne Siilaanyo wuxuu yidhi, “Maanta shaqaalaha dowladu waa fasax.” (*Joogsigga dhex geli astaanta Kolmo*).
- **Khalad**: Madaxweyne Siilaanyo wuxuu yidhi, “Maanta shaqaalaha dowladu waa fasax”. (*Joogsigga dibeda howga saarin astaanta Kolmo*).

- **Khalad**: Madaxweyne Siilaanyo wuxuu yidhi, “Maanta shaqaalaha dowladu waa fasax” (*Joogsi la’aan haku gebo-gabayn xiggashada*).

**Tusaalaha Saddexaad**:

Joogsigga iyo ereyga u danbeeya qoraalkaaga, ha u dhaxaysiin meel banaan. Waxaan uga jeedaa, ereyga u danbeeya qoraalkaaga iyo joogsigga ha u dhaxaysiin meel banaan. Ta kale, ha isu dhawaynin joogsigga iyo xarafka ku xigga ee ay ka bilaabmayso weedha cusubi. Tusaalayaashan eeg.

**SAX**: Waxaan soo iibsaday shaadh cadaan ah.

**Khalad**: Waxaan soo iibsaday shaadh cadaan ah . (***U fiirso****: xarafka u danbeeye iyo joogsiggan waxaa u dhexeeya meel banaan. Ha u dhaxaysiinin meel banaan*).

**SAX**: Waxaan tagay suuqa. Waxaan soo iibsaday buug.

**Khalad**: Waxaan tagay suuqa.Waxaan soo iibsaday buug. (*Joogsigga iyo weedha ku xiggta waxaad u dhaxaysiisaa “meel banaan.” Qoraalkan waxaa isu dhowaadey “joogsigga” iyo xarafka “W,” waana khalad*).

**Khalad**: Waxaan tagay suuqa.   Waxaan soo iibsaday buug. (*Aad ha u kala fogaynin joogsigga iyo xarafka ay ka bilaabmayso weedha cusubi. Qoraalkan waxaa aad u kala fogaadey “joogsigga” xarafka “W”).*

**Tusaalaha Afraad**:

Marka aad qorto laba weedhood oo dhamays-tirran, waxaad u dhaxaysiisaa joogsi. Hadii aanad u dhaxaysiinin joogsi, waxaa isu furmaaya weedhaha dhamayska-tirran, taasina waxay keenaysaa in la fahmi waayo qoraalkaaga.

Tusaale:

**SAX**: Berrito ayaan u dhoofayaa Itoobiya. Waxaan soo noqonayaa laba wiig ka dib.

**Khalad**: Berrito ayaan u dhoofayaa Itoobiya Waxaan soo noqonayaa laba wiig ka dib. (*Weedhaha dhamayska-tirran ee hore iyo weedhaha dhamayska-tirran ee danbe uma dhexeeyo wax "joogsi"ah oo kala xaddiddayaa. Waa khalad*. *U dhexaysii joogsi*).

**Khalad**: Berrito ayaan u dhoofayaa Itoobiya waxaan soo noqonayaa laba wiig ka dib. (*Weedhaha dhamayska-tirran ee hore iyo weedhaha dhamayska-tirran ee danbe uma dhexeeyo wax "joogsi" ah oo kala xaddiddayaa. Waa khalad*. *U dhexaysii joogsi*).

◆◆◆

## TALLO

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
    1. Dr Gaboose, Gud Muuse Biixi, iyo Sh Mustafe waxay u safreen Gob Togdheer, Deg Burco.
    2. Dr Gaboose, Gud. Muuse Biixi, iyo Sh Mustafe waxay u safreen Gob. Togdheer, Deg Burco.
    3. Dr. Gaboose, Gud. Muuse Biixi, iyo Sh. Mustafe waxay u safreen Gob. Togdheer, Deg.

Burco.
4. Dr. Gaboose, Gud Muuse Biixi, iyo Sh Mustafe waxay u safreen Gob. Togdheer, Deg Burco.

2. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
   1. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay 2000$.
   2. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay $2000.00.
   3. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay $2000.
   4. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay 2000.

3. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
   1. Gud Yaxye iyo Dr Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 800 pm
   2. Gud. Yaxye iyo Dr. Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 8:00 pm
   3. Gud. Yaxye iyo Dr. Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 800 p.m.
   4. Gud. Yaxye iyo Dr. Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 8:00 p.m.

4. Iskaa wax-u-qabso waa fikrad aad muhiim u ah waa in lagu dhaqmaa.

1. SAX
2. Khald

5. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
    1. Taangigga biyaha ee guriga noo yaalaa wuxuu qaadaa 30,5 litir oo biyo ah.
    2. Taangigga biyaha ee guriga noo yaalaa wuxuu qaadaa 30 5 litir oo biyo ah.
    3. Taangigga biyaha ee guriga noo yaalaa wuxuu qaadaa 30.5 litir oo biyo ah.

6. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
    1. Hay'adda U.N.I.C.E.F waxay difaacdaa xuquuqda caruurta.
    2. Hay'adda UNICEF waxay difaacdaa xuquuqda caruurta.
    3. Hay'adda UN.IC.EF waxay difaacdaa xuquuqda caruurta.

7. Cali Beenaale wuxuu ku dhawaaqi jiray, "Hayaay!." "Waa Bahaleey!". "Hayaay!". "Isoo gaadhaay!". "Yur!." Yur!". "Yur!." "Tolaay!". "Waa bahaleey!". (***Waxaa ku jira 9 khalad***).

8. Maanta shirkii waxaa lagu gorfeeyey:. in la dhiso dugsi cusub oo isugu jira dugsi hoose. dugsi dhexe. iyo dugsi sare (***Waxaa ku jira 4 khalad***)

9. Hay’adda Qaramada Midoobey ee UNHCR ayaa waxay ka cadhootay USA iyo UK oo isku raacay in ay weerer ku qaadaan UAE (***Waxaa ku jira 10 hal khalad***).

10. Warar ayaa kasoo baxay Dowlada Soomaaliya wararkaasu waxay sheegeen in berito dadku isusoo baxaan waxaana laga codsanayaa in ay magaalada nadiifiyaan qofkii kasoo qayb-geliwaaya waa la ganaaxayaa fadlan haka hadhin howshan wanaagsan muwaadin-kasta waa ku waajib waa magaaladeenii ha moogaan, hana ka maqnaan (**Waxaa ku jira 8 khalad**).

# CUTUBKA 3

## *Hakad ,*

SIDII AYNU KUSOO ARAGNAY "Cutubka 2aad: Joogsi," waxaan sharaxay in sida uu hadalka caadiga ahi u leeyahay "joogsi," uu qoraalkuna u leeyahay "joogsi." Sidaa-si-la-mid-ah, marka uu qofku hadlaayo, hadalkiisa wuxuu u sameeyaa "hakad" ama "hakad-yo," si loo fahmo. Sidaa daraadeed, sida uu qofku hadalkiisa "hakad" u geliyo, ayuu marka uu hadalkiisa qoraal ahaan usoo gudbinayana uu "hakad" u galinayaa.

Habka loo isticmaalo "joogsiggu" (sidaynu soo aragnay) wuu ka duwan-yahay sida loo istcmaalo "hakad-ka." Hakad-ku wuxuu tilmaamaa in aanu qoraalkii joogsanin, laakiin nasasho yar oo gaabani dhex-gashay. Waxaa kale oo jira meelo badan oo hakad-ku dhex-galo.

Cutub-kani wuxuu si dhamays-tirran u sharaxayaa habka iyo meelaha loo isticmaalo hakad-ka. Hadii aad meel khaldan geliso hakad-ka, waxaa si khaldan loo fahmayaa waxa aad ka hadlayso iyo ujeedadaada. Marka meel khaldan la geliyo hakad-ka, waxaa is bedella micnihii iyo ujeeddadii qoraalkaaga, oo waxaa akhristahaagu u fahmayaa si kale oo aanad adigu u jeedin.

Waxaa jirta qiso dhab-ah oo dhacday oo ku saab-sa hakad meel khaldan la galiyey oo sababtay dhimasho. Qisadan waxaa luqada Ingiriisiga lagu yidhaahdaa: "The Comma that Killed the Man," oo micnaheedu yahay, "Hakad-kii Ninka Diley." Qisadu sidan ayay u dhacday:

Waxaa jiray laba ciidan oo dagaalamaayey. Ciidamadii mid ahaan ayaa waxay qabteen nin kasoo jeeda ciidankii ay dagaalamayeen. Sarkaalkii ciidanka haystay ayaa la xidhiidhay

sarkaalkii kasii sareeyey oo jooga meel u jirtaa qiyaastii 500 Kiiloomitir. Wuxuu waydiiyey siday u gali lahaayeen (go'aankii ay ka gaadhi-lahaayeen) ninka maxbuuska ah ee ay hayaan. Sarkaalkii sare ayaa usoo jawaabay. Wuxuu usoo qoray warqad ay ku qorantahay: "Kill him not, wait for me." Micnaheeduna yahay: "Ha dilin ninka, ila sug." Sarkaalkii warqada loo diray wuu fahmay, ninkiina muu dilin ee wuu xidhay uun.

Mudo ka dib ayaa sarkaalkii ninka maxbuuska ah hayay lagu amray in uu ninka maxbuuska ah u gudbiyo xero ciidan oo meel kale ku taal. Wuxuu sarkaalkii go'aansaday in uu ninka maxbuuska ah u gudbiyo xeradii ciidanka ee kale. Warqadii hore ee loosoo qoray way ka luntay. Sidaa awgeed, wuxuu sarkaalkii go'aansaday in uu isagu warqada gacantiisa qoro si uu amarkii hore ee la siiyey ugu sheego sarkaalka cusub ee uu maxbuuska u gudbinayo.

Wuxuu qoray amarkan: "Kill him, not wait for me."
Taas oo macnaheedu noqonayo: "Dil ninka, hayla sugin."

Hadii aynu is bar-bar dhigno labadii amar (ama fariimood) ee labada warqadood ku kala qornaa, sidan ayay u noqonayaan.

**Sarkaalkii koowaad**: "Kill him not, wait for me."
"Ha dilin ninka, ila sug."

**Sarkaalkii labaad**: "Kill him, not wait for me."
"Dil ninka, ha i sugin."

Ma aragtaa kala-duwanaanshaha u dhexeeya labada qoraal? Sarkaalka kowaad meesha uu hakad-ka geliyey iyo sarkaalka labaad meesha uu hakad-ka geliyey ayaa sababtay in micnihii "fariintu" is bedelo, sidaana ninkii lagu dilo. Dhibta waxaa keenay, sarkaalka labaad oo aan aqoon u lahayn *xeerka astaamaha qoraalka*. Waxaanu aqoon u lahayn meesha ku haboon ee uu hakad-ku galo.

Sheekadani waxay ina tusaysaa khatarta iyo is-fahan-waaga ay leedahay marka uu qoraagu si khaldan u isticmaalo hakad-ka.

Dhibaataduna kuma koobna in hakad-ka oo kaliya si khaldan loo isticmaalo. Laakiin, marka *xeerka astaamaha qoraalka* dhamaantood si khaldan loo isticmaalo, dhibaatadu way imanaysaa.

Inagoo sheekadaas iyo dhibta ka dhalatay ka duulayna, waxaynu halkan ku sharaxaynaa meelaha uu hakad-ku kaga jiro qoraalka, sida loo isticmaalo iyo xeerarkiisa.

◆◆◆

## AQOONTAADA TIJAABI

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin****: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

## KHALAD

illaahayoow aqoon li,ina hanagu cadaabin eexashana hanaggagga tegin murtidan waxaa loo cuskadaa marka ay xeer beegtidu garta galayso beri ayaa waxaa dhacay in nin suldaan ahaa, oo beel daajiye ahaa iyo nin kale ay isku qabsadeen hal xeer beegtidii markay dacwadii dhegaysteen ayaa waxay arkeen in suldaanka laga garleeyahay oo aanu hasha isagu lahayn ninka la dacwiyaayey ayaa hasha iska leh xeer beegtidii waxay ka warwareen waxa uu suldaanku yeeli doono marka garta laga helo iyagoo afeef dhigganaya suldaankana u sarbeebaya in aanu hasha

lahayn ayaa waxay yidhaahdeen illaahayoow aqoon liina hanagu cadaabin eexashana hanaggagga tegin

**SAX**

**"Illaahayoow aqoon-li'ina hanagu cadaabin, eexashana hanaggagga tegin."**

Maah-maah

Murtidan waxaa loo cuskadaa, marka ay xeer-beegtidu garta galayso.

Beri ayaa nin suldaan ahaa, oo beel-daajiye ahaa, iyo nin kale ay isku qabsadeen "hal" (neef geel ah). Xeer-beegtidii markay dacwadii dhegaysteen, ayaa waxay arkeen in suldaanka laga gar-leeyahay, oo aanu hasha isagu lahayn. Ninka la dacwiyaayey ayaa hasha iska leh.

Xeer-beegtidii waxay ka war-wareen waxa uu suldaanku yeeli-doono marka garta laga helo. Iyagoo afeef dhiganaya, suldaankana usii digaya una sarbeebaya in aanu hasha lahayn, ayaa waxay hadalkoodii ku bilaabeen: "Illaahayoow aqoon-li'ina hanagu cadaabin, eexashana hanaggagga tegin."

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Hakad-ka*

1. *Hakad isticmaal marka aad qorayso weedhaha lagu bilaabo, ee laga horaysiiyo, weedhaha dhamayska-tirran.*

Tusaale:

- Farxad daraadeed, gaadhiggii ayuu ka dhici gaadhay.

- Qosol awgii, calooshaa i xanuuntay.
- Soo noqoshadaada, had'yad ii keen.
- Cadho awgeed, kuraasidii ayuu ja-jabiyey.
- Dhaawicii kasoo gaadhay shilkii gaadhiga ka dib, Cismaan gaadhi danbe in uu raaco wuu ka dhaartay.
- Gago-jiid badan ka dib, warqadii wuu noo saxeexay gudoomiyihii.

2. *Hakad isticmaal marka aad qorayso laba shay (walxood), ama laba magac, iyo wax ka badan oo is-daba-socda, ama is-daba-taxan*.

Tusaale:

- Waxaan soo iibsaday laba buug, laba qalin, hal kumbuyuutar, iyo miis.
- Qoyskayagu wuxuu ka kooban yahay laba hablood, saddex wiil, aabo, iyo hooyo.
- Waxaan leeyahay toddoba surwaal, lix shaadh, saddex beer oo kabo ah, funnaanad, jaakeed, iyo koofiyad.

3. *Hakad isticmaal marka aad qorayso laba, saddex ama in ka badan oo 'tilmaamayaal' ah oo is-daba-socda*.

Tusaale:

- Cali waa nin dheer, xoogan, cirro leh, oo madow.
- Wuxuu watay gaadhi madow, wayn, cad, oo Toyota ah.
- Soomaalidu waa dad midab-koodu yahay maariin, dhuu-dhuuban, dhaa-dheer, oo qurxoon.

- Xayawaanka qaarkood waxay leeyihiin shan indhood, qaarna laba carrab, qaar laba madax, qaarna luggo aad u tirro-badan.

4. *Hakad isticmaal marka aad qorayso laba weedhood oo midina ay dhamayst-tirrantahay, midina aanay dhamayst-tirrnayn. Weedhaha dhamaystka-tirrani waxaa weeye: weedhaha keligood meel istaagi karta iyagoo micne buuxana samaynaya. Weedhaha aan dhamayska-tirraynina waa weedhaha aan keligood meel istaagin karin*.

Tusaale:

**Weedh aan dhamays-tirrnayn**: Markii aan suuqa tagay. . . (*weedhani waa weedh aan dhamays-tirrnayn; sababtoo ah, waa weedh aan keligeed meel istaagi karin. Hadii ay meel keligeed istaagtana, micnaheeda ayaan dhamays-tirrnayn*).

**Weedh dhamays-tirran**: Waxaan soo iibsaday surwaal. (*weedhani waa weedh dhamays-tirran; sababtoo ah, waa weedh keligeed meel istaagi karta, micne dhamays-tirrana leh*).

Marka labadan weedhood (ee kor ku xusan) lays raaciyo, waxaad isticmaashaa hakad.

Tusaale:

- Markii aan suuqa tagay, waxaan soo iibsaday surwaal.
- Hadii aad seexan-weydo, madaxa ayaa ku xanuuni doona.
- Si aad imtixaanka u baasto, casharada si fiican u dhiggo.
- Markaad suuqa timaado, ilasoo hadal.

- Markay cad-ceedu galbeed kasoo baxdo, qofna lagama aqbalayo danbi-dhaaf.

5. *Hakad isticmaal marka aad qoraal dhamays-tirran ku darayso macluumaad siyaado ah*.

Tusaale:

- Saaxiibkay, oo aanu isku xaafad nahay, wuxuu ciyaaraa kubada cagta. (*Waxaad u fiirsataa weedhaha u dhaxeeye labada hakad. Weedhahaasi waxay macluumaad siyaado ah ka bixinayaan saaxiibka laga hadlayo. Hadii aad weedhaha u dhaxeeya labada hakad aad ka saarto hakad-ka, waxaa kuusoo baxaya:* <u>Saaxiibkay wuxuu ciyaaraa kubada cagta</u>*. Markaad macuulaad siyaado ah ku darayso weedho dhamays-tirran, macluumaadka siyaaddadda ah ee aad dhex gelisay, waxaad ka horaysiisyaa hakad, waxaanad ka danbaysiisaa hakad*).
- Magaalada Hargaysa, oo ah caasimada Soomaaliland, waxaa ku nool dad aad u tirro-badan. (*Hadii aad ka reebto macluumaadka siyaaddada ah ee aan ku daray, waxaa soo hadahaya:* <u>Magaalada Hargaysa waxaa ku nool dad aad u tirro-badan</u>.
- Shirka waxaynu qabsanaynaa, sidaad la socotaan, maalinta Isniinta.
- Bishii Ramadaan, Illaahay khayrkeeda hayna siiyee, way bilatay.
- Madax-weyne Siilaanyo, isaga oo aan warbaahinta la hadlin, wuxuu maanta u dhoofay Itoobiya.

6. *Hakad isticmaal marka aad qorayso hadal qoddobaysan oo is-daba-socda oo taxane ah*.

Tusaale:

- Waxaynu u baahanay in aynu qorshe fiican samaysano. Kow, waa in aynu is abaabuulaa. Laba, waa in aynu guddi samaysanaa. Saddex, waa in aynu gudoomiye magacawnaa. Afar, waa in aynu sharci-hoosaad samaysanaa.
- Marka hore, waa in aynu hees samaynaa. Marka xiga, waa in aynu laxan u samaynaa. Marka ku xiga, waa in muusig loo sameeyaa. Marka u danbeeya, waa in fanaan loo dhiibaa.
- Si aad ugu tar-tanto jaggada madax-weyne ee wadanka, waa in aad samayso arimahan soo sodca: kow, waa in aad furato xisbi-siyaasadeed; laba, waa in aad hesho dad ku taageersan oo dhaqaale iyo codba kugu taageera; saddex, waa in aad soo jiidataa siyaasiyiinta ugu cad-cad wadanka.

7. *Hakad isticmaal marka aad qorayso taariikhda*.

Tusaale:

- Isniin, 05 Abriil, 2017. (*U fiirso: marka aad taariikhda qorayso: magaca maalinta marka aad qorto, waxaad ku xiggsiisaa hakad; dabadeed waxaad qortaa taariikhda maalinta iyo bisha oo wada socda, waxaanad ku xiggsiisaa hakat; intaa ka did, waxaad qortaa sanadka oo dhamays-tirran, waxaanad ku xiggsiisaa joogsi*).
- 01 Luulyo, 1960. (*U fiirso: marka aanad qoraynin maalinta magaceeda, waxaad qortaa uun taariikhda maalinta iyo bisha magaceeda oo wada-socda; ka dibna, waxaad ku xiggsiisaa hakat. Intaa ka dib, waxaad qortaa sanadka oo dhamays-tirran, waxaanad ku xiggsiisaa joogsi*).

**<u>Digniin</u>**: Iska ilaali sida khaldan ee loo qoro taariikhda:

**SAX**: Jimce**,** 15 Janaayo**,** 2017
**Khald**: Jimce 15 Janaayo 2017
**Khalad**: Jimce, 15 Janaayo 2017
**Khalad**: Jimce 15 Janaayo, 2017

**SAX**: 15 Janaayo**,** 2017
**Khalad**: 15 Janaayo 2017
**Khalad**: 15, Janaayo 2017

8. *Hakad isticmaal marka aad qorayso magaalooyinka iyo wadanka ay ku yaalaan oo wada socda*.

Tusaale:

- Hargaysa**,** Soomaaliland. (*U fiirso: marka hore waxaad qortaa magaca magaalada, waxaanad ku xiggsiisaa hakat; ka dibna, waxaad qortaa magaca wadanka, waxaanad ku xiggsiisaa joogsi ama hakat, kolba sida uu ugu jiro qoraalka*).
- Muqdisho**,** Soomaaliya.
- London**,** UK.
- Dubai**,** U.A.E.
- Nairobi**,** Kenya.

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Hakad-ka maxaa loo isticmaalaa?

2. Weedhahan, kuwee ayaa si sax ah loo isticmaalay astaanta hakad:
    - Waxaa agtayda fadhiya oday farxaan ah sheeko badan dabeecad fiican oo qosol badan.
    - Waxaa agtayda fadhiya, oday farxaan ah sheeko badan dabeecad fiican, oo qosol badan.
    - Waxaa agtayda fadhiya oday farxaan ah, sheeko badan, dabeecad fiican, oo qosol badan.

3. Taariikhdan, teebaa si sax ah u qoran:
    - 25, Oktoobar, 1980
    - 25 Oktoober 1980
    - 25 Oktoobar, 1980
    - 25, Oktoobar 1980

4. Taariikhdan, teebaa si sax ah u qoran:
    - Salaasa 13 Febraayo, 2015
    - Salaasa, 13 Febraayo 2015
    - Salaasa, 13 Febraayo, 2015
    - Salaasa 13 Febraayo 2015

5. Weedhahan soo socda, waxaad hoosta ka xariiqdaa weedhaha macluumaadka siyaaddada.
    - Gaadhigaygu, inkastoo uu gaboobey waa gaadhi fiican.

- Gaadhigaygu, inkastoo uu gaboobey waa gaadhi fiican.
- Gaadhigaygu, inkastoo uu gaboobey, waa gaadhi fiican.
- Gaadhigaygu inkastoo uu gaboobey waa gaadhi fiican.

6. Maah-maahah Soomaaliyeed ayaa tidhaahda “Alle ku doori.” Inkastoo ay laba micne yeelan-karto hadana dadku meel kaliya ayay u isticmaalaan. Hadii aad isku daydo in aad micnayso sideed u maclayn lahayd. (***Waxaa ku jira 3 khalad***).

7. Gabay uu tirriyey Guhaad Cabdi Gahayr (IHN), ayaa waxaa ereyadiisii ka mid ahaa:

“Isu-taga abaabula shirweyn aaya kama reeba.
Arxan-daran agoonteeda cuna hoosta ka abeeso.
Iidaha Islaam lagu mataal jamaca ‘Aamiinta.’
Illow-badan sidii naag umula foosha ku ilmeeya
Ugaadh dhego-l’a uub-loo-qod-dheer dabinno loo aasa.” (***Waxaa ku jira 9 khalad***).

8. Inkastoo Urrurka Bisha Cas Laan-qayrta Cas Libaaxa iyo Qoraxda Cas ee marka lasoo gaabiyo loo yaqaano (Red Cross) ay caawimo fidiyaan hadana dhaliilo badan ayaa loosoo jeediyaa. (***Waxaa ku jira 5 khalad***).

9. Markaan wadanka ka dhoofay waxay ahayd Salaasa 10 Maarso 2015. Waxaan sii dhex-maray wadamada Itoobiya

Suudaan Liibiya Talyaaniga Dhenmaark iyo Isweedhan. (***Waxaa ku jira 7 khalad***).

10. Waxaan u sheegay oo weliba aan u sharaxay in aanan doonaynin. Laakiinse isagu si khaldan ayuu ii fahmay inkastoo aan warkayga u cadeeyey. Waan yaabay aniguye, ma sii kale ayuu ii fahmay. (***Waxaa ku jira 5 khalad***)

# CUTUBKA 4

## *Astaanta Su'aasha ?*

ASTAANTA SU'AASHU WAA ASTAAN tilmaamaysa su'aal. Marka aad qorto weedho dhamays-tirran oo su'aal ah, waxa aad kusoo xidhaa (gebo-gabaysaa) astaanta su'aasha. Astaanta su'aasha waxaa loo isticmaalaa marka aad qorayso su'aal toos ah, laakiinse looma isticmaalo marka aad qorayso su'aalaha "dadd-ban." (*xagga hoose ayaan ku sharaxayaa kala duwannaanshaha su'aasha tooska ah iyo su'aasha dadd-ban*).

Astaanta su'aashu waa astaan u dhiganta "joogsiga." Waxaan uga jeedaa: marka aad su'aal qorto ee aad kusoo xidho astaanta su'aasha, haka danbaysiinin "joogsi" ama "hakad;" sababtoo ah, astaanta su'aasha *lafteeda* ayaa joogsi ah. Dad badan ayaa marka ay su'aashooda kusoo xidhaan astaanta su'aasha, waxay ka danbaysiiyaan joogsi ama hakad. Waa khalad. Waxba haka danbaysiin astaanta su'aasha.

Cutubkan waxaynu si qoto-dheer ugu sharaxaynaa xeerarka astaanta su'aasha.

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la*

*saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

ina xagaa dheere sheeko beri ayaa waxaa jirijirey nin la odhanjiray ina xagaa dheere wuxuu ahaa nin adhi aad u badan lah waxaanu ahaa nin alle kood ah ereyo danbi ah ku hadla maalintii danbe ayaa ina xagaadheere adhigiisii cudur ku dhacay adhi badannina ka dhintay ina xagaa dheere wuxuu maqli jiray in wax kasta oo dhinta wakhtigiisii dhamaaday oo illaahay oofsaday ama diley ina xagaa dheere wuxuu u adkaysan waayay adhigiisa maalin kasta dhimanaya sidaa daraadeed wuxuu go,aan ku gaadhay in uu adhigiisa badbaadiyo adhigii ayuu kala qaybiyey oo laba-xero ku kala xereeyey adhigii qayb ahaan wuxuu siiyey illaahay, qaybna isaga ayaa qaatay. markaas ayuu ina xagaa dheere illaahay la hadlay oo yidhi illaahahow adhiga qaybtaas adigaa leh qaybtanna anigaa leh markaa illaahayow qaybtaada ama di lama hayso, laakiin qaybtayda haygu imanin oo ha laynin maalintii ku xigtay ayaa adhigii ku jiray xerada ina xagaa dheere mid dhintay intuu cadhooday ayuu xeradii kale ee uu illaahay siiyey dhexgalay oo neef diley isagoo leh adhi la,laayaa, adhi la,laayo ayuu leeyahay wuxuu uga jeeday in mar kasta oo uu illaahay neef ka dilo isaguna aar goosto oo uu adhiga illaahay neef ka dilo iyadoo xaaladu sidii tahay ayuu maalintii danbe roob da,ay ina xagaadheere ayaa salax dhagax biyo galeen ah is yidhi biyo ka cab oo uu afka saaray ilayn waa nin illaahay u cadhoodaye salaxii ayaa dibnaha kaga dhegay wax uu sameeyo ayuu garan waayey firig firig iyo kaadi ayaa ka dhamaatay markaa ayuu xasuustay in uu illaahay ku gafey baryo iyo denbi dhaaf ayuu

illaahay waydiistay salaxii ayaa sii daayey maalintii danbe ayaa hadana adhigii aad u dhintay ina xagaadheere wuu is hayn kariwaayey wuxuu sameeyo ayuu garan waayey wuxuu yidhi hadii aanu hadalana waa af salax ku dhegayagii hadii aanu aamus nana adhigaa sidaa laga dayn maayo

**SAX**

## INA XAGAA-DHEERE
Sheeko

Beri ayaa waxaa jiri-jirey nin la odhan-jiray, Ina Xagaa-dheere. Wuxuu ahaa nin xoolo aad u badan lahaan jiray; waxaanu ahaa nin “Alle kood” ah (***Alle-kood*** *micnihiisu waxaa weeye: qof hadalo danbi ah ku hadla*). Maalintii danbe ayaa Ina Xagaa-dheere adhigiisii cudur ku dhacay, adhi badannina ka dhintay. Ina Xagaa-dheere wuxuu maqli-jiray in wax-kasta oo dhinta uu wakhtigiisii dhamaaday oo Illaahay oofsaday ama diley.

Ina Xagaa-dheere wuxuu u adkaysan-waayay adhigiisa maalin-kasta dhimanaya. Sidaa daraadeed, wuxuu go’aan ku gaadhay inuu adhigiisa bad-baadiyo.

Adhigii ayuu kala qaybiyey oo laba-xero ku kala xereeyey. Adhigii qayb ahaan wuxuu siiyey Illaahay, qaybna isaga ayaa qaatay. Markaas ayuu Ina Xagaa-dheere Illaahay la hadlay oo uu ku yidhi, “Illaahahow, adhiga qaybtaas adigaa leh; qaybtanna anigaa leh. Markaa Illaahayow qaybtaada ama-dil ama-daa; laakiin, qaybtayda haygu imanin oo ha laynin.”

Maalintii ku xigtay ayaa adhigii ku jiray xerada Ina Xagaa-dheere mid dhintay. Intuu cadhooday ayuu xeradii kale ee uu Illaahay siiyey dhex-galay oo neef diley, isagoo leh, “Adhi la’laayaa, adhi la’laayo ayuu leeyahay.” Wuxuu uga jeeday, in mar-kasta oo uu Illaahay dilo neef ku jira xerada Ina Xagaa-dheere, uu isaguna “aar-goosto” oo uu adhiga Illaahay neef ka dilo.

Iyadoo xaaladiisii aanay waxba iska bedelin oo malin-kasta uu neef ka dhinto, isaguna uu neef dilo, ayuu maalintii danbe roob da'ay. Ina Xagaa-dheere ayaa salax (dhagax goddan oo biyo ku jiraan) is yidhi biyo ka cab, oo uu afka saaray. Ilayn waa nin Illaahay u cadhoodaye, salaxii ayaa dibnaha kaga dhegay. Wax uu sameeyo ayuu garan-waayey Ina Xagaa-dheere. Firig-firig iyo kaadi ayaa ka dhamaatay. Markaa ayuu xasuustay in uu Illaahay ku gafey. Baryo iyo denbi-dhaaf ayuu Illaahay waydiistay. Salaxii ayaa sii daayey.

Maalintii danbe ayaa hadana adhigii neef ka mid ahi dhintay. Ina Xagaa-dheere wuu is hayn-kari-waayey. Wuxuu sameeyo ayuu garan-waayey. Wuxuu yidhi, "Hadii aanu hadalana waa af-salax-ku-dhegayagii; hadii aanu aamus-nana adhigaa sidaa laga dayn maayo." Wuxuu uga jeedaa, hadii aan hadlo oo aan wax idhaah-dana, salixii ayaa afka iggaga dhagaya; hadii aan iska aamuso oo aan waxba odhan-waayana, adhigaas dhimashada laga joojin maayo. Yacnii, wax aan sameeyo garan-maayo.

***

## Xeerarka Guud ee Astaanta *Su'aasha*

1. *Astaanta Su'aasha isticmaal marka aad qorayso su'aal toos ah*.

Tusaale:

- Buugtii masoo iibsatay**?**
- Xalayto xafladii ma joogtay**?**
- Shaqadii ma tagtay**?**
- Ma inaga**?** Ma iyaga**?** Ma adiga**?** Mise iyada**?**
- Goormaad iskuulka tegaysaa**?**
- Qiimaha gaadhigu waa imisa**?**

2. *Astaanta su'aasha ha isticmaalin marka aad qorayso su'aalaha aan tooska ahayn ee loo yaqaano, "su'aalaha dadd-ban." Haysku khaldin su'aasha tooska ah iyo su'aasha dadd-ban*.

Tusaale:

- Caruurtu bilayn bur-buriyaan guriga.
- Waxaan is waydiinayaa in uu iman doono iyo in kale.
- Askarigii wuxuu i waydiiyey sababta aan u samaysan waayay warqada-cadaynta-dhulka.
- Tollow, ma iska yara seexdaa.
- Waxaan la dawakhsanay, sida aan uga gudbi doono webigan.

3. *Astaanta su'aashu waxay u dhigantaa 'joogsiga' iyo 'hakad-ka.' Sidaa daraadeed, markaad aad astaanta su'aasha isticmaasho, haka danbaysiin 'joogsi' ama 'hakad.'*

Tusaale:

**SAX**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa**?**
**Khalad**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa?**.**
**Khalad**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa**.**?
**Khalad**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa?**,**
**Khalad**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa**,**?

**SAX**: "Goorma ayaad dhoofaysaa**?**" ayuu i weydiiyey.
**Khalad**: "Goorma ayaad dhoofaysaa?"**,** ayuu i weydiiyey.
**Khalad**: "Goorma ayaad dhoofaysaa**,**?" ayuu waydiiyey.

4. *Astaanta su’aasha markaad isticmaasho, ereyga ku xigga ee aad qorto waxaad ku bilowdaa “xafar-ku-dheg.”*

Tusaale:

**SAX**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa**?** **S**anadkee ayaa la sameeyey gaadhiga?

**Khalad**: Gaadhiga qiimihiisu waa imisa? ~~s~~anadkee ayaa la sameeyey gaadhiga?

5. *Astaanta su’aasha isticmaal marka aad qorayso weedho dhamays-tirran iyo su’aal wada socda.*

Tusaale:

- Waad xiisaynaysaa**,** sow maaha**?**
- Wuu soo noqday**,** miyaa**?**
- Way soo guureen**,** sow ma ogid**?**
- Waaan dhoofayaa**,** miyaanad ogayn**?**

6. *Marka aad soo xiggato qoraal uu qof kale qoray, hadii ay ku jirto astaanta su’aashu qoraalka aad soo xiggatay, astaanta su’aashu waxay dhex-galaysaa “astaanta kolmo” ama “astaanta xiggasho” (eeg Cutubka 5).*

Tusaale:

**Qoraalkii Xasan Cali**: Goorma ayaynu xoroobaynaa?

**Xiggasho**:

- Xasan Cali wuxuu buuggiisii ku qoray, “Goorma ayaynu xoroobaynaa?” (***U fiirso****: waxaan soo xiggtay qoraalkii Xasan Cali. Maadaama astaanta su’aashu ay la socotay qoraalka Xasan, waxaad astaanta su’aasha dhex-galinaysaa astaanta kolmo*).

- “Goorma ayaynu xoroobaynaa?” ayuu Xasan Cali buugiisii ku qoray.
- Waxay i waydiisay, “Jaamacada goormaad dhamaynaysaa?”
- “Waar ma waxbaa kuu dhiman?” ayuu igu yidhi.

**Digniin**: *Marka aad soo xiggato qoraal uu qoray qof kale, waxaad marka hore hubisaa in qoraalka aad soo xigganayso ay la socoto astaanta su’aashu. Hadii ay la socoto, waxaad u isticmaashaa sida ay ula socoto qoraalka aad soo xigganayso adigoon waxba ka bedelin. Hadii aanay astaanta su’aashu la soconin qoraalka aad soo xigganayso oo aad doonayso in aad adigu ku darto, markaa si kale ayaa loo isticmaalaa. (Eeg Cutubka 5: Astaanta Kolmo).*

## TALLO

*Akhri jaraa’iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay’addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay’addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta su’aasha?

2. Weedhahan, tee ayaa si sax ah loo isticmaalay astaanta su’aasha?
   1. Cajiib! Waa sawir aan ka jaabay!
   2. Cajiib! Waa sawir aad u qurxoon.
   3. Cajiib! Waa sawir aad u qurxoon!?
   4. Cajiib! Waa sawir aad u qurxoon?
   5. Intuba waa khalad.

3. Weedhahan, tee ayaa si sax ah loo isticmaalay astaanta su’aasha?
   1. Askarigii wuxuu i waydiiyey sababta aan u samaysan waayay warqada-cadaynta-dhulka.
   2. Askarigii wuxuu i waydiiyey sababta aan u samaysan waayay warqada-cadaynta-dhulka?

4. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta su’aasha.
   1. Ma ii sheegi kartaa inta qof ee uu qolkani qaado.
   2. Ma ii sheegi kartaa inta qof ee uu qolkani qaado?

5. Jaraa’iddka Iftin wuxuu maanta soo qoray, “waa maxay sababta ay dowladu u samaynayso cashuur dhimista.” Habakan aan usoo xiggtay qoraalkii Jaraa’iddka Iftiin, ma sax-baa? Mise waa khalad?
   1. SAX
   2. Khalad

6. “Xafiiskee ayaad ka shaqaysaa”? ayuu i waydiiyey.
   1. SAX
   2. Khalad

7. Goorma ayuu shirku bilaabmayaa. imisa qof ayaa isugu imanaya. halkee ayuu ka dhacayaa. (***Waxaa ku jira 3 khalad***).

8. Waxaan is weydiinayaa in uu iskuulkii maanta fasax-yahay iyo in kale. waxaan isku hayaa in aan iska joogo iyo in aan iskuulka tago oo aan soo hubsado. Ma tagaa. Mise waan iska joogaa. Maxaan sameeyaa. (***Waxaa ku jira 3 khalad).***

9. Bal waxaad ka faalootaa cida ku guulaysan-doonta madaxtinimada wadanka. ma waxaa heli doona WADDANI mise Kulmiye mise Ucid sideed ku ogaatay (***Waxaa ku jira 4 khalad).***

10. Waxaan garan-la’ahay waxa ay ku kala duwan-yihiin gabayga iyo maansadu. gabaygu muxuu kaga duwan-yahay maansada. waxaa kale oo aan garan-la’ahay heestu waxay kaga duwan-tahay gabayga iyo maansada. Ma isku midbaa. Mise way kala duwan-yihiin. (***Waxaa ku jira 3 khalad).***

# CUTUBKA 5

## *Kolmo* “ ”

ASTAANTAN WAXAA LUQADA INGIRIISIDA lagu yidhaahdaa “quotation mark.” Micnaha guud ee “quotation mark” wuxuu af-Soomaali ku noqonayaa “astaanta xiggasho.” Sababta “xiggasho” loogu bixiyeyna waxaa weeye: astaantan waxaa la isticmaalaa marka lasoo xigganayo qoraal uu qof kale qoray, ama hadal uu qof kale yidhi. Si aad u kala saarto (u kala soocdo)—oo loo kala garto—qoraalka ama hadalka aad soo xiggatay iyo qoraalka aad adigu qortay, ayaa waxaa la isticmaalaa astaantan xiggasho.

Laakiinse, astaantan isticmaalkeedu kuma koobna xiggashada qoraalka iyo hadalka oo kaliya. Waxaa jira meelo kale oo aad u tirro-badan oo loo isticmaalo astaantan xiggasho. Sidaa daraadeed, ereyga af-Soomaaliga ah ee “xiggasho” kama turjumayo micnaha dhabta ah ee astaantan, mana tilmaamayo meelaha tirrada-badan ee loo isticmaalo (*ereyga Ingiriisida ah ee “quotation mark”laftiisu micnaha astaanta kama wada turjumayo*). Sidaa daraadeed, waxaa haboon in la helo erey kale oo cusub oo af-Soomaali ah oo aynu u bixino astaantan. Ereyga ugu dhow astaantan in loo bixiyaa waxaa weeye ereyga “Kolmo.” Ereyga “kolmo” wuxuu kasoo jeedaa “kolmaha riyaha.” Hadaad u fiirsato astaantan, waxaad arkaysaa in ay u egtahay kolmaha riyaha, inkastoo ay wax yar ka duwan-tahay. Erey-bixintan cusub lafteedu ma’aha in ay micnaha astaanta oo dhamays-tirran ka turjumayso. Laakiinse, waa erey-bixin cusub oo aynu u isticmaali-doono astaantan, si aynu dhamaanteen isula garano micnahan cusub ee ereyga “kolmo.”

Astaanta kolmo waxaa loo isticmaalaa meelo badan. Mar kasta oo aad soo xiggato qoraal uu qof kale qoray, ama hadal uu qof yidhi, waxaad isticmaashaa astaanta kolmo, si aad u kala xadayso (u kala saarto) “hadalka uu qofku qoray, ama uu qofku yidhi,” iyo “qoraalka aad adigu qortay.” Marka aad qoraal ama hadal soo xigganayso, adigu haku darin wax siyaaddo ah oo aanu qoraaga aad soo xiggatay ku darin qoraalkiisa, ama aan hadalkiisa ku jirin. Erey-erey usoo gudbi sida uu u qoray qoraagu, ama uu u yidhi qofka hadlaayey. Hadii uu qoraaga aad qoraalkiisa soo xigganaysaa meelaha qaarkood si khaldan ereyada u qoray, adigu ha isku deyin in aad u saxdo. Siduu u qoray—sax iyo khaladba—adiguna usoo gudbi. Waxna haku darin, waxna haka teggin. Xataa joogsi ama hakad haduu khalday, ha isku deyin in aad saxdo. Taasi waa sharciga guud. Laakiinse, waxaa jira mar-mar ay banaantahay inaad saxdo khaladaadka ku jira qoraalka ama hadalka aad soo xiggatay. Marka qoraalkaas xiggashada ah la saxayo, waxaa jira nimaad la raaco (nidaamkaas-na waxaan ku sharixi doonaa tusaalooyinka soo socda).

Waxaan aad-iyo-aad uga digayaa in in qoraalka ama hadalka aad soo xiggato aanad bedelin. Tusaale ahaan, hadii uu qofku yidhaahdo: “Waxaan tagey,” adigu ha qorin, “Waxaan aaday.” Ama haduu qofku yidhaahdo: “Waxaan u safrayaa,” adigu haka dhigin, “Waxaan u dhoofayaa.” Inkastoo ereyadaas aad isku-bedeshay ay isku micno-yihiin, hadana maaha qoraalkii ama hadalkii uu qofku yidhi. Ereygiisa ha beddelin. Kelmeda uu yidhi oo *sideeda* ah soo xiggo.

Sidii aan soo sheegay, isticmaalka astaantan kolmo kuma koobna qoraal ama hadal lasoo xiggtay oo keliya. Waxaa jira meelo kale oo badan oo astaanta kolmo loo isticmaalo (tusaalooyinka cutubkan ayaan ku sharaxayaa meelaha kale ee loo isticmaalo astaanta kolmo).

Astaanta kolmo waa astaanta fahankeedu ugu adag-yahay, dadka badankooduna si khaldan u isticmaalaan. Marka si khaldan loo isticmaalo astaanta kolmo, dhibaatooyin badan ayay keentaa. Waxaa dhacda, oo aan mar walba arkaa, in dad badani ay is dhex-galiyaan qoraalkooda iyo qoraalkii ay soo xiggteen. Taasina waxay

keentaa inuu akhristuhu fahmi waayo, ama kala-saari waayo, qoraaga ereyadiisa iyo ereyada uu soo xigtay. Waxaa kale oo ay dad badani sameeyaan in ay meel khaldan galiyaan astaanta kolmo; taasina waxay keentaa in akhristuhu fahmi waayo micnaha qoraalka. Qaar kale oo badanninna waxay sameeyaan, inta ay astaanta kolmo ku bilaabaan hadalka ay soo xiggteen, ayaanay hadana soo xidhin hadalka ay soo xiggteen; taasina waxay keentaa in uu akhristuhu garan-waayo qoraalka lasoo xiggtay inta uu yahay. Sidaa awgeed, cutubkani wuxuu si qoto-dheer oo hufan u sharaxayaa xeerarka astaanta kolmo.

**Digniin**: *Marka aad soo xiggato hadal ama qoraal, waxaad ku bilowdaa hadalka aad soo xiggatay astaanta kolmo. Marka aad hadalka ama qoraalka aad soo xiggatay dhamaysana, waxaad kusoo xidhaa astaanta kolmo. Ha iloobin in aad ku bilowdo, kunasoo xidho, astaanta kolmo*.

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

qayb libaax sheeko sheekadani waa sheekada ay kusoo baxday odhaahda soomaaliyeed ee tidhaahda isha cali ka lullata berri ayaa habar dugaag xawaanka duur-joogta ah heleen hal bakhtiday waanay isugu wada yimaadeen waxaa istaagay oo hadlkiisii bilaabay libaax wuxuu libaaxii u yeedhay waraabe shirka fadhiyay waraabihii ayuu ku yidhi waraabow neefkan geela ah habar dugaag u qaybi waraabihii ayaa ku jawaabay qaybna adiga oo libaaxa ah ayaa iska leh qaybna inta kale ayaa iska leh libaaxii intuu cadhooday ayuu dhirbaaxo isha kagasoo tuuray waraabihii markaa ka dib ayuu dawaco u yeedhay libaaxii oo ku yidhi dawacooy waybi neefkan dawacadii ayaa ku jawaabtay neefa wada qaado libaax libaaxii intuu qoslay ayuu dawacadii ku yidhi yaa cadaaladan fiican ku baray waxay dawacadii ku jawaabtay isha cali ka lulata dawacadu waxay u jeeday maadaama uu waraabihii u dhintay cadaaladii uu sameeyey, anigu cadaalad samayn-maayee naftayda ayuunbaan badbaadinayaa

**SAX**

QAYB LIBAAX
Sheeko

Sheekadani waa sheekada ay kusoo baxday odhaahda Soomaaliyeed ee tidhaahda: “*Isha Cali ka lullata*.”

Beri ayaa habar-dugaag (xawaanka duur-joogta ah) heleen hal bakhtiday, waanay isugu wada-yimaadeen. Habar-dugaag wuxuu go’aansaday in hasha la-kala-qaybsado, si uu mid waliba u helo qaybtiisa. Waxaa istaagay oo hadalkiisii bilaabay libaax. Wuxuu libaaxii u yeedhay waraabe shirka fadhiyay. Waraabihii ayuu ku

yidhi, “Waraabow neefkan geela ah habar-dugaag u qaybi.” Waraabihii ayaa isku-deyey in uu hashii qaybiyo. Waraabihii wuxuu yidhi, “Neefkii waxaan u kala qaybiyey laba qaybood. Qayb ahaan waxaa iska leh libaaxa. Qaybta soo hadhayna inta kale ayaa iska leh.” Libaaxii intuu cadhooday ayuu dhirbaaxo isha kagasoo tuuray waraabihii.

Markii uu waraabihii dhintay, ayuu libaaxii u yeedhay dawaco. Libaaxii wuxuu dawacadii ku yidhi, “Dawacooy qaybi neefkan.” Dawacadii ayaa neefkii qaybisay; waxaanay tidhi: “Neefkii waan qaybiyey. Libaaxoow Neefka wada qaado.” Libaaxii intuu qoslay ayuu dawacadii ku yidhi, “Dawacooy! Yaa cadaaladan fiican ku baray?” Waxay dawacadii ku jawaabtay, “Qaybinta noocan ah waxaa i baray, ‘*Isha Cali ka lullata’.*”

Dawacadu waxay u jeeday, maadaama uu waraabihii u dhintay cadaaladii uu sameeyey, anigu cadaalad samayn-maayee, naftayda ayuunbaan bad-baadinayaa.

***

## Xeerarka Guud ee *Kolmo*

1. *Astaanta kolmo isticmaal marka aad soo xigganayso qoraal uu qof kale qoray*.

   Tusaalaha koowaad:
   **Jaraa’idka Iftin**: Gar-gaarka deg-dega ahi waa mu hiim. (Borofesoor Yaxye). (*Qoraalkan waxaa Jaraa’idka Iftin kusoo qoray Borofesoor Yaxye*).

**Xiggasho**: (*Saddexdan nooc ee kala duwanba waad soo xiggan-kartaa*).

- Waxaan akhriyay jaraa'id uu Borofesoor Yaxye kusoo qoray, "Gar-gaarka deg-dega ahi waa muhiim." (*Ereyada uu qoray Borofesoor Yaxye dhamaantood waxaad dhex-gelisaa astaanta kolmo. Xataa joogsigga meesha uu geliyey waa in aad gelisaa*).
- "Gar-gaarka deg-dega ahi", ayuu jaraa'id kusoo qoray Borofesoor Yaxye, "waa muhiim." (***Eeg**: qoraalkii Borofesoor Yaxye ayaan kala jabiyey [kala qaybiyey] anigoo dhex-galinaaya qoraalkaygii. Qaybta hore ee qoraalka Borofesoor Yaxye waxaan raaciyey hakad aan dibedda uga saaray astaanta kolmo; sababta aan hakad-ka dibeda uga saaray waxaa weeye: hakad kumuu jirin qoraalka Borofesoor Yaxye. Maadaama aanu hakad ku jirin qoraalkiisii, maaha in aan anigu ku-daro hakad aan qoraalkiisa ku jirin. Qaybta danbe ee qoraalkiisana, sidiisii ayaan u qoray*."
- "Gar-gaarka deg-dega ahi waa muhiim" ayuu jaraa'id kusoo qoray Borofesoor Yaxye. (***Eeg**: waan ka tegay oo maan soo qaadanin 'joogsiggii' uu isticmaalay Borofesoor Yaxye. Sababta aan joogsigiisa uga tagay waxaa weeye: waxaan doonayaa in aan ku daro qoraal aan leeyahay anigu; sidaa daraadeed, waan iskaga tagey joogsiggiisii. Xarafka ka danbeeya xiggashada, waxaad ka dhigaysaa xaraf yar maadaama aad joogsigii ka tagtey. Waa xeer la ogol-yahay*).

Tusaalaha labaad:

**Taariikhda Soomaaliya By Xasan Jibriil**: Soomaaliya waxaa bur-buriyey dhowr arimood oo aan halkan ku sharixi-doono.

**Xiggasho**:

- Xasan Jibriil wuxuu buuggiisa *Taariikhda Soomaaliya* ku qoray, "Soomaaliya waxaa bur-buriyey dhowr arimood oo aan halkan ku sharixi-doono." *(Ereyada uu qoray Xasan Jibriil dhamaantood dhex-geli astaanta kolmo. Xataa joogsiga meesha uu geliyey waa in aad gelisaa; joogsigu waa inuu ku dhex-jiraa astaanta kolmo*).

- "Soomaaliya waxaa bur-buriyey", ayuu Xasan Jibriil ku qoray buuggiisa *Taariikhda Soomaliya*, "dhowr arimood oo aan halkan ku sharixi-doono." (***Eeg**: qoraalkii Xasan Jibriil ayaan kala jabiyey [kala qaybiyey] anigoo dhex-galinaya qoraalkaygii. Laakiin qoraalka Xasan Jibriil iyo qoraalkayga waxaa lagu kala garanayaa, sidan: qoraalka Xasan Jibriil wuxuu ku dhex-jiraa astaanta kolmo; qoraalkayguna kuma dhex-jiro astaanta kolmo. Qaybta hore ee qoraalka Xasan Jibriil waxaan raaciyey hakad aan dibeda uga saaray astaanta kolmo; sababtoo ah, hakad-ku kumuu dhex-jirin qoraalkii Xasan Jibriil. Maadaama aanu hakad-ku ku dhex-jirin qoraalkiisa, waa in aan hakad-ka dibeda uga saaraa si aan u muujiyo in aan anigu hakad-ka ku daray [kordhiyey] qoraalka Xasan Jibriil. Laakiin, qaybta danbe ee qoraalkiisa, sidiisii ayaan usoo xiggtay*).

- "Soomaaliya waxaa bur-buriyey dhowr arimood oo aan halkan ku sharixi-doono" ayuu Xasan Jibriil ku qoray buuggiisa *Taariikhda Soomaaliya*. (*Xarafka ka danbeeya xiggashada, waxaad ka dhigaysaa xaraf yar*).

Tusaalaha saddexaad:

**Maqaalkii Saynab Maxamed**: Soomaalidu waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo degaan.

**Xiggasho**:

- Saynab Maxamed waxay maqaalkeedii ku qortay, "Soomaalidu waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo

degaan.”

- “Soomaalidu waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo degaan” ayay Saynab Maxamed maqaalkeedii kusoo qortay.

Labaddan xiggashana u fiirso. Tusaalaha koowaad, waxaan ku bilaabay ereyadii aan anigu qoray, anigoo sii sheegaya qofka maqaalka qoray magiciisa iyo in aan soo xiggan-doono qoraalkaas. Ka dib, waxaan soo xiggtay hadalkii uu qoraagu qoray oo aan dhex-galiyey astaanta kolmo, si aan akhristaha u tuso ereyada uu qoray qoraagu, anigoo aan waxba ku darin, waxna ka reebin. Halka uu qoraagu galiyey “joogsigga-na” waan geliyey.

Tusaalaha labaaad, waxaan ku bilaabay qoraagu ereyadii uu qoray, anigoo ka danbaysiiyey qoraalkaygii. Laakiinse, waxaad arkaysaa in aan ka saaray “joogsiggii” uu isticmaalay qoraagu. Waa la ogol-yahay in aad joogsigga ka saarto mar-marka qaarkood. Marka la ogol-yahay in aad joogsigga ka saartaa waxaa weeye: marka aad doonayso in aad qoraalka aad soo xiggatay raaciso qoraal aad adigu leedahay, si uu qoraalku usii socdo. Waxaa kale oo aad samayn-kartaa in aad hakad geliso. Marka aad joogsigga ka saarto, waxaad gelisaa hakad aaad dibeda uga saarayso astaanta kolmo; xarafka ku xigga astaanta kolmo waxaad ka dhigtaa ‘xaraf yar’).

2. *Marka aad doonayso in aad soo xiggato xiggasho kale oo uu qof kale soo xiggtay (xiggasho ku dhex-jirta xiggasho kale). Tusaale ahaan, Axmed ayaa wuxuu qoraal kasoo xiggtay Xasan. Ka dib, Asma ayaa doonaysa in ay soo xiggato qoraalkii uu Axmed kasoo xiggtay Xasan. Markaa waxay noqonaysaa: xiggasho lasii xiggtay.*

Tusaalaha koowaad:

1. **Jaraa'idka Waaberi**: Jaamacadaha wadanku wax-barasho tayyo-leh ma bixiyaan. By Xasan. (***Eeg**: qoraalkan waxaa Jaraa'idka Waaberi kusoo qoray Xasan*).

**Xiggasho 1aad**:

Axmed ayaa soo xiggtay qoraalka Xasan. Waatan xiggashadii Axmed.

1. Xasan wuxuu Jaraa'idka Waaberi kusoo qoray, "Jaamacadaha wadanku wax-barasho tayyo-leh ma bixiyaan."

**Xiggasho 2aad:**

Asma oo sii xiggatay qoraalkii uu Axmed kasoo xiggtay Xasan. Waa tan xiggashadii ay Asmi kasii xiggatay Axmed.

2. Axmed wuxuu qoray, "Xasan wuxuu Jaraa'idka Waaberi kusoo qoray, 'Jaamacadaha wadanku wax-barasho tayyo-leh ma bixiyaan.'"

Xiggashada 2aad u fiirso. Asmi waxay soo xiggatay qoraalkii Axmed oo dhamays-tirran. Qoraalkan ay Asmi soo xiggatay waxaa ku jira: qoraalkii Axmed oo ay soo xiggatay dhamaantii, oo uu kusii dhex-jiro qaraalkii uu Axmed kasoo xiggtay Xasan (waa xiggasho ay kusii dhex-jirto xiggasho kale). Sidaa awgeedna, waa in ay Asmi isticmaashaa astaanta kolmo (eeg midabka **doogadda** (**cagaarka**) ah ee labada kolmo, iyo midabka **casaanka** (**guduudka**) ah ee halka-kaliya ah ee kolmo). Maxay kala yihiin labadan kolmo ee kala midabka ah ee isku dhex-jiraa?

Si ay Asmi u muujiso (oo u kala cadayso) qoraalka ay kasoo xiggatay Axmed iyo qoraalka uu Axmed kasoo xiggtay Xasan, waa in ay xiggashada ay soo xiggatay ee Axmed oo dhamays-tirran ay dhex-gelisaa laba kolmo (sidii caadiga ahayd);

xiggashada guddaha kusii jirtana (ee uu Axmed kasoo xiggtay Xasan) ay dhex-galisaa hal-dhibic oo kolmo ah (eeg midabka casaanka ah ee kolmo).

Qoraalkii Axmed isagoo dhamays-tirran ayay Asmi soo xiggatay, waxanay dhex-galisay laba kolmo “ ”. Eeg, waa laba kolmo oo ka horeeya qoraalka iyo laba kolmo lagusoo xidho qoraalka (sidii caadiga ahayd). Laakiinse, si ay u muujiyo in hadalka ay soo xiggatay ay kusii dhex-jirto xiggasho kale, waxay isticmaashay hal kolmo oo kaliya ‘ ’. Qaybta ay dhex-galisay hal kolmo ‘ ’ waxaa weeye qaybtii Ahmed uu kasoo xiggtay Xasan. Eeg, waa hal kolmo oo ka horeeya iyo hal kolmo oo ka dabeeya qoraalkii Xasan. Markaa qoraalkii Axmed oo dhamays-tirrana waxay Asmi dhex-galisay laba kolmo “ ”, qoraalkii uu Axmed kasoo xiggtay Xasan ee gudaha kusii jirayna waxaynu dhex-galinay hal-dhibic oo kolmo ah ‘ ’. (*hadii ay kugu adkaato, waxaad daawataa video-ga aan duubay ee aan kusii sharaxayo casharkan; booqo boggayga Youtube ee ciwaankiisu yahay* “*Xeerka Astaamaha Qoraalka”*).

Waxaa kale oo aad u muhiima in aad arinkan fahanto: xiggashada Asma waxaad ku arkaysaa in ay kusoo gebo-gebowday saddex kolmo ’” oo isa-saaran. Si aad u fahanto saddexdan kolmo ee ay kusoo gebo-gebaysay qoraalkeeda, aynu soo qaadano xiggashadii Asma.

Axmed quxuu qoray “Xasan wuxuu Jaraa’idka Waaberi kusoo qoray, ‘Jaamacadaha wadanku wax-barasho tayyo-leh ma bixiyaan.’”

Dib u eeg ereyga ugu danbeeya ee “bixiyaan.” Waxay Asmi kusoo xidhay saddex kolmo ’”. Waxaad is weydiinaysaa: saddexdan kolmo halkay ka yimaadeen? Jawaabtu waxaa weeye: saddexda kolmood waxay ka yimaadeen, laba kolmo waxaa iska leh xiggashadii Asmi ay soo xiggatay hadalkii Axmed “ ”. Waayo? Asmi markay soo xiggatay hadalkii Axmed, xeerku waxaa weeye in ay dhex-geliso laba kolmo. Hal-ka kolmo ee casaanka ahna waxaa iska leh xiggashadii ugu

horaysay ee uu Axmed kasoo xiggtay Xasan ‘ ’. Ereyga ay kusoo gebo-gebaysay xiggasha Asmi oo ah “bixiyaan” wuxuu ku dhex-jiraa xiggashadii hore ee Axmed, waxaanu wataa oo la soda hal-dhibic oo astaanka kolmo ah ’. Waxaa kale oo lagusii darayaa xiggashadii Asma oo ah laba kolmo ”. Sidaa daraadeed, wuxuu noqonayaa – bixiyaan’”

Tusaalaha labaad:

Maxamed X. Yoonis ayaa qoray buug ciwaankiisu yahay *Taariikhda Gabayadda*. Saddar buugga ku jirta ayaynu halkan kusoo qaadanaynayaa. Ka dibna, waxaynu sharaxaynayaa, habka loosii kala-xigganayo qoraalka.

Tudducdii uu buugga ku qoray Maxamed X. Yoon waatan:

1. **Taariikhda Gabayadda By Maxamed X. Yoonis**: Wakhtigii ay gabayadu bilaabmeen lama garanayo.

**Xiggasho 1aad**:

Yuusuf ayaa soo xiggtay qoraalkii uu Maxamed X. Yoonis kusoo qoray buuggiisa *Taariikhda Gabayadda*. Waatan xiggashii Yuusuf uu soo xiggtay Maxamed X. Yoonis.

Xiggashadii Yuusuf waatan:

2. Maxamed X. Yoonis wuxuu buuggiisii *Taariikhda Gabayadda* ku qoray, “Wakhtigii ay gabayadu bilaabmeen lama garanayo.”

**Xiggasho 2aad**:

Shabcaan ayaa sii xiggatay qoraalkii Yuusuf.

Xiggashadii Shabcaan waatan:

3. Yuusuf wuxuu qoray, "Maxamed X. Yoonis wuxuu buuggiisii *Taariikhda Gabayadda* ku qoray, 'Wakhtigii ay gabayadu bilaabmeen lama garanayo.'"

Tusaale saddexaad:
**Qoraalkii uu qoray Cali**: Waxaan ahay Soomaali.

**Xiggashada 1aa:**
**Maxamed oo kasoo xiggtay Cali**: Cali wuxuu qoray, "Waxaan ahay Soomaali." (*Qoraalkan waxaa qoray Maxamed oo kasoo xiggtay Cali*).

**Xiggashada 2aad:**
**Cabdiraxmaan oo kasii xiggtay Maxamed**: Maxamed wuxuu qoray, "Cali wuxuu yidhi, 'Waxaan ahay Soomaali.'"

Halkan u fiirso: "Cali wuxuu yidhi, 'Waxaan ahay Soomaali.'" (*Astaanta Kolmo ee midabka doogadda [cagaarka] ah, ee labada dhibcood " " ah, waxaa ku dhex jira qoraalkii uu Cabdiraxmaan kasoo xiggtay Maxamed—xiggashadii 1aad. Astaanta kolmo ee midabka casaanka ah, ee hal-dhibic ' ' ah, waxaa ku dhex-jira qoraalkii uu Maxamed kasoo xiggtay Cali—xiggashadii 2aad*).

**U fiirso**: Qoraalka Cali ee ugu horeeyaa ma laha astaanta kolmo; sababtoo ah, Cali isaga ayaa iska leh qoraalka, ee maaha mid uu soo xiggtay. Laakiin sidaan hore usoo dhigganay, markii uu Maxamed soo xiggtay qoraalkii Cali, wuxuu Maxamed isticmaalay astaanta Kolmo si uu akhristaha u tuso hadalkii uu Cali kasoo xiggtay. Taas waynu soo dhiganay. Iminka waxaa inagu cusub, habka uu Cabdiraxmaan usoo xiggtay hadalkii uu Maxamed kasoo xiggtay Cali.

Cabdiraxmaan wuxuu sameeyey: hadalkii Maxamed oo dhamays-tirran ayuu soo xigtay. Wuxuu dhex-galiyey astaanta Kolmo. Laakiin, maadaama qoraalkii Maxamed uu watay

astaanta Kolmo, Cabdiraxmaan astaantii Kolmo si kale ayuu u badalay.

Hadaad u fiirsato xiggashada saddexaad ee Cabdiraxmaan, waxaad arkaysaa in uu marna isticmaalay astaanta Kolmo oo dhamays-tirran oo laba dhibcood ah **“ ”** marna uu isticmaalay iyadoo aan dhamays-tirrnayn oo hal dhibic ah **‘ ’**. Halka ugu danbaysana ee uu qoraalku ku dhamaadayna wuxuu isticmaalay saddex dhibcood **’”**. Sababtuna waxaa weeye: marka aad soo qaadato xiggasho wadata astaanta Kolmo, waxaad xiggashadii aad soo qaadatay ee ugu danbaysay u isticmaalaysaa astaanta Kolmo oo dhamays-tirran oo laba dhibcood ah **“ ”**. Xiggashadii kasii horaysay ee uu soo xigtay qofkii kaa horeeyeyna (ee xiggashada kusii dhex-jirtay), waxaad u isticmaalaysaa astaanta Kolmo oo aan dhamays-tirnayn oo hal dhibic ah **‘ ’**. Marka ay xigashadu dhamaatana waxaad kusoo xidhaysaa saddex dhibcood **’”**. Aynu sii sharaxno inagoo kala qaad-qaadayna ereyada.

**OGEYSIIS**: Sida loo isticmaalo xiggasho kusii dhex-jirta xiggasho kale, waxaad ka helaysaa Youtube video aan duubay iyada oo maqal-iyo-muuqaal ah, oo aan si fudud usii sharaxayo. Fadlan booqo boggayga Youtube. Waxaad Youtube ku qortaa: *Xeerka Astaamaha Qoraalka*. Kadib, waxaad ka doorataa cutubka aad doonayso. Cutubkan waxaa la yidhaa: Cutubka Kolmo.

3. *Marka aad doonayso in aad soo xiggato qoraal wada-socda, laakiinse aad doonayso in aad qayb ka mid ah qoraalka soo xiggato, qaybaha kalena aanad soo xigganin. Waa qoraal wada-socda oo aad kasoo xigganayso qayb ka mid ah, qaybta kalena aanad soo xigganaynin.*

Tusaalaha kowaad:
Qoraalkan waxaa qortay Samiira Maxamed.

**Qoraalkii Samiira Maxamed**: Soomaalidu waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo deggaan. Waa dad isku midab ah oo aan muuq-ahaan la kala sooci karin.

**Xiggasho caadi ah:**

4. Samiiri waxay qortay, "Soomaalidu waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo deggaan. Waa dad isku midab ah oo aan muuq-ahaan la kala sooci karin."

**Xiggasho qayb ka mid ah qoraalka**:
"Soomaalidu . . . Waa dad isku midab ah . . . muuq-ahaan[a] la kala sooci karin."

Xiggashaddan aynu sharaxno (u fiirso meelahan cas-cas ee soo socda):

"Soomaalidu **. . .** Waa dad isku midab ah **. . .** muuq-ahaan**[**a**]** la kala sooci karin."

**Sharaxaad**:
Bal u fiirso sidaan xiggashadan u qoray. Waa xiggasho ka yara adag tii hore. Waxay u baahan-tahay in aad si qoto-dheer ugu fiirsato. Hadii aad marka hore fahmi waydo, ku noq-noqo ilaa inta aad ka fahmayso. Aan si faah-faahsan u sharaxo.

Ta koowaad, waxaan doonaayey in aan soo xiggto qayb ka mid ah qoraalka Samiira; qaybna aan ka tago oo aanan soo xigganin. Sababtoo ah, ma doonaayo in aan qoraalka oo dhan soo xiggto. Intii aan uga baahna ayuunbaan soo xiggtay. Ta labaad, waxaan isticmaalay *saddex dhibcood* oo aan u bixiyey "Astaanta Fullul" (eeg Cutubka 12aad) iyo astaan aanaynu hore u arkin oo aan isticmaalay; waa astaanta aan u bixiyey "Astaanta Ardaa" **[ ]** (eeg Cutubta 11aad). Aan micneeyo dhamaantood.

Samiira qoraalkeeda waan goo-gooyey oo intii aan rabay ayaan soo xiggtay. Qaybta hore ee qoraalka waxaan kasoo

qaatay kelmeda "*Soomaalidu*" waxaanan iska dhaafay, oo aanan soo xigganin, intii ku xiggtay oo dhan, oo ahayd ~~*waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo deggaan*~~. Waxaan hadana soo xiggtay, "*Waa dad isku midab ah*." Ka dibna, waxaan ka booday oo aanan soo xigganin ereyada ah "~~*oo aan*~~." Intaas ka dib, waxaan soo xiggtay qaybta qoraalkeeda u danbeeya oo ah "*muuq-ahaan la kala sooci karin*." Sababta aan sidan u sameeyey waxaa weeye: mar-marka qaarkood ayaa waxaad doonaysaa in aanad qoraalka dhamaantii soo wada xigganin, ee aad nuxurka qoraalka oo kaliya soo qaadato. Kolba inta aad doonto waad ka teggi kartaa. Adiga ayay kugu xidhan-tahay.

Waxaad kale oo aad is waydiinaysaa: waa maxay saddexdan dhibcood ee qoraalka ku dhex jiraa? Waa su'aal fiican. Meesha ay ku jiraan saddexda dhibcood waxay tilmaamayaan in uu hadal ku jiray meeshaas, laakiinse aan lasoo xigganin. Aan si kale u idhaahdo. Saddexda dhibcood waxay sheegayaan in qoraalkii qayb ka mid ah laga taggey oo aan lasoo xigganin. Markaa saddexda dhibcood waxay galeen meeshii laga saaray qoraalkii. Tusaale ahaan, waxaan doonayaa in aan soo xiggto qoraalkan: "Soomaalidu waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo deggaan." Waxaan doonayaa in aanan soo xigganin ereyadan: "waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo deggaan." Markaan ereyadaas meesha ka saaro, waxaan meeshoodii gelinayaa saddexda dhibcood; waxaanan u qorayaa sidan: "Soomaalidu . . ." Saddexdan dhibcood waxay sheegayaan in aanan soo xigganin (oo aan ka taggey) weedhahan, "~~waxay wadaagaan af, dhaqan, diin, iyo deggaan~~." Markaa si aan akhristaha u tuso in aan qaybtaas ka tegay, waxaan meeshoodii gelinanaa saddexda dhibcood.

Hadana waxaan soo qaatay qaybta ku xiggta. Qaybta ku xigta waxay u qornayd sidan: "Waa dad isku midab ah oo aan muuq-ahaan la kala sooci karin." Laakiin, waxaan doonayaa in aanan soo xigganin (oo aan ka taggo ama ka saaro) ereyadan: "oo ah." Markaan labadan weedhood ka taggo, meeshoodii waxaan gelinayaa saddex dhibcood ( . . . ). Markaa waxaa kuusoo baxaya: "Waa dad isku midab ah . . . muuq-ahaan la

kala sooci karin." Intaas waad ila fahantay. Meeshii weedhaha aan ka saaray, waxaan galiyey saddex dhibcood (Astaanta Fullul).

Iminkana aynu sharaxno Astaanta Ardaa **[ ]** ee aan isticmaalay, iyo sababta loo isticmaalo. Si aad u fahanto, bal aynu dib u akhrino qoraalkii aynu goo'goyney. Sidan ayuu noqonayaa: "Soomaalidu . . . Waa dad isku midab ah . . . muuq-ahaan la kala sooci karin." Intaas waynu isla garanay. Laakiin, markaad akhrido waxaa kuusoo baxaaya in weedhan "muuq-ahaan" aanay si sax ah ula soconin qoraalka. Waa in ay weedhanu u qorantaa oo ay noqotaa "muuq-ahaan**a**" oo aynu raacinaa xarafka "**a**" si micnuhu sax u noqdo. Ma fahantay?

Aan sii micneeyo. Si aad u fahanto, waxaynu si caadi ah u qoraynaa ereyadii aynu soo xigganay, inagoo ka saarayna saddexdii dhibcood (si fahanku kuugu fududaado). Marka aynu caadi u qorno, sidan ayay noqonayaan: "Soomaalidu waa dad isku midab ah, muuq-ahaan la kala sooci karin." Bal mar labaad akhri. Waxaad arkaysaa in aanay sax ahayn weedhan "muuq-ahaan." Bal aynu sida saxda ah u qorno: "Soomaalidu waa dad isku midab ah, muuq-ahaan**a** la kala sooci karin." Bal eeg. Markii aan ku daray xarafka "**a**" micnihii sax ayuu noqday. Intaas waad ila fahantay.

Laakiinse qoraalkii aan soo xiggtay kumuu jirin xarafka "**a**." Anigana waa iga mabnuuc in aan ku darro xaraf, xarfo, ama weedho siyaado ah qoraalka aan soo xiggtay. Qoraalka aan soo xiggtay kuma dari karo wax siyaado ah, sidii uu xeerka xiggashadu ahaa ee aynu soo dhiganey. Laakiin, hadii aan go'aansado in aan ku darro xarfo siyaaado ah, waa in aan qoraalka ku muujiyaa xarfaha siyaaddadda ah ee aan ku daray qoraalka aan soo xiggtay. Si aan u muujiyo xarfaha siyaaddadda ah ee aan ku daray, waxaan isticmaalayaa astaanta Ardaa **[ ]**. Markaa xarafka "**a**" ee aan dhex-galiyey Astaanta Ardaa **[**a**]**, waxay tilmaamaysaa in aan anigu qoralka xiggashada ah ku dhex-daray xarafka "**a**." Qoraalkii xiggashada ahaa oo si sax ah u qoranina waa kan.

"Soomaalidu . . . Waa dad isku midab ah . . . muuq-ahaan[a] la kala sooci karin."

Sababta sidan loo sameeyaa waxaa weeye: marka aad doonayso in aad qoraal dheer kalasoo dhex baxdo inta ugu muhiimsan ee aad adigu doonayso.

Waxaa kale oo aad aragtaa in aan "xaraf weyn" ku bilaabay weedha "Waa." Hore waxaynu usoo dhigganay in aan xarafka ku jira badhtanka qoraalka laga dhigi karin "xaraf weyn" hadii aanu ahayn magac iyo wixii la mida ah. Laakiin, halkani waa xiggasho oo sidii uu u qornaa ayaa loo qorayaa, ama dhexda haku jiro, ama yaanu ku jirin. Mararka qaarkood waxaa dhaca in xaraf-weyn oo ku dhex-jira xiggashada aad ka dhigi-karto xaraf-yar. Waxay ku xidhan-tahay meesha uu ku jiro xarafka aad doonayso in aad yaraysaa. Siday doontaba ha ahaatee, hadii aad doonayso in aad xaraf-weyn oo ku dhex-jira xiggasho aad ka dhigto xaraf-yar, waxaad isticmaashaa Astaanta Ardaa. Sida aan ugu isticmaalay xarafkii **[**a**]** ee aan ku dhex-daray qoraalka kor-ku-xusay u isticmaal. Xarafka-weyn waxaad ka dhiggataa xaraf-yar adigoo dhex-gelinaya astaanta Ardaa **[ ]**.

Sababta loo muujinaayo weedhaha lagga tagey, iyo sababta loo muujinaayo xarfaha lagu daray xiggashadu, waxaa weeye: waxaa laga hor-tagayaa in lagu xad-guddbo qoraalka ay dadku qoraan, oo lagu daro ereydo siyaado ah, ama laga reebo ereyo ku jiray qoraalkooda; taas oo noqonaysa, abeen abuur.

Tusaalalaha labaad:

Qoraalkan waxaa qortay Yaasmiin Yuusuf.

**Qoraalkii Yaasmiin**: Dadkii qurbaha u dhoofay badankoodii way ku khasaareen; sababtoo ah, caruurtii ayaa ka xumaatay.

**Xiggasho caadi ah**:

5. "Dadkii qurbaha u dhoofay badankoodii way ku khasaareen; sababtoo ah, caruurtii ayaa ka xumaatay."

**Xiggasho qayb ka mid ah qoraalka**:

6. "Dadkii qurbaha u dhoofay . . . way ku khasaareen . . . [waayo] caruurtii ayaa ka xumaatay."

Xiggashaddan aynu sharaxno (u fiirso meelahan cas-cas):
"Dadkii qurbaha u dhoofay . . . way ku khasaareen . . . [waayo] caruurtii ayaa ka xumaatay."

**Sharaxaad**:

Sidii aan hore usoo sharaxay, waxaan sameeyey: xarfahan soo socda ee midabka doogadda (cagaarka) ah, ee aan liidka dhex-mariyey, ayaan ka dhex saaray qoralka aan soo xiggtay: "Dadkii qurbaha u dhoofay ~~badankoodii~~ way ku khasaareen; ~~sababtoo ah~~, caruurtii ayaa ka xumaatay." Weedhahaas doogadda (cagaarka) ah ee aanan soo xigganin (ee aan ka tagey), waxaan meeshoodii geliyey (oo aan ku bedelay) saddex dhibcood: "Dadkii qurbaha u dhoofay . . . way ku khasaareen . . . caruurtii ayaa ka xumaatay." Ka dib, waxaan xiggashada dhex-geliyey weedh aan ku jirin markii hore, oo aan anigu dhex-geliyey. Weedhaas aan dhex-galiyey waxaa weeye: "Waayo." Si aan u muujiyo in aan weedhan anigu dhex-galiyey (oo aanay hore ugu jirin qoraalka aan soo xiggtay), waxaan isticmaalay astaanta Ardaa [ ]. Markaa siddan ayay noqotay: "Dadkii qurbaha u dhoofay . . . way ku khasaareen . . . [waayo] caruurtii ayaa ka xumaatay." Waxaa kale oo aanan soo qaadanin kolmo iyo hakad-kii ku jiray qoraalka.

**Hadaan soo gaabiyo**:

1. (. . .) Saddexda dhibcood waxay tilmaamayaan in ay jiraan weedho aan lasoo xigganin oo laga tegay.
2. [ ] Astaantan Ardaa waxay tilmaamaysaa in weedhaha ama xarfaha ku dhex jira Astaantan Ardaa ay yihiin weedho ama xarfo lagu daray xiggashada, laakiin aan hore ugu dhex-jiray qoraalka lasoo xiggtay.

4. *Astaanta Kolmo isticmaal marka aad soo xigganayso hadal uu qof yidhi. Marka aad soo xigganayso hadal uu qof yidhi, haku darin kelmed aanu odhanin ama kelmed uu yidhi si kale ha u odhanin. Waa khalad, waana ka xaaraan xeerka xiggashada. Tusaale ahaan, hadii uu madaxweynuhu yidhaahdo, "Waan soo noqday." Adigu haka dhigin, "Waan soo laabtay." Madaxweynuhu muu odhanin "laabtay" ee wuxuu yidhi "noqday." Erey-erey u qor, adigoon waxba ka bedelaynin. Ereyada madaxweynahana waxaad dhex galisaa astaanta Kolmo.*

Tusaale:

Waraysigii Madaxweyne Siilaanyo:

Hadalkii Siilaanyo: Waxaanu kasoo noqonay Wadanka Itoobiya; waxaananu ka wada-hadalay horumarinta dhaqaalaha ee labada wadan.

**Xiggasho**:

**SAX**: Madaxweyne Siilaanyo ayaa maanta markuu garoonka diyaaradaha ee Cigaal International Airport kasoo degay, jaraa'idka ugu waramay afaafka Madaarka. Madaxweynuhu wuxuu yidhi, "Waxaanu kasoo noqonay Wadanka Itoobiya." Madaxweynuhu wuxuu hadalkiisii sii raaciyey, "[W]axaananu ka wada hadalay horumarinta dhaqaalaha ee labada wadan."

**Khalad**: Madaxweyne Siilaanyo ayaa maanta markuu garoonka diyaaradaha ee Cigaal International Airport kasoo degay, jaraa'idka ugu waramay afaafka Madaarka. Madaxweynuhu wuxuu yidhi, "Waxaanu kasoo laabanay Wadanka Itoobiya. Madaxweynuhu wuxuu hadalkiisii sii raaciyey, Waxaananu ka wada hadalay horumarinta dhaqaalaha ee labada wadan."

Waxaad u fiirstaa labadaa qoraal meelaha ay kaga jirto astaanta kolmo. Qoraalka sare ee **SAX**-da ahi si saxan ayay

ugu jirtaa astaanta kolmo. Qoraalka labaad ee **Khalad**-ka ahna, meel khaldan ayay kaga jirtaa. Kow, qoraalka **Khalad**-ka ah, astaanta kolmo waxaa ku dhex jira hadalkii madaxweynaha iyo hadalkii weriyaha wax soo xiggtay. Laba, madaxeynuhu muu odhanin, **“**Markii su’aalo badan la waydiiyey ka dibna wuxuu ku daray.**”** Hadalkan waxaa iska leh weriyaha. Laakiin, maadaama hadalkan weriyuhu uu ku dhex jiro astaanta kolmo, lama kala-garanyo cida hadalka tidhi. Saddex, Madaxweynu muu odhanin “laabanay.” Madaxweynuhu wuxuu yidhi, “noqonay.” Saddexdaa khalad ayaa ku jira xiggashada **Khalad**-ka ah.

**Digniin**: *Marka aad warkan qorayso, ha bedelin ereyada uu isticmaalay qofka aad soo xigatay. Tusaale ahaan, ha odhanin: Maxdaxweynuhu wuxuu yidhi, “Waxaanu kasoo* ***laabanay*** *Wadanka Itoobiya.” Waa khalad. Madaxweynuhu muu odhanin, “****laabanay****.” Madaxweynuhu wuxuu yidhi “****noqonay****.” Ereyada afkiisa kasoo baxay sida ay ahaayeen u qor. Ta labaad, waxaad kala saartaa (oo aad kala xadeysaa) ereyada uu madaxweynuhu yidhi iyo kuwa aad adigu qortay adigoo isticmaalaya Kolmo.*

Tusaale:

Hadal uu qof yidhi oo aan soo xigtay.

**Hadalkii Dr. Cismaan**: Qaadku caafimaadka uma fiicna.

**Xiggasho**: U fiirso, dhowr-kan nooc ee aan usoo xiggtay hadalkii Dr. Cismaan. Intuba waa sax.

- Dr. Cismaan wuxuu yidhi, **“**Qaadku caafimaadka uma fiicna.**”**
- **“**Qaadku caafimaadka uma fiicna,**”** ayuu Dr. Cismaan yidhi.

Labadan tusaale ee kor ku xusan u fiirso. Xiggashadan aan isticmaalay waxaa weeye: marka aan soo xigganayo hadal uu qof yidhi, oo aan ahayn qoraal. Waxaan kala hor-mariyey habkii

aan u qoray xiggashada. Tusaalaha koowaad, marka aad qaabkaas u isticmaasho xiggashada, "hakad-ku" wuu ka horeynayaa xiggashada, dhexdiisana ma galayo. Marka xiggashadu dhamaantana, "joogsigu" wuxuu dhex-galayaa xiggashada; maadaama hadalkii uu dhamaaday. Tusaalaha labaad, waxaan ku bilaabay xiggashadii; sidaa daraadeed, "hakad-ku" wuxuu dhex-galayaa xiggashada; "joogsi-guna" wuxuu galayaa marka uu qoraalku dhamaado.

5. *Astaanta Kolmo marka aad isticmaalayso, ereyga ugu horeeya ee ku dhex-jira astaanta Kolmo, waxaad ka dhigtaa "xaraf weyn" (eeg Cutubka 1aad).*

Tusaale:

- Macalinkii wuxuu nagu yidhi, **"B**errito imtixaan ayaan idinka qaadayaa.**"**
- Soomaalidu waxay ku maah-maahdaa, **"W**addar-iyo-waaxid, iyamaa waalan?**"**
- Madaxweynuhu wuxuu yidhi, "**N**abada wadanka waa in la illaaliyaa."
- TV-ga Qaranku wuxuu yidhi, **"W**iigga soo socda hawada masoo geli-doono. Daawadayaashayadu raali hanaga ahaadaan.**"**

6. *Astaanta Kolmo isticmaal marka aad hadal ama qoraal aad soo xiggatay kala qayb-qaybinayso.*

Tusaalaha koowaad:

Qoraalkii Borofesoor Cali: Dowladaha Afrika waxaa dib-u-riday musuq-maasuq. Waxaana ugu wacan siyaasiyiinta Afrikaanka ah.

**Xiggasho goo'go'an**:

"Dowladaha Afrika waxaa dib-u-riday," ayuu yidhi Borofesoor Cali, "musuq-maasuq." Waa xaqiiq, waanan ku raacsanahay. "Waxaana ugu wacan," ayuu qoraalkiisii ku daray, "siyaasiyiinta Afrikaanka ah."

**Eeg**: *Halkan waxaan kala qaybiyey qoraal uu qoray Borofesoor Cali. Sababta aan u kala qayb-qaybiyey qoraalkani waxaa weeye: waxaan doonaayey in aan qoraalkaa aan soo xiggtay ku daro qoraal aan anigu leeyahay, si aan usii xoojiyo ama sii quweeyo qoraalka Borofesoor Cali; si aan u muujiyo in aan Borofesoor Cali fikradiisa ku raacsanahay.*

U fiirso meelaha ay gelayaan "hakad-ka" ama "joogsigu." Ma waxaa la dhex-galinayaa xiggashada, mise lama dhex galinayo?

Tusaalaha labaad:

Hadalkii Hadraawi: Heesta Beled-weyn waxaan sameeyey wakhti aan la kulmay gabadh aan aad uga helay. Laakiinse, wakhti umaan helin duruufo jiray awgood.

**Xiggasho goo'go'an**:

"Heesta Beled-weyn waxaan sameeyey," ayuu yidhi Hadraawi, "wakhti aan la kulmay gabadh aan aad uga helay." Odayga jacayl ayaa haleeyey wakhtigaas. "Laakiinse," ayuu hadalkiisiisii kusii-daray Hadraawi, "wakhti umaan helin duruufo jiray awgood."

7. *Astaanta Kolmo isticmaal marka aad soo xigganayso hadal ama qoraal gaaban*.

Tusaale:

- In aad ku tidhaahdo "jooji gaadhiga" khalad ayay ahayd.
- "Idin-ma raacayo," ayuu si cadho-leh u yidhi Guuleed.

- Haya'ddahan wadanka joogaa ma "samo-falbaa, mise waa "khasaare?" ayuu Cismaan i weydiiyey.

**Eeg**: Halkan waxaan soo qaatay ereyo uu qof kale yidhi ama qoray. Weedhaha uu qofku yidhi ama uu qoray waxaan dhex-geliyey qoraalkaygii. Si aan u kala xadeeyo (oo aan u muujiyo) weedhaha aan soo xiggtay, waxaan isticmaalay astaanta Kolmo, waxaanay akhristaha tusaysaa ereyada uu qofku yidhi ama qoray ee aan soo xiggtay si aan uga sooco kuwa aan anigu leeyahay.

Marka aad sidan u isticmaalayso astaanta Kolmo, adigoo dhex-galinaya qoraalkaaga, uma baahnid in aad isticmaasho "xaraf la weyneeyo," "joogsi," ama "hakad."

8. *Astaanta Kolmo isticmaal marka aad ka-hadlayso ciwaan buug, ciwaan maqaal, magac hees, magaca barnaamij ka baxa TV-ga ama radio-ga, iyo wixii la mid ah*.

Tusaale:

- Waxaan akhriyey buugga, "Hal ka haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa" ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan.
- Barnaamijka xiisaha badan ee ka baxa idaacada BBC-da ee "Todobaadka iyo Afrika" waa barnaamig fiican.
- Jariiddada "Washinton Post" waxay kasoo baxdaa Wadanka Maraykanka.
- Heesta la yidhaahdo, "Hooyo" waxaa sameeyey Abwaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi).
- Barnaamijka "Ii Dheh" waa barnaamij kasoo geli-jiray Radio Hargaysa.

- *Astaanta Kolmo waxaa kale oo loo isticmaalaa marka aad tilmaamayso arin aanad aaminsanayn, ama aad kasoo*

*hor-jeedo*.

Tusaale:

- "Dad-qal" ayaa maanta gabadh yar ku cunay suuqa. (**Eeg**: *astaanta Kolmo ee aan dhex-galiyey kelmeda* ***dad-qal*** *waxay tilmaamaysaa in aanan aaminsanayn inuu jiro wax la yidhaahdo "dad-qal"*).
- Shacabka "Soomaaliland" ayaa u debaal-degaya maalintii xornimada. (**Eeg**: *Marka uu qofku magaca Soomaaliland dhex galiyo astaanta Kolmo, wuxuu u jeedaa in aanu aaminsanayn gooni-isu-taaga Soomaaliland*).
- Waxaa Hargaysa yimi nin "sheekh" ah oo dadka ka "daweeya" jinka iyo sixirka. (**Eeg**: *Labada weedhood ee aan astaanta Kolmo dhex-geliyey: kelmeda "sheekh" marka aan dhex-gliyo astaanta Kolmo, waxaan u jeedaa in aanan aaminsanayn in ninkaasi uu sheekh yahay. Sidoo kale, kelmeda "daweeya" markaan dhex-geliyey astaanta Kolmo, waxaan muujinayaa in aanan aaminsanayn in ninkaas wixiisu ay dawo yihiin*).
- Sanaddahan ugu danbeeya waxaa soo baxay "fanaaniin" aad u tirro badan. (**Eeg**: *marka aan weedha* ***fanaaniin*** *dhex-geliyey Kolmo, waxaan u jeedaa in aanan aaminsanayn in ay yihiin fanaaniin dhab ah, ee ay yihiin dad iska heesay uun*).

9. *Marka aad qorayso "ciwaannada" iyo "magacyada" aan dhamayska-tirrayn, waxaad isticmaashaa astaanta Kolmo* (eeg Cutubka 15).

1. **Ciwaanka maqaalada lagusoo qoro jaraa'iddadda:**

- "Doorashadii Soomaaliland oo Dib-u-Dhacday."

- “Sarifkii Lacagta SISh oo Hoos-u-Dhacay.”
- “Dekeda Ber-ber oo ay la wareegtay DP World.”

2. **Magac-yadda sheekooyinka gaa-gaaban:**

- “Suul-cawro.”
- “Cigaal Shiidaad.”
- “Dheg-dheer.”
- “Diin iyo Dawaco.”

3. **Magac-yadda heesaha:**

- “Qarrad” Xasan Aadan Samatar
- “Nayruush” Tubeec iyo Magool
- “Sayllo” Xasan Adan iyo Sahra Axmed
- “Beled-weyn” Xasan Adan
- “Orod-Orod” Axmed Gaceyte Yuusuf
- “Waan kaa helaa” Faadumo Qaasim Hilowle
- “Waa la Guursadee” Axmed Naaji Sacad

4. **Magac-yadda barnaamij-yadda TV-yada ama raadiyo-yadda:**

- “Barnaamijka Caafimaadka.”
- “Maaweelada Caruurta.”
- “Barnaamijka Xoolaha.”
- “Barnaamijka Salaamaha.”
- “Ii dheh.”
- “Heesaha Hir-galay.”

5. **Ciwaanka cutub buug:**

- "Cutubka 5: Kolmo." (*Waa cutub ka mid ah buuggan*).
- "Hanaqaadkii Hadraawi." (*Cutub ka mid ah buugga "Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa" ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan*).
- "Sil-silada Xaydha." (*Cutub ka mid ah buuggaagtii dugsiyada*).
- "Suul-cawro." (*Cutub ka mid ah buuggaagta sheekho caruureeda*).
- "Dhuxul Dhagax." (*Cutub ka mid ah buuggaagtii dugsiga dhexe*).

10. *Astaanta Kolmo isticmaal marka aad qorayso 'ereyo' ama 'weedho' aanad micnahooda garanaynin, ama 'naanays' qof.*

Tusaale:

- Maansadii Hadraawi ee "Hambabar" waxaa tuducyaddeedii ka mid ahaa: Hunuushle hanaashle, "falaad hambe-baale." (**Eeg**: *weedhaha "Falaad hambe-baale" ee aan dhex-galiyey astaanta Kolmo, waxay tilmaamaysaa in aanan fahmin micnaha weedhaha "Falaad hambe-baale"*).
- Markaan arkayba waxaan ku idhi "yax." (**Eeg**: *waxaan halkan mu muujiyey in aanan fahmin ereyga "yax"*).
- Waxaa shirka furay Xasan "Indhoole." (**Eeg**: *halkan waxaan ku muujinayaa in aanan anigu naanay-taas ugu yeedhaynin Xasan; laakiin, ay tahay naanays uu dadku u yaqaano).*
- Maanta waxaa Xisbiga Tufaax kusoo biiray siyaasi Cali "Laan-gadhe." (**Eeg**: *halkan waxaan ku muujinayaa in*

*aanan anigu naanay-taas ugu yeedhaynin Cali; laakiin, ay tahay naanays uu dadku u yaqaano).*

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsatooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

1. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

1. "Weli ma akhriday "*Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*." ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?" ayuu i waydiiyey.
2. "Weli ma akhriday '*Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*.' ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?" ayuu i waydiiyey.
3. "Weli ma akhriday *Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*. ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?" ayuu i waydiiyey.
4. "Weli ma akhriday '*Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*. ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?'" ayuu i waydiiyey.

2. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

1. Ka dib markii aan akhriyey sheekadii gaabnayd ee Tuke iyo Tuur, waxaan jeclaystay in aan caruurtaydana usoo iibiyo.
2. Ka dib markii aan akhriyey sheekadii gaabnayd ee ‘Tuke iyo Tuur,’ waxaan jeclaystay in aan caruurtaydana usoo iibiyo.
3. Ka dib markii aan akhriyey sheekadii gaabnayd ee “Tuke iyo Tuur,” waxaan jeclaystay in aan caruurtaydana usoo iibiyo.

3. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

- Askarigii wuxuu tuuggii weydiiyey halkeed joogtay xalayto markay ahayd 11:00-kii habeenimo.
- “Askarigii wuxuu tuuggii weydiiyey, ‘Halkeed joogtay xalayto markay ahayd 11:00-kii habeenimo.’”
- Askarigii wuxuu tuuggii weydiiyey, “Halkeed joogtay xalayto markay ahayd 11:00-kii habeenimo.”

4. Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

- “Hadii aad akhriday maqaalkaygii “Tacliinta Maanta,” ee aan saaka kusoo qoray “Jarii’ddada Hilaac,” waad fahmi lahayd sababta aan uga niyad-jabsanay wax-barashadeena.”
- Hadii aad akhriday maqaalkaygii “Tacliinta Maanta,” ee aan saaka kusoo qoray “Jarii’ddada Hilaac,” waad fahmi lahayd sababta aan uga niyad-jabsanay wax-barashadeena.
- Hadii aad akhriday maqaalkaygii ‘Tacliinta Maanta,’ ee aan saaka kusoo qoray ‘Jarii’ddada Hilaac,’ waad fahmi

lahayd sababta aan uga niyad-jabsanay wax-barashadeena.

5. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay Kolmo.

1. “Weligey maan arkin “fanaan sidan u cod macaan,” ayuu yidhi Cali Sugule.”
2. “Weligey maan arkin fanaan sidan u cod macaan,” ayuu yidhi Cali Sugule.
3. “Weligey maan arkin fanaan sidan u cod macaan,” ayuu yidhi Cali Sugule.”

6. sheekh mustafe xaaji ismaaciil wuxuu yidhi guusha ugu saraysa ee uu qofku gaadhaa waxaa weeye in uu jannada galo sheekh mustafe wuxuu sii raaciyey hadii uu qofku yahay qof faqiir ah goblan ah wax aqoon ahna aan lahayn laakiinse uu aakhiro jannada galo waa qof guulaystay hadii uu qofku leeyahay hanti aad u badan ubad iyo haween badan iyo aqoon sare oo uu aakhiro cadaabta galo waa qof guul daraystay hadalkaas sheekh mustafe waa hadal xaqiiq ah.

7. dr xuseen bulxan wuxuu buuggiisii politics of cain: one hundred years of crises in somali politics and society ku qoray burburka soomaaliya waxaa sabab u ahaa saddex arimood wuxuu si qotodheer u sharaxay saddexdaas arimood. wuxuu kale oo uu ku qoray siyaasiyiintu qayb lixaad leh ayay ka qaateen burburkii soomaaliya dood fiican ayuu soo bandhigay dr xuseen.

8. wadankeenu soomaaliland wuxuu u baahan yahay in loo sameeyo manhaj waxbarasho ayuu yidhi wasiirka waxbarashada ee soomaaliland laakiinse hadii aan si dhakhso ah loo samaynin man-haj ayuu sii raaciyey wasiirku waxbarashadeenu khatar ayay ku sugantay.

9. anigu ma aaminsani in ay jiraan waxa loo yaqaano dadqal iyo qori-is-maris waa sheekooyinka caruurta lagu cabsiiyo bajiyo ka waran dhegdheer iyo suurcawro iyagu ma waxay ahaayeen dad dhab ah oo jira.

10. buuggii aan qoray. . . dad badan ayaa ka cadhooday . . . dood buugga ku saabsan ayaan qabanayaa ee qofku suaal hayaa haksoo qaybgalo ayuu dr cali kusoo qoray jariiddada hilaac waxaa kale uu codsada. . . waan faahfaahinayaa dadkana waan u sharaxayaa wixii aan buugga ku qoray oo si khaldan loo macneeyey

# CUTUBKA 6

## *Moos :*

ASTAANTAN WAXAAN LUQADA INGIRIISIDA lagu yidhaahdaa, "colon." Hadaba si loo-helo erey af-Soomaali ah oo u dhigma "colon," waxaa lagama-maar-maan noqotay in la sameeyo erey-bixin cusub. Ereyga "colon" waxaa af-Soomaali ahaan ugu dhow ereyga "Moos;" sababtoo ah, waa astaan kala-moosta (kala-xadaysa) dhowr weedhood oo dhamays-tirran oo is-ku-xiga. Marka aad wax qorayso, astaanta moos waxaa kaliya oo aad ku isticmaali kartaa marka aad qorayso weedho dhamays-tirran. Astaanta moos haku isticmaalin weedhaha aan dhamayska-tirrayn. Astaanta moos-ku waxay ka mid tahay astaamaha ugu adag ee la isticmaalo; sidaa awgeedna, waxayna ka mid tahay kuwa ugu badan ee sida khaldan loo isticmaalo.

Cutub-kan ayaan ku sharaxayaa xeerarka iyo dhamaan meelaha lagu isticmaalo astaanta Mooska.

**Digniin**: Iska ilaali in aad isku khalado "Astaanta Moos ( **:** )" iyo "Astaanta Far-Suul ( **;** )." Isticmaal-koodu aad ayuu u kala duwan-yahay; markaa haysku khaldin ee iska hubi (laba cutub oo isku xigga ayaa sharaxaya kala duwanaan-shaha labadaas astaamood).

### AQOONTAADA TIJAABI

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka

danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

waa waxaan ku raacay sheeko nin la odhan jiray geeddi oo safar dheer soo galay daal badan iyo gaajo baanina hayso ayaa wuxuu soo galay maqaaxi maqaaxidda waxaa fadhiya nin ay xiggto ahaayeen oo la odhan jiray guuleed oo hilib jiidh iyo barruur ah lasoo hor dhigay geeddi wuxuu doonaayey in uu guuleed hilibka ka marti geliyo oo uu wax ka siiyo laakiin guuleed wuu iska dhego-tirray sheekadan ayaa dhexmartay geeddi waar guuleed sow nabad maaha guuleed oo hilibkii tooridii ku tur turqaya lays yidhi geeddi saaka ayaan degsiimaddii kasoo bixitimay guuleed oo cad barruur weyn leh afka kusii wada dantaada ayaa ku waday geeddi degmaddiise waa lagu nabad qabay guuleed oo canku u buuxo la ii sheeg geeddi reerkaagii waan sii maray guuleed oo cad jiidh iyo baruur ah isku qaadanaya) marin kaaga ayaa ahaa geeddi haweenay daaddii xalay bay umushay guuleed sedkeedaa ahaa geeddi way mataanay say guuleed oo canku u buuxo sideeday u uur weynayd geedd isla xalayto mataanihii midbaa dhintay guuleed wedkiisaa galay geeddi kii kalena saaka ayuu raacay guuleedi meel uu ku hadhuu garan-waayey geeddi birtaadu af weynaa guuleed waan ku ogaa geeddi oo is hayn la oo cadka aad cunaysaa barruur weynaa guuleed oo subaggu labadda qowllal ka daayo waa waxaan ku racay

**SAX**

“WAA WAXAAN KU RAACAY”
Sheeko

Nin la odhan-jiray “Geeddi” oo safar-dheer soo galay, daal-badan iyo gaajo ba’annina ay hayso, ayaa wuxuu soo galay maqaaxi. Maqaaxidda waxaa fadhiya nin ay xiggto ahaayeen oo la odhan-jiray “Guuleed.” Geeddi wuxuu u yimi Guuleed oo hilib jiidh-iyo-barruur ah lasoo hor-dhigay. Geeddi wuxuu doonaayey inuu Guuleed hilibka ka marti-geliyo oo uu wax ka siiyo. Laakiin, Guuleed wuu iska dhego-tirray; sheekadan ayaana dhex-martay:

**Geeddi**: “Waar Guuleed! Sow-nabad maaha?”

**Guuleed** (oo hilibkii toorridii ku tur-turqaya): “Lays yidhi.”

**Geeddi**: “Saaka ayaan degsiimaddii kasoo bixitimay.”

**Guuleed** (oo cad barruur weyn leh afka kusii wada): “Dantaadaa ku waday.”

**Geeddi:** “Degmaddiise waa lagu nabad-qabay.”

**Guuleed** (oo canku u buuxo): “La ii sheeg.”

**Geeddi**: “Reerkaagii waan sii maray.”

**Guuleed** (oo cad jiidh iyo baruur ah isku qaadanaya): “Marin-kaagaa ahaa.”

**Geeddi**: “Haweenay-daaddii xalay-bay umushay.”

**Guuleed**: “Sedkeedaa ahaa.”

**Geeddi**: “Way mataanay-say.”

**Guuleed** (oo canku u buuxo): “Sideeday u uur weynayd.”

**Geeddi**: “Isla xalayto, mataanihii midbaa dhintay.”

**Guuleed**: “Wedkiisaa galay.”

**Geeddi**: “Kii kalena, saaka ayuu raacay!”

**Guuleed**: “Meel uu ku hadhuu garan-waayey.”

**Geeddi**: “Birtaadu af-weynaa.”

**Guuleed**: “Waan ku ogaa.”

**Geeddi** (oo is hayn la’): “Oo cadka aad cunaysaa barruur weynaa.”

**Guuleed** (oo subaggu labadda qowllall ka da’ayo): “***Waa Waxaan ku Raacay***.”

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee Astaanta *Moos*

1. *Astaanta moos isticmaal marka aad qorayso ashyaa (ama walxo) kala duwan, oo badan, oo isku daba-xidhiidhsan. Laakiin, waa inay ka horeysaa weedh dhamayska-tirrani.*

Tusaale:

- Marka aad safar u baxayso, waxaad u baahantay: sabuun, tuwaal, cadey, buste, salli, iyo barkimo.
- Maal-maha aanu doonayno in aanu xaflada sanad-la'ha ah dhignaa waxay kala yihiin: Khamiis, 10 Febraayo; Sabti, 12 Maarso; Axad, 18 Abriil; Isniin, 28 Meey; iyo Arbaca, 20 Luulyo.
    - Guddida Goboladu waxay soo booqdeen magaalooyin iyo gobolo ay ka mid yihiin: Burco, Togdheer; Hargaysa, Maroodi-jeex; Ber-bera, Saaxil; iyo Borama, Awdal.
    - Waxaan kaaga baahanay in aad ii keento: telefoon, saacad, laba shaadh, surwaal, iyo muraayad.
    - Waxaan u baahanay shaqaale xifad u leh: xisaabta, qoraalka, kombuyuutarka, iyo laydhka.

**Digniin**: Astaanta mooska ha u isticmaalin sidan soo socota.
**SAX**: Waxaan rabaa roodhi, shaah, iyo caano.
**Khalad**: Waxaan rabaa: roodhi, shaah, iyo caano.

2. *Astaanta moos isticmaal marka aad qorayso laba weedhood oo dhamays-tirran, oo isku xigga. Waxaad u isticmaashaa sidii aynu u isticmaali-jirnay "joogsiga" oo kale. Laakiin, mar-mar ayuunbaa sidan loo isticmaalaa. Mar walba ha u isticmaalin.*

Tusaale:

- Geedi aad ayuu u cadhaysnaa, waanu qaylinaayey: Shaqadii ayaa lagasoo eryey. (***Eeg***: *waxaan doonayaa in aan cadeeyo sababta uu Geedi u cadhaysnaa; sidaa awgeed, waxaan isticmaalay astaanta moos*).
- Yusur telefoonka may qabanin: Waxay garatay in ay soo wacayeen shirkadda telefoonadu.
- Lacagtii uu soo qaatay Axmed, wuu wada sadaqadaystay: Waxay ahayd mushaharkii ugu horeeyey ee uu qaato.

3. *Xarafka ku xigga astaanta moos haka-dhigin xaraf-weyn. Waxaad ka dhig xaraf-yar, marka aad qorayso ashyaa (walxo) is daba-taxan.*

Tusaale:

**SAX**: Marka aad safar u baxayso, waxaad u baahantay: sabuun, tuwaal, caday, buste, sali, iyo barkimo.

**Khalad**: Marka aad safar u baxayso, waxaad u baahantay: ~~S~~abuun, tuwaal, caday, buste, sali, iyo barkimo.

**SAX**: Amar kasoo baxay Wasaarada Cafimaadka: waa in shaqada lasoo gala 7:00 subaxnimo, hadana lasoo noqdaa 4:00 galabnimo.

**Khalad**: Amar kasoo baxay Wasaarada Cafimaadka: ~~W~~aa in shaqada lasoo gala 7:00 subaxnimo, hadana lasoo noqdaa 4:00 galabnimo.

4. *Astaanta moos isticmaal marka aad qorayso ashyaa (walxo) badan oo aad is hoos-dhigayso.*

Tusaale:

- Waxaan u baahanay shaqaale xirfad u leh:

1. maamulka iyo maareynta
2. xisaabaadka
3. korontadda (laydh-ka)
4. qoraalka
5. kombuyuutarka

**Digniin**: *Marka aad ashyaadan is hoos-dhigayso, shay kasta ku bilow xaraf yar, haku bilaabin xaraf weyn.*

Laakiin:

Waxaan u baahnahay waxyaabahan hoos ku xusan:

1. Gaadhi weyn oo qaadaya 5 qof.
2. Laba shandadood oo waaweyn.
3. Aba furaash oo yar-yar.
4. Saddex buste oo waaweyn.

**Digniin**: *Marka aad ashyaadan is hoos-dhigayso waxaad ku bilowdaa xaraf weyn maadaama ay yihiin weedho dhamays-tiran.*

Sharciyada Jaamacada:

a) Ardayga Jaamacada ku dhex-dagaalama waa la eryayaa.
b) Ardayga lacagta Jaamacada bixin waayaa, ma bilaabayo Jaamacada.
c) Ardayga la dagaalama macalimiinta Jaamacada, waa la eryayaa.
d) Ardayga imtixaanka dhaca laba-jeer, waa la eryayaa.

**Digniin**: *Marka aad ashyaadan is hoos-dhigayso waxaad ku bilowdaa xaraf weyn maadaama ay yihiin weedho dhamays-tiran.*

5. *Astaanta moos isticmaal marka aad qorayso: ciwaanka guud ee buugga iyo ciwaanka yar ee buuga.*

Tusaale:

- *Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa* Qalinkii Maxamed Baashe X. Xasan. (***Eeg**: ciwaanka guud ee buugga: Hal ka Haleel iyo ciwaanka yar ee buugga Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa. Labadaas u dhexeysii astaanta moos*).
- Politics of Cain: One Hundred Years of Crises in Somali Politics and Soceity By Hussein A. Bulhan.
- Hamadii Hal-abuurka: Macalin Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) Qalinkii Boobe Yuusuf Ducaale.

6. *Astaanta Moos isticmaal marka aad qorayso weedh dhamays-tirran oo weedha ka danbaysaa ay sii faah-faahinayso.*

Tusaale:

- Maxamed wuu helay wixii uu u dedaalaayey muddada-dheer: derejadii sarkaalnimo ee milatarigga.
- Cali Dheere farxad awgeed ayuu bood-booday: shahaadadii jaamacada ayuu ku guulaystay.

7. *Astaanta moos isticmaal marka aad qorayso aayad Quraan ah.*

Tusaale:

- Quraan 8:24 (***Eeg**: micnuhu waxaa weeye: Quraanka suuradiisa 8$^{aad}$, Aayada 24$^{aad}$*).

- Quraan 5:83 (***Eeg**: micnuhu waxaa weeye: Quraanka suuradiisa 5aad, Aayada 83aad*).
- Quraan 10:02 (***Eeg**: micnuhu waxaa weeye: Quraanka suuradiisa 10aad, Aayada 2aad*).

8. *Astaanta moos isticmaal marka aad qorayso saacada iyo daqiiqada. Saacada iyo daqiiqada u dhexeysii astaanta moos.*

Tusaale:

- 3:00 P.M. (*P.M. waxaad ka dhigtaa xarfo waaweyn. Lambarada tilmaamaya saadaca iyo xarafaha "P.M" waxaad u dhaxaysiisaa meel banaan; haysku dhejinin*).
- 4:30 A.M. (*P.M. waxaad ka dhigtaa xarfo waaweyn. Lambarada tilmaamaya saadaca iyo xarafaha "A.M." waxaad u dhaxaysiisaa meel banaan; haysku dhejinin*).
- 5:45 P.M.

9. *Marka aad qorayso hadal ama qoraal aad soo xiggatay ee weliba aad isticmaasho astaantana moos, xarafka ku xigga astaanta moos, ee ku dhex-jira xiggashada (kolmo), waxaad ka dhigtaa xaraf weyn.*

Tusaale:

- Sheekhii wuxuu yidhi: "**I**llaahay halaga baqdo."
- Macalinkii wuxuu yidhi: "**B**erito fasax ayaad tihiin."
- Waxaan u qoray: "**D**acwad ayaa laguu haystaa."

◆◆◆

## TALLO

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsatooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Moos.

1. Nasasho ayaan u baahanay saacado badan ayaan shaqaynaayey.
2. Nasasho ayaan u baahanay, saacado badan ayaan shaqaynaayey.
3. Nasasho ayaan u baahanay: Saacado badan ayaan shaqaynaayey.
4. Nasasho: ayaan u baahanay saacado badan ayaan shaqaynaayey.

2. Keebaa SAX ah.

- Waxaan dhoofayaa 7 30 am
- Waxaan dhoofayaa 7:30 a.m.
- Waxaan dhoofayaa 7:30 A.M.
- Waxaan dhoofayaa 7.30.a.m

3. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Moos.

1. Marka aan fasaxa helo ee safarka aan u baxo, waxaan u baahnaan-doonaa: shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.
2. Marka aan fasaxa helo ee safarka aan u baxo, waxaan u baahnaan-doonaa, shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.
3. Marka aan fasaxa helo ee safarka aan u baxo, waxaan u baahnaan-doonaa; shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.

1. Marka aan fasaxa helo ee safarka u baxo waxaan u baahnaan-doonaa shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.

4. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Moos.

1. Roobku dabaylo xoogan ayuu watay, guryo badan ayay dabayshu jiingadii ka qaaday.
2. Roobku dabaylo xoogan ayuu watay guryo: badan ayay dabayshu jiingadii ka qaaday.
3. Roobku dabaylo xoogan ayuu watay guryo: Badan ayay dabayshu jiingadii ka qaaday.

5. Ayaaddan Quraan-ka, teebaa si sax ah u qoran.

1. Quraan 12.40
2. Quraan 12,40
3. Quraan 12:40
4. Quraan 12 40

6. lacagteena hoos u dhacday si kor loogusoo qaado waa in suuqa lasoo galiyaa lacag doolar ah oo badan lacagta lagusoo iibiyo jaadka (qaadka) lagu bixiyaa lacagta wadanka lacagta wadanka suuqa laga saaraaa.

7. maanta marka aan suuqa taggo waxaa soo iibsanayaa waxyaabo badan shaad surwaal kabo saacad telefoon shandad iwm.

8. madaxweynuhu wuxuu yidhi nabadda wadanka hala illaaliyo.

9. tacliintu waxyaabo baddan ayuu qofku ka faa'iidaa xirfad gaar u ah oo uu barto luqada oo uu si fiican usii barto hab u fikirkiisa oo aad u fiicnaada aduunka oo uu la socdo iyo waxyaabo kale oo baan.

10. markii uu jaamacadii dhamaystay wuxuu gaadhay guushii uu ku hamiyaayey: shaqo fiican.

# CUTUBKA 7

## *Far-Suul ;*

ASTAANTAN WAXAA LUQADA INGIRIISIDA lagu yidhaahdaa “semicolon.” Si aan u helo erey af-Soomaali ah oo u dhigma xarafka “semicolon,” waxaan isku-deyey in aan sameeyo erey-bixin cusub. Ereyga af-Soomaaliga ah ee aan u bixiyey waxaa weeye: Far-Suul. Astaanta far-suul waa astaan miisaan-ahaan u dhaxaysaa “joogsiga” iyo “hakad-ka;” waxaan uga-jeedaa: waa astaan ka awood-badan “hakad-ka,” kana awood-yar “joogsigga.” Way ka awood-badantay “hakad-ka;” sababtoo ah, waxay isku-xidhaa laba weedhood oo dhamays-tirran; waanay ka awood yar-tahay “joogsigga;” sababtoo ah, laguma isticmaali karo dhamaadka weedhaha dhamayska-tirran.

Cutub-kan ayaan ku sharaxayaa xeerarka iyo sida loo isticmaalo astaanta far-suul.

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

maahmaah soomaalliyeed saddex hal saddex way bishaa qurxisaa hadii ay ka baddatose way biisaa kharibtaa badhiddu dumarka way bishaa haddii ay ka badatose way biisaa maskari geed way bishaa haddii ay ka badatose way biisaa saarna beel waa billaa haddii uu ka batose wuu biiyaa maahmaahdan waxaa curriyey nin soomaaliyeed oo la odhanjiray xasan geeddi buutow oo deexda banaadir ku dhashay xasan wuxuu goobjoog u ahaa wakhtigii uu gumaystaha talyaanigu koonfurta soomaaliya gacanta ku dhigey

maahmaahdu waxay ku socotay soo galeetigga talyaaniga wuxuu talyaaniga u sheegaayey inuu dhulka ku ahaa siyaaddo ku badashadiisuna xumaan soo jiidayso dadka soomaaliyee-na sidaa arrinka u arkaan

**SAX**

“Saddex [hal], saddex way bishaa [qurxisaa]; hadii ay ka baddato’se, way bi’isaa [kharibtaa].”

“Badhiddu dumarka way bishaa, haddii ay ka badato’se, way bi’isaa; maskari geed way bishaa, haddii ay ka badato’se, way bi’isaa; saarna beel waa billaa, haddii uu ka bato’se, wuu bi’iyaa.”

Maah-maahdan waxaa curriyey nin Soomaaliyeed oo la odhan-jiray Xasan Geeddi Buutow, oo deexda Banaadir ku dhashay. Xasan wuxuu goob-joog u ahaa wakhtigii uu gumays-taha Talyaanigu Koonfurta Soomaaliya gacanta ku dhigey.

Maah-maahdu waxay ku socotay soo galeetigga Talyaaniga. Wuxuu Talyaaniga u sheegaayey inuu dhulka ku ahaa siyaaddo ama soo-galeeti, ku badashadiisuna xumaan soo jiidayso, dadka Soomaaliyeed-na ay sidaa arrinka u fahmaan.

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee Astaanta *Far-Suul*

1. *Astaanta Far-Suul isticmaal marka aad qorayso weedhaha dhamayska-tirran ee isku-daba-xidhiidhsan.*

Tusaale:

- Berrito ilasoo hadal; markaas ayaad ii waramiye.
- Kiradii guriga waan bixiyey; waa in furaha guriga lay siiyaa.
- Wakhtigii shaqadu wuu dhamaaday; waynu rawaxaynaa.
- Berrito waan dhoofayaa; waxaan soo noqonayaa saddex-bilood ka dib, haduu Eebe idmo.
- Caruurta sii ilaali; ha fududaysan.

2. *Astaanta Far-Suul isticmaal marka aad is-daba-dhigayso, ama aad taxayso, magaalooyin iyo wadamada ay ku yaalaan.*

Tusaale:

- Waxaan soo booqday Dubai, U.A.E; London, UK; Amisterdam, Holland; Washington D.C., U.S.A; iyo Toronto, Canada. (***Eeg***: *marka hore waxaad qoraysaa magaalada magaceeda; ka dibna, waxaad ka danbaysiinaysaa "hakad. Marka aad intaa qorto, waxaad ku xigsiisaa wadanka*

*magiciisa; ka dibna, waxaad ka danbaysiisaa astaanta far-suul*).

- Shirka waxaa ku kulmay dad aad u tirro-badan oo ka-kala-socday wadamada Nayroobi, Kiiniya; Hargaysa, Soomaaliland; Adiis Ababa, Itoobiya; Qaahira, Masar; Muqdisho, Soomaaliya.

**Eeg**: *U fiirso tusaalooyinkan ugu danbeeya. Marka aad qorto magaca caasimada, waxaad ku xigsiisaa "hakad;" ka-dibna, waxaad ku xigsiisaa magaca wadanka; ka-dibna, waxaad ku xigsiisaa astaanta Far-Suul. Hadii aad magacyada caasimadaha iyo wadanka oo dhan u dhaxaysiiso "hakad" kaliya, waxaa adkaanaysa in la-kala-saaro, ama la-kala-garto, magaalada iyo wadanka. Dadka aan aqoonin magaalooyinka aad ka hadlaysaa, ma fahmayaan*.

3. *Astaanta Far-Suul isticmaal marka aad isticmaasho ereyada isku xidha weedhaha dhamayska-tirran ee ay ka mid yihiin: sidaa awgeed; sidaa daraadeed; sababtoo ah; dababdeeto; intaa ka dib; iyo wixii la mid ah*.

Tusaale:

- Marka aan dhameeyo howsha aan hayo, ayaan adigana ku caawin-doonaa; sidaa daraadeed, in yar ii samir.
- Waxaa shirkii lagasoo saaray masuul ka tirsan xisbiga; sababtoo ah, rabshad ayuu sameeyey.
- Nin dhalinyaro ah ayaa dukaan jabsaday; dabadeed, ciidanka booliska ayaa xidhay.
- Dr. Guuleed shirkii wuu ka hadlay; intaa ka dibna, wuu aamusay.

4. *Astaanta Far-Suul marka aad isticmaasho, ereyga ka danbeeya Far-Suul waxaad ka dhigtaa xaraf yar; haka*

*dhigin xaraf weyn*.

Tusaale:

**SAX**: Anigu Burco ayaan joogaa**;** **i**saguna Xamar ayuu joogaa.

**Khalad**: Anigu Burco ayaan joogaa**;** **I**saguna Xamar ayuu joogaa.

**SAX**: Jaamacadaha waa in la-tayeeyaa**;** **h**adii kale, arday badan ayaa ku khasaaraysa.

**Khalad**: Jaamacadaha waa in la tayeeyaa**;** ~~**H**~~adii kale, arday badan ayaa ku khasaaraysa.

◆◆◆

## TALLO

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Weedhahan keeba si sax ah loo isticmaalay astaanta Far-Suul.

1. buska ugu danbeeyaa wuxuu sii marayaa burco todhgeer berbera saaxil maroodijeex hargaysa
2. Buska ugu danbeeyaa wuxuu sii marayaa Burco, Todhgeer, Ber-bera, Saaxil, Maroodi-jeex; Hargaysa.
3. Buska ugu danbeeyaa wuxuu sii marayaa Burco, Todhgeer; Ber-bera, Saaxil; Maroodi-jeex; Hargaysa.

2. Weedhahan keeba si sax ah loo isticmaalay astaanta Far-Suul.

1. Saynab way dhamaysay shaqadii sidaa daraadeed way bixi kartaa.
2. saynab way dhamaysay shaqadii sidaa daraadeed way bixi kartaa.
3. Saynab way dhamaysay shaqadii; sidaa daraadeed, way bixi kartaa.
4. Saynab way dhamaysay shaqadii, sidaa daraadeed way bixi kartaa.

3. Keebaa sax ah.

1. waxaynu xafiisyada soo maraynaa: 9:30am, 2:00 pm, iyo 5:50 pm.
2. Waxaynu xafiisyada soo maraynaa: 9:30 AM. 2:00 P.M. iyo 5:50 P.M.
3. Waxaynu xafiisyada soo maraynaa: 9:30 A.M.; 2:00 P.M.; iyo 5:50 P.M.

4. Sax mise khalad.

1. Quraan 76:01
2. Quraan 76.01
3. Quraan 76;01

5. Sax mise khalad.

1. Maanta casharo ayaan dhigayaa, berrito faxas ayaan ahay.
2. Maanta casharo ayaan dhigayaa; Berrito faxas ayaan ahay.
3. Maanta casharo ayaan dhigayaa; berrito faxas ayaan ahay.

6. ciyaartii waxay ku dhamaatay bareejo waxaa lagu daray wakhti dheeraad ah.

7. waxaan safaro kala duwan kusoo maray hargaysa soomaaliland nayroobi kiinya qaahira masar landan ingiriiska iyo baariis faransiiska.

8. cali wuxuu dunida kaga tagey saynab oo ku nool soomaaliland faarax oo ku nool itoobiya iyo saxarla oo ku nool ingiriiska.

9. gaadhi ayay farxiyi soo iibsatay sida loo kaxeeyo ma taqaano.

10. waxaan doonaayey in aan u dhoofo sucuudi areebiya sidaa daraadeed waa in aan baasaaboor samaystaa.

# CUTUBKA 8

## *Astaanta Dareen !*

ASTAANTAN (**!**) WAXAYNU U NAQAANAA “Calaamatul Cajiib” ama “Calaamatul Cajaayib.” Inkastoo magacan aynu u naqaanaa uu aad usoo dhaweeyey micnaha astaantan, hadana magacaasi ma-wada-koobayo meelaha loo isticmaalo astaantan. Tusaale ahaan, astaantan waxyaabaha loo isticmaalo waxaa ka mid ah: “farxad” “amakaag,” “la-yaabitaan,” ama hadal “dhawaaq” ah (dhawaaq waxaan uga jeedaa: hadal sare loogu dhawaaqay), iwm. Sidaa awgeed, magaca “Calaamatul Cajiib” kama wada-turjumayo “farxad,” “amakaag,” “la-yaabitaan,” iyo “dhawaaq;” sababtoo ah, “farxad” ama “dhawaaq” maaha arin “cajiib” ah. Farxadu ma wax “cajiib” ah baa? Hadalka oo aad sare-ugu-dhawaaqdaa, ma wax “cajiib” ah baa? Jawaabtu waa MAYA.

Dadkii isku-taxalujiyey inay turjumaan ereygaas way deddaaleen runtii, waxaanay muddan-yihiin amaan, sharaf iyo ixtiraam. Laakiin, magacaas ay u bixiyeen ma-wada-koobayo waxyaalaha loo-isticmaalo astaantan, sidaan hore usoo sheegay. Sidaa daraadeed, waxaan isku-taxalujiyey in aan raadiyo erey cusub oo si dhab ah uga-turjumaya waxyaabaha loo isticmaalo astaantan oo dhan. Waxaanan u bixiyey: “Astaanta Dareen.” Sababta aan ugu bixiyeyna waxaa weeye: astaantan meelaha lagu isticmaalo oo dhami waxay muujiyaan ‘dareen’ bani’aadam: farxad, rayn-rayn, mucjiso, dhawaaq-sare loo qaaday, iwm.

Waxaa laga yaabaa in ay jiraan (ama ay yimaadaan) dad kale oo magac kasii-fiican u bixiya astaantan. Waana arin waajib ku ah dadka aqoonta dheeraadka ah u leh qoraalada. Waa inay raadiyaan erey-bixino cusub, si aynu af-Soomaaliga hore-ugusii-marino.

Luqadaha aduunkuna waxay ku horuu-maraan waxaa weeye: marka lasoo kordhiyo erey-bixino cusub, ama ereyo lagu isticmaali jiray meelo khaas ah in lagu isticmaalo meelo kale oo cusub.

Ereyga hore loo isticmaali jiray ee af-Soomaaliga ah marka lagu isticmaalo meel kale oo aan hore loogu isticmaali jirin, wuxuu yeeshaa micne-cusub. Tusaale ahaan, ereyga “moos” ee aan ku isticmaalay Cutubka 6-aad, waa erey af-Soomaali ah oo weligiiba jiray. Laakiinse, maadaama aan u isticmaalay meel aan hore loogu isticmaali jirin, wuxuu yeeshay micne labaad.

Waxaa jira meelo badan iyo qaabab kala duwan oo loo isticmaalo astaanta dareen. Cutub-kan ayaan si qoto-dheer ugu sharaxayaa meelaha lagu isticmaalo iyo sida loo isticmaalo, labaddaba.

**Digniin**: *Astaanta Dareen ha isticmaalin marka aad qorayso qoraalo aad muhiim u ah; sida, qoraal jaamacadeed, shaqo, caafimaad, iwm. Waxaad isticmaashaa uun marka aad qorayso buug sheeko ah ama aad wax u qorayso asxaabtaada, ama aad wax ku qorayso Facebook, Twitter, Snapchat, Email aan muhiim ahayn, iwm.*

Waxaa jira dad qoraa ah oo u isticmaala astaantan dareen qoraalo muhiim ah. Taas macnaheedu maaha in ay saxan-yihiin. Doodo badan ayaana ka jira jaamacadaha aduunka oo ku saabsan in astaanta dareen lagu isticmaali-karo qoraalada muhiimka ah. Laaakiin, badankoodu way kasoo-hor-jeedaan in lagu isticmaalo qoraalada muhiimka ah. Siday doontaba ha ahaatee, adigu haku isticmaalin qoraaladaada muhiimka ah.

◆◆◆

## AQOONTAADA TIJAABI

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan*

*ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

maahmaah soomaaliyeed beentaada hore runtaada danbe ayey baas u tahay waxaa jiri jiray wiil la odhan jiray cumar beenaale oo adhi jir ahaa adhiga raaci jiray cumar maalin kasta marka uu adhiga raaco ayaa isagoo aad u qaylinaya wuxuu odhan jiray hayaay waa bahaleey hayaay soo yaacaay dhowr maalmood markii dadkii usoo gurmadeen ee loo yimi ayaa la arki waayey wax bahal ah oo meesha jooga dadkii ayaa weydiiyey maxaa kugu kalifay in aad maalin walba been sheegto cumar wuxuu ku jawaabay waan baqdaa markaa waxaan u baahdaa qof ii wehel yeela dadkii markay ogaadeen in uu been sheegaayo ayay ka niyadjabeen maalintii danbe isagoo cumar adhigii la joogo ayuu arkay waraabe adhigii gaadaaya oo usoo dhow cumar ayaa qaylo dhegaha is qabtay waar hayaay waar iisoo yaacaay waar waa waraabe waar isoo gaadha dadkii dheg jalaq umay siinin hadalkii cumar  iyagoo u malaynaaya in ay tahay beentisii uu ku caan baxay markii dadkii u iman waayeen ayaa waraabihii adhigii ka cunay

**SAX**

"Beentaada hore, runtaada danbe ayey baas u-tahay"
Maah-maah

Waxaa jiri jiray wiil la odhan jiray Cumar Beenaale, oo adhi-jir ahaa (adhiga raaci jiray). Cumar maalin-kasta marka uu adhiga raaco, ayaa isagoo aad u qaylinaya wuxuu odhan jiray: “Hayaay! Waa bahaleey! Hayaay! Soo yaacaay!” Dhowr maal-mood markii dadkii usoo-gurmadeen ee loo yimi, ayaa la-arki-waayey wax bahal ah oo meesha jooga. Dadkii ayaa weydiiyey, “Maxaa kugu kalifay in aad maalin-walba been sheegto?” Cumar wuxuu ku jawaabay, “Waan baqdaa. Markaa waxaan u baahdaa qof ii wehel-yeela.” Dadkii markay ogaadeen inuu been sheegaayo, ayay ka niyad-jabeen.

Maalintii danbe, isagoo Cumar adhigii la joogo, ayuu arkay waraabe adhigii gaadaaya oo usoo-dhow. Cumar ayaa qaylo dhegaha is qabtay: “Waar hayaay! Waar iisoo yaacaay! Waar waa waraabe! Waar isoo gaadha!” Dadkii dheg jalaq umay-siinin hadalkii Cumar, iyagoo u malaynaaya in ay tahay beentisii uu ku caan-baxay.

Markii dadkii u iman-waayeen, ayaa waraabihii adhigii ka cunay.

## Xeerarka Guud ee *Astaanta Dareen*

1. *Astaanta Dareen isticmaal marka aad qorayso arin kaa yaabiyey*.

   Tusaale:

- Waxaan aad ula yaabay siduu maanta u dhaqmay Faarax**!**
- Meesha maxaa ka uraaya**!**
- Cajiib**!** Tollow maxay dowladu sidaa u samaysay.
- Dadka sidan u fikirayaa, maxay ahaayeen**!**

2. *Astaanta Dareen isticmaal marka aad doonayso in aad qoraal ku muujiso erey codkiisa sare loo qaadayo ama*

*dhawaaq ah.*

Tusaale:

- Hayaay**!** Bal wuxuu ku hadlay eega**!**
- Waa wareey**!**
- Soo yaaca**!**
- Waxbaa ka dhacay**!**
- Waar halays dhegaysto**!** Buuqa joojiya**!**
- Caruus hambalyo**!** Hambalyo**!** Hambalyo**!**

3. *Astaanta Dareen haka-danbaysiinin "joogsi" ama "hakad."*

Tusaale:

**SAX**: Wuxuu yidhi, "Tolaayeey**!**"
**Khald**: Wuxuu yidhi, "Tolaayeey**!**"**.**

**SAX**: Hayaay**!** Soo yaacaay**!** Waa wareey**!**
**Khalad**: Hayaay**!,** Soo yaacaay**!,** Waa wareey**!.**

4. *Astaanta Dareen waad isticmaali kartaa dhowr-jeer oo isku xiga. Waxaad ka dhigtaa saddex keliya. Haka dhigin laba, ama afar, iyo wixii ka badan.*

Tusaale:

- Maya**!!!** Maya**!!!** Waan diidey arinkaas.
- Yaabka**!!!** Yaabkii**!!!**
- Islayaab, ssla-diid**!!!**
- Waa wareey**!!!**
- Waar ninkoow**!!!**
- Waaryee!!! Waar nala hadal dee**!!!**

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

11. Astaanta Dareen meelahee loo isticmaalaa?

12. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.

- Cajiib? Waa meel aad u qurux badan?
- Cajiib! Waa meel aad u qurux badan!
- Cajiib!. Waa meel aad u qurux badan!.

13. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.

1. Tollaay, doqoniimadaan sameeyey.
2. Tollaay. doqoniimadaan sameeyey.
3. Tollaay! doqoniimadaan sameeyey.
4. Tollaay! doqoniimadaan sameeyey!

14. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.

1. Biis, Biis! Waar ku celi heesta.
2. Biis! Biis! Waar ku celi heesta!
3. Biis, Biis, Waar ku celi heesta!

15. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.
    1. Kir!. Kir!. Waar dameerkan yaa naga kaxaysta!. Kir!.
    2. Kir. Kir, Waar dameerkan yaa naga kaxaysta, Kir.
    3. Kir! Kir! Waar dameerkan yaa naga kaxaysta! Kir!

16. Shantan qoraal ee soo socda, dooro ka saxa ah:
    1. “Naga jooji hadalka!” ayay ku dhawaaqday.
    2. “Naga jooji hadalka” ayay ku dhawaaqday!
    3. “Naga jooji hadalka”! ayay ku dhawaaqday.
    4. “Naga jooji hadalka!”. ayay ku dhawaaqday.
    5. “Naga jooji hadalka!.” ayay ku dhawaaqday.

17. Saddexdan qoraal ee soo socda, dooro ka saxa ah:
    1. Aamus!! Dhegahaaga iyo afkaagu isma maqlayaane!!
    2. Aamus! Dhegehaaga iyo afkaagu isma maqlayaane!
    3. Aamus! Dhegehaaga iyo afkaagu miyey is maqlayaan?!

18. Astaanta Dareenka waxaa loo isticmaalaa in ______________

1. la tilmaamo hadal dhawaaqa, farxad, mucjiso, iwm
2. in lagusoo xidho weedho dhamaystiran, sida joogsiga
3. in qoraalka lagu muujiyo arin cadho ama oohin ah
4. A, b iyo C (saddexduba waa sax)

19. Weedhahan soo socda, keebaa ku haboon in loo isticmaalo Astaanta Dareen; sidaase loogu isticmaalayaa.
    1. Magacaygu waa Cabdiraxmaan
    2. Waxaasi wax dhici kara maaha
    3. Ma yeelaayo mana aqbalaayo
    4. Yeelkadaa aniga hay sheegin

20. Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loogu isticmaalay Astaanta Dareen.
    1. Dhaqankiisa ayaan la yaabay!
    2. Mala yaabtay dhaqankiisa!
    3. Yur Yur Yur!
    4. Naga tag!
    5. Waar na dhaaf!

# CUTUBKA 9

## *Jiitin –*

ASTAANTAN (-) WAXAA LUQADA Ingiriisida lagu yidhaahdaa: “hyphen.” Af-Soomaaligana waxay ku noqonaysaa “jiitin.” Jiitin waxaa loo isticmaalaa dhowr meelood. Kow, marka aad doonayso in aad isku-xidho laba-erey oo aan si caadi ah isugu xidhmaynin, ama fahankoodu adkaanayo makra laysku xidho. Laba, marka aad doonayso in aad qorto maal-mo, bilo, sanado, ama taariikh is daba-socota. Saddex, marka aad doonayso inaad tilmaanto umad (dad) usoo guurtay wadan cusub. Afar, marka aad qorayso da’dda qof, adigoo u qoraaya qoraal ahaan. Mid walba waxaynu ka bixinaynaa tusaale, si aad u fahanto.

Si aad u fahanto muhiimada ay leedahay jiitin-tu, waxaan idinla wadaagayaa qiso dhacday. Abwaan, bare-sare, Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) ayaa wuxuu ka sheekeeyey niman furtay xisbi siyaasadeed ay u bixiyeen “Hudhud.” Marka aad akhrido magacaas xisbiga, waxaad is waydiinaysaa: “Waa maxay micnaha “Hudhud.” Nimankaas xisbiga furtay waxay doonayeen in ay qoraan: “Hud-hud.” Laakiinse, maadaama aanay isticmaalin astaanta jiitin-ta, magacii ay xisbigooda u bixiyeen wuxuu yeeshay micne kale.

Tusaalahaasi wuxuu ina-tusayaa, muhiimada ay leedahay fahanka iyo isticmaalka astaanta jiitin-tu. Waxaa kale oo uu ina tusayaa in qoraalkaaga micnihiisu is bedelayo marka aanad isticmaalin, ama aad si-khaldan u isticmaasho, astaanta jiitin-ta.

**Digniin**: *Astaanta Jiitinta haku khaldin astaanta qoraalka ee jiitinta dheer (—) ee loo yaqaano dhaash. Waxay ku kala duwan-*

*yihiin labadan astaamood waxaa weeye: astaanta dhaash way ka dheertahay astaanta Jiitin.*

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

daba huwan hees

heestan waxaa ku jirta xikmad aad u qoto dheer oo meelo badan loo adeegsan karo waxaa wada hadlaaya laba hablood oo midina ay tahay howl kar ku dedaalaysa in ay wax qabsato innanta kalena ay xaasid ku tahay innantan wax qabsanaysa waxaanay si walba isugu dayeysaa in ay niyad jabiso si aanay wax u qabsanin micnaha ugu wayn ee heestan ku jiraana waxaa weeye marka aad dedaalayso kartina aad la timaado in ay jirayaan dad ka xun dedaalkaaga oo ku niyad jabinaya si aanad waxba u qabsanin dadkaa iska jir oo yaanay

ku niyad jabinin si ay akhristaha ugu fududaato fahanka heestu labada hablood waxaynu u kala bixinaynaa cambarro iyo cawrala cambarro waa innanta kartida badan cawralina waa innanta xaasiddada ah  heestu waa tan cambarro naa laago-gaalo, daba-huwan naa laan galloola daba huwan naa maila diiran daba huwan cawralla kula diiran maayo daba huwan cambarro anba ways ka diiran daba huwan cawralla oo maxaad ku diiran daba huwan cambarro mindideyda daabcad daba huwan cawralla daabkaa dilaaci daba huwan cambarro gees goodirkayga daba huwan cawralla wuu kaa gamuurmi daba huwan cambarro abtigey buraale yaan gudin u doonan cawralla oo shalaya guurye daba-huwan cambarro iyadoo sidaasa daba huwan anigoo sidaasa daba huwan oo hoogayeey leh daba huwan oo hawd u jeeda daba huwan ayey koori yeedhay daba huwan waa geel arroora daba huwan koran baa u horeeya daba huwan qaalinbaw dhaxaysa daba huwan duqbaa u danbaysa daba huwan koranki baan ku booday daba huwan kuruskaan xafuujay daba huwan subag baa dareeyey daba huwan naa faaya fuuqso daba-huwan cawralla waxba fuuqsan maayo dabahuwan cambarro anba wayka fuuqsan daba huwan qaalinti baan ku boodey daba huwan dhaadkaan ku jiidey dabahuwan dhuuxbaa dareerey daba huwan naa faayo fuuqso daba huwan cawralla waxba fuuqsan mayo daba huwan cambarro duqdii baan ku booday daba huwan candhadaan xafuujay daba huwan caanaa dareeyey daba huwan naa faayo fuuqso daba huwan cawralla waxba fuuqsan maayo daba huwan

**SAX**

“DABA-HUWAN”

Hees Caruureed

Heestan waxaa ku jirta xikmad aad u qoto-dheer oo meelo badan loo adeegsan karo. Waxaa wada hadlaaya laba hablood; oo midina ay tahay howl-kar ku dedaalaysa in ay wax qabsato; innanta kalena ay xaasid ku tahay innantan wax qabsanaysa, waxaanay si walba isugu dayeysaa in ay niyad-jabiso si aanay wax u qabsanin. Micnaha ugu wayn ee heestan ku jiraana waxaa weeye: marka aad

dedaalayso, kartina aad la timaado, in ay jirayaan dad ka xun dedaalkaaga, oo ku niyad jabinaya si aanad waxba u qabsanin. Dadkaa iska jir oo yaanay ku niyad jabinin.

Heestan waxaa maanso aad u qiimo badan, misaankeeduna aad u culus-yahay, ka sameeyey Abwaankeena wayn ee Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). Maansada magaceeda waxaa la yidhaa, “Daba-huwan.” Maansada wuxuu abwaanku kaga hadlayaa, sida ay reer Galbeedku u niyad-jabiyaan guud ahaan umadaha dunida, gaar-ahaana umada Soomaaliyeed. Abwaanku wuxuu si suugaanaysan oo far-shaxanimo ku dheehantay u qaawiyey dabinka qoolan ee reer Galbeedku u dhigeen dadkeena. Isagoo abwaanku maansada ka hadlaya waxaad ka daawan-kartaa Youtube, iyadoo qoraal ahna waxaad ka akhrisan-kartaa Google.

Si ay akhristaha ugu fududaato fahanka heestu, labada hablood waxaynu u kala bixinaynaa “Cambarro” iyo “Cawrala.” Cambarro waa innanta kartida badan; Cawralina waa innanta xaasiddada ah.

Heestu waa tan:

**Cambarro**
“Naa laago-laago! Daba-huwan!”
“Naa laan-galloola! Daba-huwan!”
“Naa ma’ila diiran! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Kula diiran-maayo! Daba-huwan!”
**Cambarro**
“Anba ways-ka diiran! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Oo maxaad ku diiran? Daba-huwan!”
**Cambarro**
“Mindideyda daabcad! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Daabkaa dilaaci! Daba-huwan!”
**Cambarro**

“Gees goodir-kayga! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Wuu kaa gamuurmi! Daba-huwan!”
**Cambarro**
“Abtigey Buraale! Daba-huwan!
Yaan gudin u doonan! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Oo shalayba guurye! Daba-huwan!”
**Cambarro**
“Iyadoo sidaasa! Daba-huwan!
Anigoo sidaasa! Daba-huwan!
Oo ‘Hoogayeey!’ leh! Daba-huwan!
Oo hawd u jeeda! Daba-huwan!
Ayey koori yeedhay! Daba-huwan!
Waa geel arroora! Daba-huwan!
Koran-baa u horeeya! Daba-huwan!
Qaal’in-baa u dhaxaysa! Daba-huwan!
Duqbaa u danbaysa! Daba-huwan!
Korankii-baan ku booday! Daba-huwan!
Kuruskaan xafuujay! Daba-huwan!
Subag-baa dareeyey! Daba-huwan!
Naa faayo fuuqso! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Waxba fuuqsan-maayo! Daba-huwan!”
**Cambarro**
“Anba wayska fuuqsan! Daba-huwan!
Qaalintii-baan ku boodey! Daba-huwan!
Dhaadkaan ku jiidey! Daba-huwan!.
Dhuuxbaa dareerey! Daba-huwan!
Naa faayo fuuqso! Daba-huwan!”
**Cawralla**
“Waxba fuuqsan mayo! Daba-huwan!”
**Cambarro**
“Anba wayska fuuqsan! Daba-huwan!
Duqdii-baan ku booday! Daba-huwan!
Candhadaan xafuujay! Daba-huwan!

Caanaa dareeyey! Daba-huwan!
Naa faayo fuuqso! Daba-huwan!
**Cawralla**
"Waxba fuuqsan maayo! Daba-huwan!"
**Cambarro**
"Anba wayska fuuqsan! Daba-huwan!

***

## Xeerarka Guud ee *Jiitin*

1. *Jiitinta isticmaal marka aad doonayso in aad isku-xidho laba erey oo aan si caadi ah isugu xidhmaynin qoraal-ahaan, ama fahanku fududaanayo marka aad u isticmaasho astaanta jiitin.*

Tusaale:

- Reerkii wuxuu u guuray geeri-go'an (meel cidla ah).
- Arinkii waxaa lagusoo dhameeyey is-af-garad.
- Gar-gaarka deg-dega ah.
- "Haday deg-deg-siiyo door dhalaan; kaad-siiyana kiish lacaguu dhalaa."

2. *Jiitinta isticmaal marka aad doonayso in aad tilmaanto tirro, maal-mo, taariikh, qiime aan la hubin, waqti-saacadeed is daba-socota, iwm.*

Tusaale:

- 400 - 500 oo qof ayaa isugu yimi shirka. (***Eeg**: halkan astaantu waxay tilmaamaysaa in aanad hubin tirrada dhabta ah ee kasoo qayb-gashay shirka. Sidaa daraadeedna aad sheegayso in dadka kasoo qayb-galay ay*

*yihiin inta u dhaxaysa 400 oo qof ilaa 500 oo qof. Labada tirro way ka fog-yihiin astaanta jiitin. Haysu dhawaynin*).

- Shirku wuxuu socday 8:00 A.M. - 5:30 P.M.
- Qiimaha gaadhigu waa inta u dhaxaysa US$4100 - US$1500.
- Qaybta koowaad ee jaamacadu waay socotaa Janaayo - Janaayo.
- Waxaan Maraykanka degenaa 2001 - 2019.

3. *Jiitinta isticmaal marka aad doonayso in aad tilmaanto umad usoo guurtay wadan cusub.*

Tusaale:

- Oromo-Soomaali. (***Eeg**: astaanta jiitin waxay halkan tilmaamaysaa dad Oromo ah oo usoo guuray, si rasmi ahna u deggey, dhul Soomaaliyeed. Labada magac u dhawee, oo ku dheji, astaanta jiitin*. *Waxaan uga jeedaa, labada magac haka fogaynin astaanta jiitin*).
- Soomaali-Ameerikan. (*Dadka Soomaalida ah ee haysta dhalashada Maraykanka, ama ku dhashay Maraykanka*).
- Yemeni-Soomaali. (*Dad Yemeni ah oo usoo guuray, si rasmi ahna u degey, Soomaaliya*).
- Afrikan-American. (*Dadka kasoo jeeda Qaarada Afrika ee degen, ama ku dhashay, ama haysta dhalashada Maraykanka*).
- Carab-Ameerikan (*Dadka Carabta ah ee degen Maraykanka*).

4. *Jiitinta isticmaal marka aad qorayso da'dda qof, ee aad u qorayso qoraal ahaan.*

Tusaale:

- Maxamed waa afar-iyo-taban jir.
- Shan-iyo-soddon sanadood mudo laga joogo ayaan ka shaqayn jiray wadanka Sucuudiga.
- Maalin kasta waxaan akhriyaa 50 - 60 bogg oo ka mid ah buuggta aan akhriyo.
- Burburkii Soomaaliya wuxuu socday 1988 - iminka.

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

2. Imisa meelood ayaa Jiitinta loo isticmaalaa?

3. Weedhahan soo socda, meelaha ku haboon geli Jiitin.
    1. Gargariirka waxaa keenay gorgorka soo duuley.

4. Weedhahan soo socda, meelaha ku haboon geli Jiitin.
    1. Maxay ku kala duwan yihiin, Yamani Soomaali iyo Soomaali Yamani?

5. Qoraaladan keebaa si sax ah u qoran.

1. 1980-1990
2. 1980 - 1990
3. 1980 – 1990
4. 1980 1990

6. Geli meesha ku haboon Jiitin.
    1. Laba kun iyo kowdii ayuu dhashay wiilkaygu. Laba kun iyo laba iyo tobankiina waan soo kaxeeyey.

7. Dooro ka saxda ah.
    1. Labo iyo labaatan jir
    2. Labo-iyo-labaatan-jir
    3. Labo-iyo-labaatan jir

8. Qoraalkee ayaa si saxan loo isticmaalay astaanta Jiitin.
    1. Qarnigii 19-aad, waxaa is-af-garad dhex-maray dowladaha Itoobiya iyo Kiiniya.
    2. Qarnigii 19 aad, waxaa is afgarad dhex maray dowladaha Itoobiya iyo Kiiniya.
    3. Qarnigii 19aad, waxaa is af garad dhexmaray dowladaha Itoobiya iyo Kiiniya.

9. Weedhahan soo socda, keebaa Jiitinta si sax ah loo isticmaalay.
    1. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay 8:00pm-10:00pm. Waxaa daawanaayey dad-weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa 150-200 oo qof.

2. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay 8:00pm 10:00pm. Waxaa daawanaayey dad weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa 150 200 oo qof.
3. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay 800pm --10pm. Waxaa daawanaayey dad-weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa 150 -- 200 oo qof.
4. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay dideedii ilaa tobankii. Waxaa daawanaayey dad-weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa boqol iyo konton ilaa laba boqol oo qof.

10. Weedhahan soo socda kuwee ayaa si saxan loo isticmaalay Jiitin.
1. Soomaali-Sujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay
2. Soomaali sujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay
3. Soomaali-sujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay
4. SoomaaliSujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay

11. Weedhahan soo socda keebaa si saxan loo isticmaalay Jiitinta.
1. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba-iyo-toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan-iyo-toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba-iyo-soddon jir.
2. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba iyo toban sanadood. Waxaan tagey

wadankaas aniga oo jira shan iyo toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba iyo soddon jir.

3. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba-iyo toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan-iyo toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba-iyo soddon jir.

4. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba iyo-toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan iyo-toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba iyo-soddon jir.

# CUTUBKA 10

## *Mareeg ( )*

ASTAANTAN WAXAA LUQADA INGIRIISIDA lagu yidhaahdaa, "parentheses." Sidii aan hore usoo sheegay, waxaa muhiim noqotay in aan u raadiyo erey-bixin cusub. Ereyga ugu haboon ee af-Soomaaliga ah, ee u-dhigma ereyga "parentheses" wuxuu noqday "mareeg." Astaanta mareeg waxaa la isticmaalaa marka aad doonayso inaad qoraalkaaga ku darto macluumaad siyaado ah. Macluumaad-kaas siyaaddadda ahi waxay noqon-karaan: hal-erey, dhowr-erey, ama weedho dhaadheer oo dhamays-tirran, micnahooduna dhamays-tirran yahay.

Macluumaadka siyaaddadda ah marka aad ku darayso qoraalkaaga, waxaad mar-walba dhex-galisaa astaanta mareeg. Waxaan uga jeedaa, macluumaadka siyaaddadda ah marka aad bilaabayso ka horeysii astaanta mareeg-ta, kunasoo xidh astaanta mareeg-ta. Macluumaadka siyaaddadda ahi waa in uu ku dhex-jiraa labada "mareegood" dhexdooda.

**Digniin**: *Haysku khaldin astaanta Mareeg **( )** iyo astaanta Ardaa **[ ]**. Waa laba astaamood oo habka loo isticmaalaa ay aad u kala fog-yihiin. Mid walba waxaa sharaxaya cutub gaar ah.*

**AQOONTAADA TIJAABI**

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka

danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

qoraalka farta soomaaligu inkastoo uu qoran-yahay xuruuf ahaan waxay u baahantay in lasii hore-mariyo waxaa kaliya ee soomaalidu taqaanaa iyagoo aan naxwaha u raacin sida sharciga ah sida xarfaha soomaaliga ah loo qoro laakiinse waxaa jira dhibaatoyin badan oo taasi keento waxaa kale oo jira in marka la qoro weedhaha dhamayska-tiran iyadoo si sax ah loo qoray ay sameeyeen laba micne oo aad u kala duwan tusaale ahaan bal u fiirso weedhan dhamayska-tiran ninbaa mas dilay keebaa la dilay ma ninka mise maska laba micne ayay samaynaysaa weedhani mar waxaad u fahmi kartaa in uu masku ninka qaniinay oo ninku dhintay marna waxaad u fahmi kartaa in uu ninku maska nabar ku dhuftay oo masku dhintay sidee loo kala saarayaa labaas micnahooda waa isku qoral laakiin waa kala dhawaaq waxaa jira weedho dhamays tirran oo badan oo hadana laba micne samaynaya taasi waxay ina tusaysaa in uu af soomaaligu u baahan yahay in si cilmiyeysan looga shaqeeyo oo loosii horumariyo

**SAX**

Qoraalka Farta Soomaaligu (inkastoo uu qoran-yahay xuruuf ahaan) wuxuu u baahan-yahay in lasii horu-mariyo. Waxaa kaliya ee Soomaalidu taqaanaa (iyagoo aan naxwaha u raacin sida sharciga ah) sida xarfaha Soomaaliga ah loo qoro, ee laysu raac-raaciyo; laakiinse, waxaa jira dhibaatoyin badan oo taasi keento.

Waxaa kale oo jira in marka la qoro weedhaha dhamayska-tirran (iyadoo si sax ah loo qoray) ay sameeyaan laba micne oo aad u kala duwan. Tusaale ahaan, bal u fiirso weedhan dhamayska-tirran:

“Ninbaa mas dilay.”

Keeba la dilay? Ma maska ayaa la diley? Mise ninka ayaa la diley? Laba micne ayay samaynaysaa weedhani: mar waxaad u fahmi kartaa inuu masku ninka qaniinay oo ninku dhintay; marna waxaad u fahmi kartaa inuu ninku maska nabar ku dhuftay oo masku dhintay. Sidee loo kala saarayaa labaas qoraalkooda? Waa isku qoral, laakiin waa kala micne.

Waxaa jira weedho dhamays-tirran oo badan oo hadana laba micne samaynaya. Taasi waxay ina tusaysaa inay far-Soomaalidu u baahan-yahay in si cilmiyeysan looga shaqeeyo oo loosii horu-mariyo.

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Mareeg*

1. *Mareegta isticmaal marka aad doonayso in aad qoraalkaaga ku darto macluumaad siyaaddo ah.*

Tusaale:

- Ardaygu su’aashii wuxuu uga jawaabay (markii uu ka fikiraayey mudo 5 - 8 daqiiqadood ah) si sax ah. (***Eeg****: hadii aad qoraalkan ka dhex-saarto inta ku dhex-jirta astaanta mareeg-ta, waxaa kusoo baxaya qoraal dhamays-tirran oo sax ah*).
- Abaal-marin fiican ayaa la siiyey askarigii ($100).

- Madaxweynaha ayaa safar ugu baxay (inkastoo uu daalanaa) wadanka Djibouti.

2. *Mareeg isticmaal marka aad qorayso xarfo ama lambaro qoraalka kala-qaybinaya.*

Tusaale:

- Buuggani wuxuu sharaxayaa astaamaha qoraalka ee sida khaldan loo isticmaalo: (b) joogsi, (t) hakad, (j) jiitin, (x) fullul, iwm.
- Shaqadaadu waxay ka-kooban-tahay saddex qaybood: (1) in aad macluumaad soo ururiso; (2) macluumaadkaas aad qorto; (3) markaa aad shir qabato oo aad sharaxdo macluumaadkii aad soo ururisay.
- Horumar waxaynu ku gaadhi karnaa: (1) in aynu iska qabano odayaashan jaahiliinta ah ee qabiilka inala hor-taagan; (2) in aynu iska xorayno nin beenaale ah oo “sheekh” sheeganaya, diintana ku adeeganaya; iyo (3) in aynu ka xorowno siyaasiga xoolaheena boobaya.

3. *Astaanta mareeg-tu hadii ay ugu danbayso weedhaha dhamayska-tirran, joogsigu wuxuu galayaa mareeg-ta dibadeeda (yacnii, joogsigu wuxuu ka danbaynayaa astaanta mareeg).*

Tusaale:

- Madaxweynaha ayaa safar ugu baxay wadanka Djibouti (inkastoo uu daalanaa).
- Ardaygu su’aashii uu macalinku waydiiyey wuxuu kaga jawaabay si sax ah (markii uu ka fikiraayey mudo 5 - 8 daqiiqadood ah).

4. *Mareeg-ta dhexdeeda hadii ay ku jirto ataanta su'aashu, kusoo xidh joogsi.*

Tusaale:

- Fasalka waad kasoo habsaantay (maba ogid miyaa?).
- Dukaanka laguma iibiyo sharaabka qabow (waayo?).
- Madaarka Hargaysa maamulkiisu ma fiicna (inkastoo la qurxiyey).

5. *Mareeg-ta marka aad isticmaalayso, haka horeysiinin hakad. Mar-walba hakad-ku waa in uu ka danbeeyaa astaanta mareeg-ta.*

Tusaale:

**SAX**: Markii uu guriga yimid (inkastoo ay ahayd wakhti danbe), ayuu albaabkii hagaajiyey.

**Khalad**: Markii uu guriga yimid, (inkastoo ay ahayd wakhti danbe) ayuu albaabkii hagaajiyey.

## TALLO

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta Mareeg?

11. Weedhan soo socda keebaa si saxan loogu isticmaalay astaanta

Mareeg:

- Ardaygii si khaldan ayuu uga jawaabay (markuu shan daqiiqo aamusnaa) su'aashii.
- Ardaydii si khaldan ayuu uga jawaabay su'aashii (markuu shan daqiiqo aamusnaa).
- Ardaygii si khaldan (markuu shan daqiiqo aamusnaa) ayuu uga jawaabay su'aashii.
- Ardaygii (markuu shan daqiiqo aamusnaa) si khaldan ayuu uga jawaabay su'aashii.

12. Weedhahan keebaa si saxan loo isticmaalay astaanta Mareeg.

- Markii uu gaadhigu noo yimi (inkastoo uu buuxay), kuraas nagu filan waanu helay.
- Markii uu gaadhigu noo yimi, (inkastoo uu buuxay) kuraas nagu filan waanu helay.
- (inkastoo uu buuxay) markii uu gaadhigu noo yimi kuraas nagu filan waanu helay.

13. Magaaladan magaceedaa, tee ayaa si sax ah u qoran.

1. Jiga Jiga
2. Jigjiga
3. JigJiga
4. Jig-Jiga
5. Jig-jiga

14. Shaadhkaygu waa casaan-madow dhalaalaya.

1. Sax
2. Khalad

15. Magacan keebaa si sax ah u qoran.
    1. SamSam
    2. Samsam
    3. Sam-sam
    4. Sam sam
    5. sam sam

# CUTUBKA 11

## *Ardaa [ ]*

ASTAANTAN WAXAA LUQADA INGIRIISIDA lagu yidhaa, “brackets.” Maadaama aanay jirin, oo aanan arkin, kelmed af-Soomaali ah oo loo bixiyey astaantan, waxaan isku-taxalujiyey in aan raadiyo erey-bixin. Sidaa awgeed, astaantan waxaan u bixyey “ardaa.” Sababta aan ‘ardaa’ ugu bixiyeyna waxaa kuu tilmaamaysa astaanta. Sida loo isticmaalo astaanta ardaa aad ayay uga duwan-tahay sida loo isticmaalo astaanta ‘mareeg;’ dadka badan-kooduna way isku khaldaan isticmaalka labadan astaamood.

Astaanta Ardaa waxaa lagu isticmaalaa oo *KALIYA* marka aad doonayso in aad macluumaad siyaaddo ah dhex-geliso qoraal ama hadal aad soo xiggatay. Cutub-kan ayaynu ku sharxaynaa sida loo isticmaalo astaanta ardaaga.

**Digniin**: *Haysku khaldin astaanta Mareeg* ***( )*** *iyo Astaanta Ardaa* ***[ ]****. Waa laba astaamood oo habka loo isticmaalaa ay aad u kala fog-yihiin. Mid walba waxaa sharaxaya cutub gaar ah.*

### AQOONTAADA TIJAABI

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

**Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).

**KHALAD**

waxaynu dugsiyada ku dhiganay in xarfaha laban laabma ee farta soomaaligu ay yihiin todoba m n l g r d b marka weedh dhamays tirran loo qorona loosoo gaabiyo manalagaraadbaa laakiinse wuxuu sheegay barre sare maxamed xaashi dhamac gaariye isagoo yidhi xarfaha laban laabmaa kuma eka sideedaas xarfar m n l g r d b oo kaliya waxaase jira xarfo kale oo badan oo iyaguna laban laabma gaariye wuxuu hadalkiisii ku daray berigii hore intaas ayuunbaa la ogaaday laakiinse iminka waxaa la ogaaday in ay jiraan xarfo kale oo badan oo iyaguna laban laabmaa

**SAX**

Waxaynu dugsiyada ku dhiganay in xarfaha laban-laabma ee far-Soomaalidu ay yihiin todoba: "M, N, L, G, R, D, B." Marka weedh dhamays-tirran loo qorona, waxay noqonaysaa: "MaNaLa-GaRaaD-Baa." Ereygani waxaa weeye: "Manala-garaad-baa." Si ay ereyadan xasuustoodu u fududaato, waxaa loo qori-jiray: "Gaagala-yaashu, 'MaNaLa-GaRaaD-Baa.'"

Laakiinse, Abwaan, Borofesoor Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) wuxuu sheegay in aanay xarfaha laban-laabmaa ku ekayn todobadan xarfar (M, N, L, G, R, D, B.) oo kaliya; laakiiinse ay jiraan xarfo kale oo badan oo iyaguna laban-laabma. Gaariye wuxuu hadalkiisii ku daray, "Berigii hore intaas ayuunbaa la ogaa. Laakiinse, iminka waxaa la ogaaday in ay jiraan xarfo kale oo badan oo iyaguna laban-laabmaa."

Dadka ku hadla luqadda Soomaaliga, ee ku takhasusay aqoonta luqaddaha, waxaa looga baahan-yahay in ay baadhaan xarfahaas kale ee laban-laabma.

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Ardaa*

1. *Astaanta ardaaga isticmaal marka aad doonayso in aad macluumaad siyaaddo ah ku darto hadal aad soo xiggatay.*

Tusaale:
Qoraalkan waxaa qoray Cali. Waxaa kasoo xiggtay Xuseen.

Qoraalkii Cali: Bur-burkii Soomaaliya wuxuu bilaabmay sanadkii 1991, welina dowladi kama jirto Soomaaliya.

**Xiggashadii** Xuseen: "Bur-burkii Soomaaliya wuxuu bilaabmay sanadkii 1991 [markii ay dhacday Dowladii Siyaad Barre], welina dowladi kama jirto Soomaaliya."
(***Eeg***: *Qoraalka ku dhex-jira astaanta ardaa. Astaantaasi waxay sheegaysaa in aanu qoraalkaas qorin Cali ee uu yahay macluumaad siyaaddo ah oo uu Xuseen ku dhex daray qoraalkii uu kasoo xiggtay Cali, si uu faah-faahin dheeraad ah ugu daro. Xuseen wuxuu ku dhex-dary inta ku dhex-jirta astaanta ardaa).*

Tusaalaha labaad:
Hadalkii Taliyaha Ciidanka Booliska: Sida ugu dhakhsaha badan ayaanu usoo qabanaynaa dadkii falkan sameeyey.

**Xiggasho**: "Sida ugu dhakhsaha badan ayaanu usoo qabanaynaa dadkii falkan sameeyey [dadkii bur-buriyey gawaadhidii booliska]." (***Eeg***, *qoraalka ku dhex-jir astaanta ardaa wuxuu tilmaamayaa in aanu Taliyaha Ciidanka Boolisku ereyadaas odhanin, ee ay yihiin ereyo aan anigu ku daray si aan u tilmaamo dhibka ay dadkaasi gaysteen ee lagu haysto*).

2. *Astaanta ardaaga isticmaal marka aad doonayso in aad qoraalkaaga ku bilowdo qoraal aad soo xiggatay, qoraalkaas aad soo xiggatay oo ku bilaabmay xaraf-yar. Hadaba si aad xarafka-yar ugu bedesho xaraf-weyn, waa in*

*aad isticmaashaa astaanta ardaa* (**Xusuuso**: *marka qoraal aad bilaabayso, waa in aad ku bilowdaa xaraf-weyn*).

Tusaale:
Waxaad doonaysaa in aad soo xiggato qoraalkan uu qoray Cali.

**Qoraalkii Cali**: laba nin oo hubaysan ayaa rasaas ku furay Suuqa Bakaaraha ee magaalada Xamar. (***Eeg****: Cali qoraalkiisa kumuu bilaabin xaraf-weyn, ee wuxuu ku bilaabay xaraf-yar, waana khalad. Sidaa awgeed, waxaad doonaysaa in aad soo xiggato adigoo saxaya qoraalkiisa*).

**Xiggasho**: Cali wuxuu qoray, "[L]aba nin oo hubaysan ayaa rasaas ku furay Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Xamar."

**Eeg**: Cali markii uu qoraalkiisa bilaabay wuxuu ku bilaabay xaraf yar (wuu khaldamay). Qoraalkiisaa khaldan sidiisa waad usoo xiggan kartaa. Laakiinse, hadii aad jeclaysato in aad xarafka-yar ku bedesho xaraf-weyn, waa in aad isticmaashaa astaanta ardaa, adigoo aan waxba ka bedelaynin ereyadii uu isticmaalay ama micinihii hadalkiisa. Xaraf-weyn ayaad ku bedelaysaa xarafkii yaraa ee uu Cali sida khaldan ugu bilaabay qoraalkiisa adigoo xarafkaaga weyn dhex-galinaaya astaanta ardaaga. Tani waxay akhristaha tusaysaa in aad bedeshay xarafkii yaraa oo aad ku bedeshay xaraf weyn

Hadii aad xaraf-weyn uun ku bedesho xarafkii yaraa ee uu Cali qoray adigoon isticmaalin astaanta ardaaga, waxay noqonaysaa xiggasho khaldan, waxaanad ku xad-gudubtay qoraalkii Cali. Waxaa kale oo ay muujinaysaa in aanad wax aqoona u lahayn sharciyadda qoraalka. Waxaa kale oo uu akhristaha aqoonta u leh sharciyadda qoraalku is waydiinayaa in aad xiggashada ku dartay macluumaad kale oo aan ku jirin markii hore, maadaama aanad isticmaalin astaanta ardaaga.

Tusaale labaad,

**Qoraal ay qortay Idaacada BBC Somali**: Warrar nagasoo gaadhaya Soomaaliya ayaa sheegaya in ay roobab aad u xooggani ka da'een xamar. (***Eeg**, weriyuhu xaraf yar ayuu ku bilaabay magaca caasimada "xamar," waana khalad. Waynu soo xigganaynaa inagoo saxayna oo xaraf-weyn ku bilaabayna magaca caasimada "Xamar"*).

**Xiggasho**:

"Warar nagasoo gaadhaya Soomaaliya ayaa sheegaya in ay roobab aad u xoogani ka da'een [X]amar."

**Eeg**: Halkan waxaan soo xiggtay wararkii ay sheegtay Idaacada BBC Somali oo aanan waxba ka bedelin. Waxaa kaliya ee aan bedelay oo aan saxay magaca caasimada Xamar oo ay BBC-du si khaldan u qortay (waxay ku bilaabeen xaraf yar). Si aan akhristaha u tuso in aan xarafka weyn anigu galiyey xiggashada waa in aan isticmaalaa astaanta ardaaga.

Tusaale saddexaad:

**War ay qortay Jariidada Dayax**: Warar nagasoo gaadhaya Gobolka Waqooyi Galbeed ayaa sheegaya in biyo xidheen laga sameeyey Tuulada Oodweyne. (***Eeg**, weriyuhu muu sheegin wadanka ay ku yaalaan gobolkaas iyo tuuladaasi*).

**Xiggasho**:

"Warar nagasoo gaadhaya Gobolka Waqooyi Galbeed [Soomaaliland] ayaa sheegaya in biyo xidheen laga sameeyey Tuulada Oodweyne."

**Eeg**: Xiggashada Jariidada Dayax waxba kamaan bedelin. Waxaa kaliya ee aan ku daray magaca "Soomaaliland" si aan u sharaxo in Gobolada Waqooyi Galbeed uu iminka yahay "Soomaaliland." Si aanan ugu xad-gudbin qoraalkii Jariidada Dayax oo aanan been uga sheegin, waa in aan cadeeyaa ereyada aan ku dhex-daray qoraalkooda. Ereyadaas aan ku

dhex-darayna waxaa cadayna astaanta ardaa ee aan isticmaalay.

Taas micnaheedu waxaa weeye: wixii ku dhex-jira astaanta ardaaga aniga ayaa ku daray.

◆◆◆

## TALLO

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta Ardaa?
2. Xuseen uxuu yidhi: Waxaan cunay cunto aad u macaan. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay Ardaa.
    1. Wuxuu yidhi, "Waxaan cunay cunto baasto aad u macaan."
    2. Wuxuu yidhi, "Waxaan cunay cunto (baasto) aad u macaan."
    3. Wuxuu yidhi, "Waxaan cunay cunto [baasto] aad u macaan."
    4. Wuxuu yidhi, "Waxaan cunay cunto, baasto, aad u macaan."
3. Gudoomiyaha Jaamacada Hargaysa: Berito Jaamacadu waa fasax. Xiggashani ma sax-baa? Mise waa khalad?
    1. Gudoomiyuhu wuxuu yidhi, "Berito (Sabti, 04 Juun, 2017) Jaamacadu waa fasax."

   2. Gudoomiyuhu wuxuu yidhi, “Berito, Sabti, 04 Juun, 2017) Jaamacadu waa fasax.”
   3. Gudoomiyuhu wuxuu yidhi, “Berito [Sabti, 04 Juun, 2017] Jaamacadu waa fasax.”
   4. Gudoomiyuhu wuxuu yidhi, “Berito Sabti, 04 Juun, 2017 Jaamacadu waa fasax.”

4. Magacood labadan astaaamod? Maxayse ku kala duwan-yihiin isticmaalka labadan astaamood?
   1. ( )
   2. [ ]
5. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.” Weedhahan soo socda keebaa si sax ah usoo xiggtay qoraalka Gudoomiyaha:
   1. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu (Soomaaliland) waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”
   2. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu [Soomaaliland]waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”
   3. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu—Soomaaliland—waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”
   4. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu, Soomaaliland, waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”

6. Dastuurka Soomaaliland: “Qof kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.” Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loosoo xiggtay:

   1. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in “Qof kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.”
   2. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in “(q)of kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.”
   3. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in “[q]of kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.”
   4. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in qof kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.

7. Qudbadii Madax-weynaha Jabuuti isagoo u qudbadaynaya baayac-mushtarka wadanka Jabuuti: “Dhaqaalaha wadanku kor ayuu u kacay, sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina ka qaadataan.” Weedhahan soo socda keebaa si sa ah usoo xiggtay hadalka Madax-weynaha.

   1. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay “dhaqaalaha wadanku (Jabuuti) . . . sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina (baayac-mushtarka) ka qaadataan.”
   2. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay “dhaqaalaha wadanku Jabuuti sidaa awgeedna waxaa loo

baahan-yahay in aydun doorkiina (baayac-mushtarka) ka qaadataan."

3. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay "dhaqaalaha wadanku [Jabuuti] . . . sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina [baayac-mushtarka] ka qaadataan."
4. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay "dhaqaalaha wadanku-Jabuuti-sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina (baayac-mushtarka) ka qaadataan."

8. Tudduc ka mid ah gabaygii Maxamed Nuur Fadal ayaa waxay ahayd, "Nimankaan dukaamada lukiyan, laba-laba u siiyey." Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loogu isticmaalay Astaanta Ardaa:
    1. "Nimankaan dukaamada lukiyan (camirran), laba-laba u siiyey."
    2. "Nimankaan dukaamada lukiyan "camirran," laba-laba u siiyey."
    3. "Nimankaan dukaamada lukiyan [camirran], laba-laba u siiyey."

# CUTUBKA 12

## *Fullul . . .*

SADDEXDAN DHIBCOOD WAXAA LUQADA Ingiriisida lagu yidhaahdaa “ellipses.” Ma jirro (maanan arkin) erey-bixin af-Soomaali ah oo u dhiganta magaca astaantan. Sidaa awgeed, waxaan sameeyey erey-bixin cusub: waxaanan u bixiyey “Fullul.” Fullul micnihiisu waxaa weeye: “saalada lo’da ee is-daba-taal.” Marka ay lo’du saalooto, waxaad arkaysaa saaladeedii oo midh-midh isu-daba-taala, sida dhibcahan astaantan oo kale. Astaantanina waa saddex dhibcood oo is-dabayaala, sida saaladaas lo’da oo kale. Fullul waxaa loo isticmaalaa laba meelood oo kaliya. Kow, qoraal ama hadal aad soo xiggatay oo aad wax ka tagtay, ama hadal uu qof yidhi oo aanad qaybo ka mid ah si fiican u maqlin ama aanad doonaynin in aan soo xiggato. Labo, qof hadlaayay oo hadalkiisii dhex galiyey aamusnaan gaaban. Labadan qodob waxaan si faah-faahsan ugu sharixi doonaa tusaalooyinka soo socda.

Waxaa muhiima in aad ogaato habka loo qoro astaantan. Saddexda dhibcood marka aad qorayso, waxaad u dhaxaysiisaa meelo banaan. Waxaan uga jeedaa, saddexda dhibcood haysku daba-xidhiidhin oo haysku dhawaynin, ee u dhaxaysii meelo banaan.

**Digniin**: *Ha isticmaalin wax ka badan saddex dhibcood. Haka dhigin laba dhibcood, afar dhibcood, ama dhibco tirro-badan oo isku xidhiidhsan. Ta kale, saddexda dhibcood waxaad u dhaxay-siisaa meel banaan.*

◆◆◆

## AQOONTAADA TIJAABI

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

### KHALAD

"weligaa haka nijad-jabin nolosha" (sheeko).

innan (gabadh) ayaa aabaheed, oo ahaa nin xikmad badan, u sheegtay in ay noloshii nacday. waxay ku tidhi, "wax kasta oo aan sameeyo waan ku khasaaraa, wax faa'iido ahna kama keeno. sidaa awgeed, noloshii guul ayaan ka gaadhi waayey oo waan nacayba." aabaheed oo shaqadiisu ahayd kuug ayaa soo kaxeeyey oo wuxuu keenay madbakha (jikadda) guriga. wuxuu soo qaaday saddex shay oo kala ahaa  baradho, beed (ukun), iyo bun. saddexdii ayuu ku dhex-riday biyo kar-karaaya. markii ay mudo biyihii ku dhex-jireen ayuu kasoo saaray iyagoo saddexdiiba is bedelay. gabadhii ayaa ku tidhi, "aabo maxaad uga jeedaa arinkan?" wuxuu aabaheed ugu jawaabay: "eeg, markii hore baradhadu way adkayd, laakiin markii biyaha kar-karaaya lagu dhex-riday way jilicday waanay is bedeshay. beedku [ukuntu] way jilicsanayd, markii biyaha kulul lagu dhex-ridayse way adkaatay oo way is bedeshay. laakiin, bunkii wax kale ayuu sameeyey oo cajiiba ah. markii bunka biyaha lagu dhex-riday, bunkii wuxuu bedelay dha-dhankii iyo muuqii biyaha." markuu intaa sharaxay, ayuu innantiisii waydiiyey, "aabo adigu saddexdaas

keebaad tahay?" ma waxaad tahay sida baradhada oo marka dhibta ama kulaylka noloshu kulasoo dersto waad jilicdaa oo niyad-jabtaa mise waxaad tahay sida beedka (ukunta) oo marka dhibta ama kulaylka noloshu kulasoo derso waad adkaataa oo markaasna aad bur-burtaa mise waxaad tahay sida bunka (qaxwaha) oo marka dhibta ama kulaylka noloshu kulasoo derso waad is bedeshaa oo nolosha adag lafteeda ayaad bedeshaa oo aad ka dhigtaa mid quruxbadan oo dhadhan-macaan leh

micnaha sheekada:

noloshu marna way macaantay, marna way adkaataa. kolba sida aad u qaabisho nolosha, macaankeeda iyo adaygeedaba, ayuunbaa muhiim ah. noqo qof nolosha bedeli kara, ee ha noqon qof ay noloshu bedesho.

## SAX

### "WELIGAA HAKA-NIJAD-JABIN NOLOSHA"

### Sheeko Dhiiri-gelineed

Innan (gabadh) ayaa aabaheed . . . u sheegtay in ay noloshii nacday. Waxay ku tidhi, "Aabo, wax kasta oo aan sameeyo waan ku khasaaraa, wax faa'iido ahna kama keeno. Sidaa awgeed, noloshii guul ayaan ka gaadhi waayey oo waan nacayba."

Aabaheed . . . ayaa soo kaxeeyey oo wuxuu keenay madbakha (jikadda) guriga. Wuxuu soo qaaday . . . baradho, beed (ukun), iyo bun (qaxwe). Saddexdii ayuu ku dhex-riday biyo kar-karaaya. Markii ay mudo biyihii ku dhex-jireen ayuu kasoo saaray . . .

Gabadhii ayaa ku tidhi, "Aabo maxaad uga jeedaa arinkan?" Wuxuu aabaheed ugu jawaabay: "Eeg, markii hore baradhadu way

adkayd, laakiin markii biyaha kar-karaaya lagu dhex-riday, way jilicday . . . Beedku [ukuntu] way jilicsanayd, markii biyaha kulul lagu dhex-ridayse, way adkaatay . . . Laakiin, bunkii (qaxwihii) wax kale ayuu sameeyey . . . Markii bunka (qaxwaha) biyaha lagu dhex-riday, bunkii wuxuu bedelay dha-dhankii iyo midabkii biyaha."

Markuu intaa sharaxay, ayuu innantiisii waydiiyey, "Aabo adigu saddexdaas keebaad tahay?" Ma waxaad tahay sida baradhada, oo marka dhibta, ama kulaylka, noloshu kulasoo dersto waad jilicdaa oo niyad-jabtaa? Mise waxaad tahay sida beedka (ukunta) oo marka dhibta, ama kulaylka, noloshu kulasoo derso waad adkaataa, oo markaasna aad kala jabtaa? Mise waxaad tahay sida bunka (qaxwaha) oo marka dhibta, ama kulaylka, noloshu kulasoo derso waad is-bedeshaa oo nolosha adag laf-teeda ayaad bedeshaa oo aad ka dhigtaa mid qurux-badan oo dhadhan-macaan leh.

Xikmada sheekada: Noloshu marna way macaantay, marna way adkaataa. Kolba sida aad u qaabisho nolosha, macaankeeda iyo adaygeedaba, ayuunbaa muhiim ah. Noqo qof nolosha bedeli kara, ee ha noqon qof ay noloshu bedesho.

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Fullul*

1. *Fullul isticmaal marka aad qorayso "qoraal" ama "hadal" aad soo xiggatay laakiin aanad qaybo ka mid ah soo xigganin.*

Tusaalaha koowaad:
Qoraalkan soo socda waxaa qoray Dr. Cali.

**Qoraalkii Dr. Cali**: Markaan shaqada kasoo baxay, waxaan tagay maqaaxida Caga-weyne, oo wax yar ii jirta, ka dibna guriga ayaan tagay.

Waxaan soo xigganayaa qayb ka mid ah qoraalkaas Dr. Cali. Si aan u muujiyo weedhaha aanan soo xigganin (ee aan ka tagey) waa in aan isticmaalaa astaanta Fullul.

**Xiggasho**: Dr. Cali wuxuu yidhi, "Markaan shaqada kasoo baxay, waxaan tagay maqaaxida Caga-weyne . . . ka dibna guriga ayaan tagay." (**U fiirso**: *saddexda dhibcood ee aan isticmaalay waxay tilmaamayaan in ereyadii uu Dr. Cali qoray qaarkood aan ka tagay oo aanan soo xigganin. Markaad eegto tusaalahan, waxaan ka tagay ereyada ah '**oo wax yar ii jira**'*).

Tusaalaha labaad:

**Qoraalkii Dr. Cali**: Waxaanu tagnay suuqa, waanu soo adeeganay, waananu kasoo qadaynay, ka dibna guriga ayaanu kusoo noqonay.

Waxaan soo xigganayaa qoraalkaas Dr. Cali anigoo isticmaali doona Fullul.

Dr. Cali wuxuu qoray: "Waxaanu tagnay suuqa . . . ka dibna guriga ayaanu kusoo noqonay." (***U fiirso**: saddexda dhibcood ee aan isticmaalay waxay tilmaamayaan in aan ereyadii uu Dr. Cali qoray qaarkood aan ka tagay oo aanan soo xigganin. Markaad eegto tusaalahan, waxaan ka tagay ereyada ah "**waanu soo adeeganay, waananu kasoo qadaynay**"*).

2. *Fullul isticmaal marka aad doonayso in aad qoraal ku muujiso qof hadlaayey oo hadalkiisii dhex-galiyey qaddar gaaban oo aamusnaan ah.*

Tusaale:

- Waxaa shahaado sharaftan ku guulaystay . . . Dr. Cali Faarax. (***U fiirso**: saddexdan dhibcood waxay tilmaamayaan in qofkii hadlaayey uu qadar daqiiqado ah aamusnaa intii aanu sheegin magaca ku guulaystay shahaado sharafta*).
- Lacagta aad ii dhiibtay waxaa weeye . . . saddex-iyo-sagaashan shilling . . . iyo . . . bal sug . . . badh. (***U fiirso**: saddexda dhibcood waxay tilmaamayaan in qofkii hadlaayay uu dhowr-jeer hadalkiisa dhex-geliyey qadar aamusnaan ah*).

Tusaale:

- May, may. Ma ihi . . . laakiin, waxaan u jeeday . . . eeg . . . ujeedadaydu waxay ahayd . . . in aan idin saxo. (***U fiirso**: waa qof hadlaaya oo kolba yara aamusaya. Qoraalkani wuxuu ku tusayaa in qofka hadalkiisa laga dhexgalaayey oo kolba qof kale ka dhex-galaayey. Saddexda dhibcoodna waxay muujinayaan "aamusnaanta hadalka dhex-galaysay"*).

◆◆◆

## TALLO

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Imisa meelood ayaa loo isticmaalaa astaanta Fullul?

2. Waa maxay micnaha “Fullul?”

3. Noloshaada sida aad u qiimayso, iyo sida aad u aragto, ayuunbay noqonaysaa. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Fullul:

1. Noloshaada sida aad u qiimayso, iyo sida . . . aragto, ayuunbay noqonaysaa.
2. Noloshaada sida aad u qiimayso . . . ayuunbay noqonaysaa.
3. Noloshaada sida aad u qiimayso, iyo sida aad u aragto . . . noqonaysaa.

4. Hello! Haa! Anigu waa si fiican, laakiin waan u sheegay, ma iminka? Hee, haa, waa sidaan kuu, haye, haye, waa runtaa. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay Fullul:

1. Hello!, Haa!, Anigu waa si fiican laakiin waan u sheegay, ma iminka?,…..hee!...haa!...waa sidaan kuu, haye!...haye!...waa runtaa.
2. Hello! Haa! Anigu . . . waa si fiican . . . laakiin waan u sheegay . . . ma iminka? . . . hee! . . . haa! . . . waa sidaan ku . . . haye! . . . haye . . . waa runtaa.
3. Hello! Haa! Anigu waa si fiican, laakiin waan u sheegay, markii hore, hee, haa, waa sidaan kuu, haye, haye, waa runtaa.

5. Dr. Cali wuxuu qoray, “Waxaa aad loogu baahan-yahay, weliba si gaar-ah looga baahan-yahay aqoon-yahanada, in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.” Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay Fullul:

1. Xiggasho: Dr. Cali maqaalkiisii wuxuu ku qoray, “Waxaa …..loogu baahan-yahay, weliba ….. aqoon-yahanada, in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.”
2. Xiggasho: Dr. Cali maqaalkiisii wuxuu ku qoray, “Waxaa aad loogu baahan-yahay [. . .] in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.”
3. Xiggasho: Dr. Cali maqaalkiisii wuxuu ku qoray, “Waxaa aad loogu baahan-yahay . . . in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.”

6. Jariddada Hilaac waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May ee Soomaaliland. Waxaana la go’aansadday in kharashkii lagu bixin-lahaa debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.” Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay Fullul:

1. Xiggasho: Jariddada Hilaac maanta waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May [. . .] Waxaana la go’aansadday in kharashkii [. . . ] debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.”
2. Xiggasho: Jariddada Hilaac waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May . . . Waxaana la

go’aansadday in kharashkii . . . debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.”

3. Xiggasho: Jariddada Hilaac maanta waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May…..Waxaana la go’aansadday in kharashkii….debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.”

7. Nin kuu digey, oo ku daggey, kuma dilin. Weedhahan soo socda keebaa si ah loogu isticmaalay Fullul:

1. Nin kuu digey..kuma dilin.
2. Nin kuu digey….kuma dilin.
3. Nin kuu digey . . . kuma dilin.

# CUTUBKA 13

## *Qo-qob /*

ASTAANTAN WAXAA LUQADA INGIRIISIDA lagu yidhaahdaa, “slash.” Erey-bixinta cusub ee af-Soomaaliga ahna waxaan u bixiyey, “qo-qob.” Astaanta qo-qob waxaa lagu isticmaalaa laba meelood oo kaliya. Kow, astaanta qo-qobka waxaa loo isticmaalaa oo ay u dhigantaa ereyada “iyo,” “ama.” Waxay tilmaamaysaa in labada erey ee ay u dhaxayso astaanta qo-qob, mid ahaan ama labadaba loo jeedo. Laba, waxaa kale oo astaanta qo-qob loo isticmaalaa marka aad qorayso taariikh. Cutub-kan ayaan ku sharaxayaa sida loo istimaalo astaanta qo-qob.

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

**Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).

**KHALAD**

waa maxay micnaha bayooloji bayooloji waxaynu kusoo dhiganay dugsiyadii/jaamacadihii aynu dhigan jirnay laakiinse wali ma is waydiisay micnaha biooloji kelmeda asal ahaan waxay kasoo jeedaa giriig waana laba erey oo laysku xidhay labada ereyna waxaa weeye bioo/loji ereyga hore ee bio micnihiisu waxaa weeye nolosha ereyga danbe ee loji micnihiisu waxaa weeye barashada markaa biooloji micnihiisu waxaa weeye barashada noolaha bal waxaa kale oo aad eegtaa soosiooloji ereyga soosiooloji waa laba erey oo laysku xidhay oo ah soosioo/loji ereyga hore waa socio oo micnihiisu yahay bulsho ereyga labaadna sidii aynu hore usoo aragnay waa loji oo micnihiisu yahay barashada markaa soosiooloji micnihiisu waxaa weeye barashada bulshada

**SAX**

Waa maxay micnaha "bayooloji?" ama "biology?" Bayooloji waxaynu kusoo dhiganay dugsiyadii/jaamacadihii aynu dhigan jirnay; laakiinse, wali ma is waydiisay micnaha biooloji.

Kelmedu asal-ahaan waxay kasoo jeedaa Giriig, waana laba erey oo laysku xidhay. Labada ereyna waxay kala yihiin: "bio" iyo "logy." Ereyga hore ee "bio" micnihiisu waxaa weeye, "noolaha." Ereyga danbe ee "logy" micnihiisu waxaa weeye, "barashada." Marka labadda erey micnahooda laysku xidhiidhi-yana, magaca biooloji (biology) micnihiisu waxaa weeye: "barashada noolaha."

Bal waxaa kale oo aad eegtaa "soosi'ooloji" ama "sociology." Ereyga "soosi'ooloji" waa laba erey oo laysku xidhay oo kala ah: "socio" iyo "logy." Ereyga hore waa "socio" oo micnihiisu yahay, "bulsho." Ereyga labaadna (sidii aynu hore usoo aragnay) waa" "logy" oo micnihiisu yahay, "barashada." Markaa soosiooloji micnihiisu waxaa weeye: "barasahada bulshada."

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Qo-qob*

1. *Astaanta qo-qob waxaad isticmaashaa marka aad qorayso laba erey oo aad isku si u isticmaalayso.*

Tusaale:

- Quraacda waxaad inoo samaysaa roodhi iyo/ama laxoox (canjeero). (***Eeg**, halkan waxaan uga jeedaa: waxaad inoo samaysaa roodhi iyo laxoox; ama waxaad inoo samaysaa roodhi ama laxoox [canjeero]*).
- Shirka waxaa kasoo qayb-gali-kara qofkasta: rag/dumar. (***Eeg**: marka aad qorto "rag/dumar" waxay u dhigantaa "rag iyo dumar" ama waxay u dhigantaa "rag ama dumar"*).
- Gaadhiga aan doonaayo in aan iibsado midabkiisuu waa in uu ahaadaa cadaan/casaan.
- Caanaha iyo/ama timirtu caloosha ayay u wanaagsan-yihiin.

2. *Astaanta qo-qob isticmaal marka aad qorayso xisaabta ja-jabka.*

Tusaale:

- Shaqada waxaanu ku dhamaynaa 4½ saacadood. (***Eeg**, halkan waxaan uga jeedaa in aan shaqada ku dhamayno afar-saacadood-iyo-badh*).
- Waxaad u baahantay xadhig dhererkiisu yahay 20½-mitir.
- Waxaan safarka kusoo jiray 3¼ maalmood.

3. *Astaanta qo-qob isticmaal marka aad qorayso tirro laysu qaybiyey ("loo-qaybiyey").*

Tusaale:

- Gadhigaygu wuxuu isticmaalaa 25 km/liter.
- Toban loo qaybiyey shan: 10/5.

4. *Astaanta qo-qob waxaad isticmaashaa marka aad qorayso taariikh*.

Tusale:

- 01/12/2015
- 10/11/2000
- 05/12/1960

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsatooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

1. Maxaa loo isticmaalaa Astaanta Qo-qob?

2. Taariikhahan soo socda keebaa si sax ah u qoran:
    1. 05-05/2017
    2. 05/05-2017
    3. 05,05,2017
    4. 05/05/2017

5. Dhamaan waa khalad
6. Dhamaan waa sax

3. Weedhahan soo socda keebaa sheegaaya rag iyo/ama dumar:
   1. Rag/dumar
   2. Rag, dumar
   3. Rag-dumar

4. Weedhahan soo socda keebaa sax ah:
   1. Caruur/ciroole
   2. Caruur iyo/ama ciroole
   3. Caruur / Ciroole

5. Waxaan dhashay 05-05/1970, waxaannan ku dhashay Burco, Soomaaliland.
   1. Sax
   2. Khalad

# CUTUBKA 14

## *Ham’se ’*

ASTAANTA HAM’SE WAXAA LOO isticmaalaa laba meelood. Kow, magacyada dadka qaarkood ayaan ka maaarmin in ham’se loo isticmaalo. Laba, ereyo badan oo Soomaali ah ayaa iyana aan ka maarmin in lagu darro ham’se.

Dadka badankiisu si khaldan ayay u isticmaalaan astaanta ham’se. Waxaan in badan arkay dad badan oo meeshii ay ka isticmaali lahaayeen ham’se, isticmaalaaya hakad. Tusaale ahaan, waxaad arkaysaa qof qoraayaa ereyaddan: Daa,uus ama su,aal ama go,aan. Dhamaantood waa khalad. Waxaa sax ah: Daa’uus ama su’aal ama go’aan. Ham’se-ha xagga sare ku qor; haku qorin xagga hoose.

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

**KHALAD**

gabaygii shiinleey cabdi iidaan aw faarax waxaan soo qaadanayaa dhowr tudduc oo gabaygan ka mid ah si aan ugu isticmaalo astaanta hamse tudducyadani isuguma xigaan sidii ay gabayga isugu xiggeen waa tudducyo ku kala jira meelo kala duwan oo gabayga ka mid ah markuu midhoyarii wada shuq yidhishiddan-tay deelleeye

shaddiibaan hayaanka u rariyo shaanbic geedigae iyo shurun-shur magaliisu galey haysasoo shubae waxa badawgu shaallaah u yidhi sheeg hadaad garato shoocaaaligeedaa hirmacay waase shay goanne cadceeduba dayaxa shiikhiisee waana laba shaye shansho kama dhadhamin reerku waa shey cajaayibahe

**SAX**

“SHIINLEEY”

Gabaygii: Cabdi Iidaan aw-Faarax (IHN)

Waxaan soo qaadanayaa dhowr tudduc oo gabaygan ka mid ah, si aan ugu isticmaalo astaanta ham’se. Tudducyadani isuguma xigaan sidii ay gabayga ugu jireen, ee ay isugu xiggeen. Waa tudducyo ku kala jira meelo kala duwan oo gabayga ka mid ah.

“Markuu midho-yarii wada shuq-yidhi, shiddan-tay Deelleeye,
. . .
Sha’ddiibaan hayaanka u rariyo, shaanbis geediga’e,
. . .
Iyo shurun-shur malagiisu galey, haysasoo shuba’e,
. . .
Waxa badawgu sha’Allaah u yidhi, sheeg hadaad garato?
. . .
Shoocaaaligeedaa hirmacay, waase shay go’anne,
. . .

Cad-ceeduba dayaxa shiikhiisee, waana laba shay'e.
. . .
Shan-sho kama dhadhamin reerku waa, shey cajaayi'bahe."

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Ham'se*

1. *Qaabkan u isticmaal ham'se marka aad qorayso magac-yadda u baahan in Ham'se lagu isticmaalo.*

Tusaale:

- Daa'uud
- Gu'dhalad
- Ceeb'la
- Cawra'la

. Saxar'la
b) Saluug'la

***Digniin****: Dadka badankiisu meel khaldan ayay geliyaan ham'se.*
**SAX**: Daa'uud; Gu'dhalad; Ceeb'la
**Khalad**: Daa,uud; Gu,dhalad; Ceeb,la.

2. *Qaabkan u isticmaal ham'se marka aad qorayso ereyadda Soomaaliga ah ee u baahan in lagu isticmaalo Ham'se*.

Tusaale:

- Da’diisu waa imisa?
- Su’aal aan ku waydiiyo?
- “Khayr-ba ha falin, shar’ba kuuma yimaadee.”
- “Sha’ddii-baan hayaanka u rariyo, shaan-bis geediga’e.”

***Digniin**: Dadka badankiisu meel khaldan ayay geliyaan ham’se.*

**SAX**: Da’diisu waa imisa? Su’aal aan ku waydiiyo?

**Khalad**: Da,diisu waa imia? Su,aal aan ku waydiiyo?

◆◆◆

## TALLO

*Akhri jaraa’iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay’addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay’addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

## LAYLIS

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta Ham’se?

2. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay astaanta Ham’se?
    1. Ninkii gam,ayaa sariir gog-ladee, go,aygaan dhigtaa gidaarrada.

2. Ninkii gamayaa sariir gogladee, goaygaan dhigtaa gidaarrada.
3. Ninkii gam'ayaa sariir gog'ladee, go'aygaan dhigtaa gidaarrada.

3. Naa go'ddooy, kumee?
   1. Sax
   2. Khalad

4. Go'aan qaadashadu waa guusha badhkeed.
   1. Sax
   2. Khalad

5. Jasaa'ka'Laahul khayr
   1. Sax
   2. Khalad

# CUTUBKA 15

## *Jan-jeedh & Hoo-xariiq*

LABADDAN ASTAAMOOD WAXAA LOO isticmaalaa si isku mid ah. Berrigii hore ee aanu jirin kombuyuutarku (computer) ee wax lagu qori-jiray teebka (type writer), suurto-gal may ahayn in la isticmaalo ereyada *jan-jeedha* ama *qalooca*. Markaa waxaa la isticmaali jiray uun, ereyo hoosta-ka-xariiqan. Laakiinse, intii uu soo baxay kombuyuutarku, waxaa qoraalkii lagusoo kordhiyey in la *qaloocin*-karo ama la *jan-jeedhin*-karo xarfo ama weedho ka mid ah qoraalka.

Ereyada la *jan-jeedhiyo* iyo kuwa hoosta laga xariiqo, waxaa loo isticmaalaa si isku mid ah. Hadii aad *jan-jeedhiso* iyo hadii aad hoosta ka xariiqdo, waa isku mid.

Casharkan waxaan ku sharaxayaa xeerarka iyo meelaha lagu isticmaalo *jan-jeedhka* iyo hoos xariiqa.

◆◆◆

### AQOONTAADA TIJAABI

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

**Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).

**KHALAD**

Silsiladii maroodiga. Maalin maalmaha ka mida ayaa nin soo booqday xero lagu rabeeyo maroodiga ninku wuxuu arkay maroodi aad u wayn oo ay silsilad aad u yari lugta kaga xidhantahay ninkii wuxuu arkay in uu maroodigu silsilda yar ee lugta kaga xidhan si fudud isaga goyn karo xeradana ka baxsan karo ninkii wuxuu fahmi waayay sababta uu maroodigu silsilada isaga goyn waayay wuxuu u tagay ninkii maroodiga tababaraayey waxaana dhex maray sheekadan. Ninkii miyaanad ka baqanin in uu maroodigu silsildan aadka u yar iska gooyo oo uu idin laayo. Tababarihii maya. Ninkii waayo. Tababarihii markii uu maroodigu aadka u yaraa ayaa silsiladan lafteeda lagu xidhay. Wakhtigaas uu yaraana awoodna umuu lahayn uu silsilada iskaga gooyo markii uu yaraa dhowr jeer ayuu isku dayay in uu iska gooyo laakiin awood umuu lahayn wakhtigaas markii uu arkay in aanu iska goyn karaynin ayuu iska daayey oo iskala qabsaday iminka markii uu waynaadayna weli wuxuu aaminsanyahay in aanu iska goyn karin markaa iskuma dayayo oo waanu xaqiijinay

Xikamada sheekada ku jirta waxaa weeye: waxaa jira waxyaabo aad aamintay in aanad samayn karaynin sababtoo ah waxaa lagugusoo koriyey ama ay asxaabtaadu ku aaminsiisay in aan la samayn karaynin sidaa awgeedna iskuma daydid waa wax been ah waa in aad wax walba isku daydaa. Waxaa laga yaabaa in aad awoodeedii leedhay iminka wax aanad qaban karayni ma jiraan waxa kaliya ee ku hortaagani waa silsilada maskaxda kaaga xidhan silsiladaas yar goo si aad wax walba u qabsato.

SAX

**SIL-SILADII MAROODIGA**

Maalin maal-maha ka mida ayaa nin soo booqday xero lagu rabeeyo maroodiga. Ninku wuxuu arkay maroodi aad u wayn oo ay silsilad aad u yari lugta kaga xidhan-tahay. Ninkii wuxuu arkay in uu

maroodigu silsilda yar ee lugta kaga xidhan si fudud isaga goyn karo, xeradana ka baxsan karo. Ninkii wuxuu fahmi waayay sababta uu maroodigu silsilada isaga goyn waayay. Wuxuu u tagay ninkii maroodiga tababaraayey, waxaana dhex maray sheekadan.

**Ninkii**: Miyaanad ka baqanin in uu maroodigu silsildan aadka u yar iska gooyo oo uu idin laayo?
**Tababarihii**: Maya.
**Ninkii**: Waayo?
**Tababarihii**: Markii uu maroodigu aadka u yaraa ayaa silsiladan lafteeda lagu xidhay. Wakhtigaas uu yaraa awood umuu lahayn uu silsilada iskaga gooyo. Markii uu arkay in aanu iska goyn karaynin, ayuu iska daayey oo iskala qabsaday. Iminka markii uu waynaadayna weli wuxuu aaminsanyahay in aanu iska goyn karin sil-silada. Markaa iskuma dayayo inuu iska jaro.

Xikmada sheekadan ku jirta waxaa weeye: waxaa jira waxyaabo aad aamintay in aanad samayn karaynin; sababtoo ah, waxaa lagugusoo koriyey, ama ay asxaabtaadu ku aaminsiisay, in aan la samayn karaynin. Sidaa awgeed, iskuma daydid; waana wax been ah oo aad aamintay, sida maroodigaas oo kale. Waa inaad wax walba isku daydaa. Waxaa laga yaabaa in aad awoodeedii leedahay maanta; wax aanad qaban karaynina ma jiraan. Waxa kaliya ee ku hortaagani waa sil-silada maskaxda kaaga xidhan. Sil-siladaas yar goo si aad wax walba u qabsato.

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Jan-jeedh* iyo <u>Hoos Xariiq</u>

1. *Marka aad qorayso "ciwaannada" iyo "magacyada" dhamayska-tirran, waxaad isticmaashaa Jan-jeedh ama <u>Hoos Xariiq</u>. (Ciwaannada dhamayska-tirran waxaan uga*

*jeedaa ciwaannada buuggaagta; laakiin, ciwaanka cutub ka mid ah buuggaasi waa ciwaan aan dhamays-tirrnayn).*

Tusaale:

❖ **Ciwaanka buggaagta**:

- *Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*. Qalinkii Maxamed Baashe X. Xasan.

**AMA**

- Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa. Qalinkii Maxamed Baashe X. Xasan.

❖ **Magaca jaraa'iddada**:

- *Haatuf* **AMA** Haatuf
- *Hormood* **AMA** Hormood

❖ **Magaca riwaayaddaha**:

- *Ninba Timo-xamar, oo Hadana Xiir*

**AMA**

- Ninba Timo-xamar, oo Hadana Xiir

❖ **Magaca filimada**:

- *Cilmi iyo Caado* **AMA** Cilmi iyo Caado
- *Beeneey waa Run* **AMA** Beeneey waa Run

❖ **Magaca gabayada, maansooyinka, heesaha dhaadheer:**

- *Daallaley* **AMA** Daallaley
- *Shiinleey* **AMA** Shiinley
- *Sil-silada Deeleey* **AMA** Sil-silada Deeleey

❖ **Magaca barnaamij TV:**

- *Herreri iyo Hargaysa* **Ama** Herreri iyo Hargaysa
- *Barnaamijka Salaamaha* **AMA** Barnaamijka Salaamaha

❖ **Magaca barnaamij raadyo (radio):**

- *Maaweelada Caruurta* **AMA** Maaweelada Caruurta
- *Dalmar iyo Daabad* **AMA** Dalmar iyo Daabad

2. *Marka aad qorayso "ciwaannada" iyo "magacyada" aan dhamayska-tirrayn, waxaad isticmaashaa astaanta Kolmo (eeg Cutubka 5).*

Tusaale:

❖ **Maqaalada lagusoo qoro jaraa'iddadda:**

- "Doorashadii Soomaaliland oo Dib-u-Dhacday."
- "Sarifkii Lacagta SlSh oo Hoos-u-Dhacay."

❖ **Sheekooyinka gaa-gaaban:**

- "Suul-cawro."
- "Cigaal Shiidaad."

❖ **Heesaha:**

- "Qarrad."
- "Nayruush."
- "Sayllo."

❖ **Xalqad ka mid ah barnaamij TV ama raadiyo:**

- "Safarkii Lu'gooyo." Sheekadii Gurey iyo Guuleed.

❖ **Cutub buug:**

- “Cutubka 5: *Jan-jeedh* & Hoos Xariiq” (Eeg, waa Cutub-kan aynu dhiganayno).
- “Hanaqaadkii Hadraawi” (***Eeg**, waa cutub ka mid ah buuggan: Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa. Qalinkii Maxamed Baashe X. Xasan*).

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa’iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay’addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay’addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

Weedhahan soo socda, waxaad ka dhigtaa jan-jeedh ama hoosta ka xariiq, sida ay ugu kala haboon-yihiin.

- Waxaan doonayaa in aan soo daawado riwaayada Beeneey waa Run.
- Weligaa ma akhriday cutubka ku jiraa buugga ciwaankiisa la yidhaahdo, Hagar-laawe.
- Maanta waxaan akhriyey Jarii’ddada Wada-jir.
- Waa maxay micnaha kelmeda, Burco?
- Heesta uu qaado Xasan Aadan Samatar ee la yidhaahdo Daa’uus, yaa sameeyey.

# CUTUBKA 16

## *BOQOLEY %*

ASTAANTA BOQOLEY WAXAY U taagantahay ereyga boqolkiiba-qayb. Micnaheedu waxaa weeye: marka aad doonayso in aad qoraal ku muujiso, *boqolkiiba qayb ka mid ah*. Tusaale ahaan, marka aad qoraal ku muujinayso 20%—oo micnaheedu yahay boqolkiiba-labaatan. Sidaa awgeed, si loosoo-gaabiyo ereyga boqolkiiba-qayb ayaa waxaa la isticmaalaa astaanta boqoley %.

Marka aad isticmaalayso astaantan boqoley, mar-kasta waa in ay astaanta boqoley ka ***DANBAYSAA*** lambarka aad qorayso. Astaanta boqley haka horaysiinin lambarka. Mar-marka qaarna waxaa la isticmaalaa astaanta boqoley, mar-marka qaarna waxaa la isticmaalaa ereyga “boqolkiiba-qayb” oo si dhamays-tirran u qoran. Cutub-kan waxaynu ku sharaxaynaa xeerarka iyo sida loo isticmaalo boqoleey.

◆◆◆

**AQOONTAADA TIJAABI**

*Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.*

***Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).*

◆◆◆

**KHALAD**

ardayda dhigata jaamacada dayax %60 waa inamo boqolkiiba 40 na waa hablo inamada ardayda ah %30 waa 20 jir boqolkiiba 20 waa 22 jir %50 na waa 23 jir hablaha ardayda ah 40 boqlkiiba waa 21 jir %60 na waa 22 jir sanadkii dhamaaday ardayda jaamacada ka qalin jabisay %80 waxay ku baaseen A boqolkiiba 10 na waxay ku baaseen B %10 waxay ku baaseen C

**SAX**

Ardayda dhigata Jaamacada Dayax, 60% waa inamo; 40%-na waa hablo. Inamada ardayda ah 30% waa 20-jir; 20%-na waa 22-jir; 50%-na waa 23-jir. Hablaha ardayda ah 40% waa 21-jir; 60%-na waa 22-jir.

Sanadkii dhamaaday, ardayda jaamacada ka qalin-jabisay 80% waxay ku baaseen derejada “A”; 10%-na waxay ku baaseen derejada “B”; 10%-na waxay ku baaseen derejada “C.”

## Xeerarka Guud ee *Boqley*

1. *Astaanta boqoley isticmaal marka aad qorto lambar tilmaamaya boqolkiiba-qayb.*

Tusaale:

- 10% (boqolkiiba-toban).
- 35% (boqolkiiba-shan-iyo-soddon).
- 100% (boqolkiiba-boqol)

**SAX**: 25%
**Khalad**: %25

**Eeg**: *Mar walba astaanta boqoley ka danbaysii lambarka aad qorayso. Lambarka iyo astaanta boqoleyda ha u dhaxaysiinin meel banaan, isku dheji labarka iyo astaanta boqoley.*

2. *Astaanta boqoleyda isticmaal marka aad qoryso xisaab, saynis, qoraalo muhiim ah, iwm.*

Tusaale:

- 90% caruurta darbi-jiirka ahi waa wiilal (inamo).
- 50% + 50% = 100%
- Ku dhawaad 70% dhalinyarta jaamacadaha kasoo qalin-jabisay shaqo la'aan ayaa haysa.

3. *Astaanta boqoleyda ha isticmaalin marka aad lambarka ku qorto xuruuf. Waxaan uga jeeda, marka lambarka aad u qorto xuruuf ahaan, ha isticmaalin astaanta boqoley.*

Tusaale:
**SAX**: Boqolkiiba sagaal.
**Khalad**: Boqolkiiba 9.

**SAX**: Boqolkiiba lix.
**Khalad**: Lix%

4. *Astaanta boqolayda ha isticmaalin marka aad qorayso ciwaan buug ama ciwaan maqaal.*

Tusaale:

**SAX**: Shaqo La'aanta Dhalinyarta oo Gaadhay Boqolkiiba Todobaatan.

**Khalad**: Shaqo La'aanta Dhalinyarta oo Gaadhay 70%.

5. *Astaanta boqlayda raaci, ama u isticmaal, marka aad qorayso lambarada ka wayn tobanka. Lambarka toban iyo wixii ka yar waxaad u qori kartaa xuruuf ahaan (boqolkiiba laba, boqolkiiba saddex, boqolkiiba shan, iwm). Laakiin, wixii lambarka toban ka wayn, waxaad u qortaa lambar ahaan (11%, 30%, 40%, iwm), how qorin xuruuf ahaan.*

Tusaale:

- Boqolkiiba todoba arday ayaa imtixaankii ku-dhacay.
- Boqolkiiba sagaal askari ayaa ciidamada lagu kordhiyey.
- 11**%** arday ayaa imtixaankii ku-dhacday.
- 20**%** askari ayaa ciidamada lagu kordhiyey.

6. *Marka aad qoraalka ku bilaabayso tirro-boqoley ah, waxaad ku qortaa xuruuf, ha u qorin lambar ahaan*.

Tusaale:

**SAX**: Boqolkiiba afartan haween ah ayaa jaamacadaha wadanka ka qalin-jabiya sanadkii.

**Khalad**: 40% haween ah ayaa jaamacadaha wadanka ka qalin-jabiya sanadkii.

***Digniin****: Mar-marka qaarkood waxaad arkaysaa jaraa'iddada iyo maja-ladaha oo lambar-boqoley ah ku bilaabaya*

*qoraalkooda. Taas micnaheedu ma'aha in ay saxan-yihiin. Way khaldan-yihiin qoraal ahaan. Ujeedada ay sidaa u samaynayaan waxaa weeye: maadaama jaraa'iddadu aanay haysanin boggag badan oo ay wax ku qoraan, waxay doonayaan in ay soo koob-koobaan qoraalkooda. Sidaa daraadeed, "boqolkiiba konton" waxaa ka kooban "50%." Laakiin way ogyihiin in ay jabinayaan xeerarkii astaanta boqolay.*

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

1. Maxaa loo isticmaalaa Astaanta Boqoley?

2. Labadan keebaa si sax ah loo isticmaalay Astaanta Boqoley?
    1. %90
    2. 90%
    3. Sagaashan%
    4. Boqolkiiba 90

3. Sanadkan 2017, ardayda kasoo qalin-jabisay dugsiga Sheekh Bashiir waxaa jaamaca galey:

   1. Boqolkiiba 40
   2. 40 boqolkiiba
   3. 40%
   4. %40

4. Shaqaalaha Wasaarada Arimaha Guddaha, imisa ayaa haween ah?

   1. Waxaa haween ah boqolkiiba 30
   2. Waxaa haween ah 30 boqolkiiba
   3. Waxaa haween ah boqolkiiba soddon
   4. Waxaa haween ah 30%

5. Fikradda uu Xasan soo jeediyey anigu waan ku raacsanahay:

   1. Boqolkiiba%
   2. 100%
   3. %100
   4. Boqolkiiba boqol

# CUTUBKA 17

## *Astaanta Lacagta $*

ASTAANTA LACAGTA WAXAA LAGU isticmaalaa marka aad tilmaamayso nooca ay tahay lacagta aad ka hadlaysaa: United States of America Doolar; Kuwaiti Dinar; Dirham; Shillin Soomaali; Soomaaliland Shillin; Itoobiyan Birr, iwm. Marka aad astaanta lacagta isticmaalayso (wadanka ay doonto ha ahaatee), astaanta lacagta ka horaysii qiimaha/lambarka lacagta ee aad qorayso. Marna haka danbaysiinin astaanta lacagta qiimaha/lambarka lacagta ee aad qorayso. Cutub-kan waxaynu ku sharaxaynaa xeerarka iyo sida loo isticmaalo astaanta lacagta.

◆◆◆

### AQOONTAADA TIJAABI

Inta aanad shuruucdan baranin, waxaad isku daydaa in aad saxdo khaladdaadka ku jira qoraalkan gaaban ee soo socda. Qaybta hore (sare) waxaa ku qoran qoraal KHALAD ah, qaybta danbana (hoose) waxaa ku qoran qoraalkii oo la saxay. Marka hore isku-day in aad saxdo meelaha khaldan ee ku jira qaybta hore (sare). Marka aad sixitaankaaga dhamayso, waxaad bar-bar-dhigtaa qoraalka danbe (hoose) ee saxan. Markaa waxaa kuusoo baxaya in aad si fiican u wada saxday iyo in kale.

**Digniin**: Fadlan marka hore ha eegin qoraalka SAX-da ah ee qaybta danbe (hoose). Waxaad ku bilowdaa qoraalka KHALAD-ka ah ee qaybta hore (sare).

### KHALAD

Caasimada hargaysa waxaa maanta 01/05/2017 1.00US$ waxaa lagu sarifaayey 8500.00slsh shalayto waxaa 1.00US$ lagu sarifaayey 7000.00slsh taasi waxay ina tusaysaa in lacagtii doolarka maraykanku sare u kacday halka lacagta soomaaliland hoos u dhacday sanadkii hore 2016 1.00US$ waxaa lagu sarifi jiray 6000.00slsh waxaa inoo muuqatada in sanad kasta lacagta soomaaliland ay hoos u sii dhacayso sidee wax looga qaban karaa hoos u dhaca ku yimi ee ilaa iminkana sii kordhaaya lacagta soomaaliland

**SAX**

Caasimada Hargaysa maanta oo ay taariikhdu tahay 01 Janaayo, 2017, waxaa US$1.00 (halka Doolar ee Maraykanka ah) lagu sarifaayey SlSh8,500.00 (siddeed-kun-iyo-shan-boqol oo lacagta Soomaaliland ah). Sanadkii hore markay taariikhdu ahayd 01 Janaayo, 2016, waxaa US$1.00 lagu sarifi jiray SISH6000.00.

Taasi waxay ina tusaysaa in lacagtii Doolarka Maraykanku sare u kacday, halka lacagta Soomaaliland-na hoos u dhacday. Waxaa inoo muuqatada in sanad kasta lacagta Soomaaliland ay hoos u sii dhacayso, hadii aan wax laga qabanin.

Sidee wax looga qaban karaa hoos u dhaca ku yimi (ee ilaa iminkana kusii kordhaaya) lacagta Soomaaliland?

◆◆◆

## Xeerarka Guud ee *Lacagta*

1. *Astaanta lacagta marka aad qorayso/isticmaalayso, ka horaysii lambarka aad qorayso. Astaanta lacagtu waa in ay ka horaysaa lambarka. Marna astaanta haka danbaysiinin lambarka.*

Tusaale:

- US$1000.00 (*Kun Doolarka Maraykanka ah*). (***Eeg**: US-da ka horaysa astaanta doolarku waxaa weeye "United States"*. Waxaa kale oo aad u qori kartaa: $1000).
- £1000.00 (Kun Bawnka Ingiriiska ah).
- **Br**1000.00 (Kun Itoobiyan Bir ah).
- **SlSh**1000.00 (Kun Soomaaliland Shilling ah).

**Digniin**: astaanta lacagta ka danbaysii qiimaha lacagta ee aad qorayso.

**SAX**: **$**2000

**Khalad**: 2000**$**

◆◆◆

**TALLO**

*Akhri jaraa'iddadda, mareegaha, qoraalada kasoo baxa hay'addaha dowlada, jaamacadaha, iskuulada, ganacsa-tooyinka, hay'addaha samo-falka, iwm. U fiirso sida loo isticmaalay Xaraf-ku-Dhegga. Imisa khalad ayaa ku jira qoraal kasta oo aad akhriday? Adigoo tix-raacaya casharkii aad soo dhigatay, isku day in aad saxdo.*

**LAYLIS**

1. Maxaa lagu isticmaalaa Astaanta Lacagta?

2. Keebaa sax ah:
    1. US$150.00
    2. $150.00
    3. 150$

3. Lacagta Soomaaliland marka lagu sarifo lacagta doolarka wuxuu noqonayaa:
   1. US$1.00 = SlSh9000.00
   2. $1 = SlSh9000.00
   3. 1$ = 9000SlSh
4. Astaanta Lacagta marka la isticmaalayo waan in astaanta laga danbaysiiyaa lambarka la qoraayo: tusaale ahaan, 90$
   1. Sax
   2. Khalad
   3. Ma garanyo

## JAWAABIHII LAYLIS-YADA CUTUBADA OO DHAMAYS-TIRRAN

# CUTUBKA 1

# JAWAAB

1. Imisa sababood ayaa loo isticmaalaa Xaraf-ku-Dheg? Maxay kala yihiin?

**Jawaab**:
Saddex sababood ayaa xarfaha loo waa-weyneeyaa: 1) marka la bilaabayo qoraalka iyo weedh kasta oo dhamays-tirran; 2) marka la tilmaamayo ciwaanada buugta, riwaayadaha, filimada, iwm; 3) iyo marka la tilmaamayo magac-u-yaaladda iyo derejadda dadka. Saddexdan sababood ee loo isticmaalo Xaraf-ku-Dheg, waxaan ku sharixi doonaa tusaalooyinka soo socda.

2. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalaay Xaraf-ku-Dheg:
    1. ciyaarta aad ayaan u xiisaynaayey. markii danbana waan ka xiiso-jabay.
    2. Ciyaarta aad ayaan u xiisaynaayey. markii danbana waan ka xiiso-jabay.
    3. **Ciyaarta aad ayaan u xiisaynaayey. Markii danbana waan ka xiiso-jabay**.

3. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Xaraf-ku-Dheg:
    1. “halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “Baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.

2. “halkeed ku habsaantay,” Ayuu macalinkii i weydiiyey. “baska ayaa ilasoo raagay,” Ayaan ugu jawaabay.
3. “Halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.
4. “halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “Baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay.
5. **“Halkeed ku habsaantay,” ayuu macalinkii i weydiiyey. “Baska ayaa ilasoo raagay,” ayaan ugu jawaabay**.

4. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Xaraf-ku-Dheg:
   1. Dad soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa Kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla Af-soomaaliga.
   2. dad soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla af-soomaaliga.
   3. **Dad Soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa Kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla af-Soomaaliga.**
   4. Dad Soomaaliyeed oo mudo aad u dheer ku noolaa kiiniya ayaa weli si fiican ugu hadla af-soomaaliga.

5. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Xaraf-ku-Dheg:
   1. Waxaanu raacnay diyaaradda daalo airline markii aanu ku soconay dubay.

2. Waxaanu raacnay diyaaradda Daalo airline markii aanu ku soconay Dubay.
3. Waxaanu raacnay Diyaaradda daalo airline markii aanu ku soconay Dubay.
4. **Waxaanu raacnay diyaaradda Daalo Airline markii aanu ku soconay Dubay**.

6. Aniga, Xasan Cali Faarax, iyo Yaxye Maxamed Yoonis ayaa waxaanu tagnay Suuqa Shiraaqle ee Caasimada Hargaysa, Soomaaliland. (***Waxaa ku jira 12 khalad***).

7. Waxaan ka qalin-jabiyey Jaamacada Golis laba sanadood ka hor. Waxaanan dhameeyey shahaaddada koowaad ee jaamacada ee loo yaqaano Bajolar (***Waxaa ku jira 5 khalad***).

8. Buurta Gacan Libaax iyo Buurta Sheekh keebaa weyn? (***Waxaa ku jira 5 khalad***)

9. Labadda webi ee Juba iyo Shabeele waxay ku yaalaan Koonfurta Soomaaliya. (***Waxaa ku jira 5 khalad***).

10. Gabayga Gud-Gude ee uu tiriyey Abwaaan Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi). (***Waxaa ku jira 7 khalad***).

# CUTUBKA 2

# JAWAAB

1. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
    1. Dr, Gaboose, Gud Muuse Biixi, iyo Sh Mustafe waxay u safreen Gob Togdheer, Deg Burco.
    2. Dr Gaboose, Gud. Muuse Biixi, iyo Sh Mustafe waxay u safreen Gob. Togdheer, Deg Burco.
    3. **<u>Dr. Gaboose, Gud. Muuse Biixi, iyo Sh. Mustafe waxay u safreen Gob. Togdheer, Deg. Burco.</u>**
    4. Dr. Gaboose, Gud Muuse Biixi, iyo Sh Mustafe waxay u safreen Gob. Togdheer, Deg Burco.

2. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
    1. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay 2000$.
    2. **<u>Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay $2000.00.</u>**
    3. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay $2000.
    4. Maxamed wuxuu waydiiyey in uu qiimaha gaadhigu yahay 2000.

3. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
    1. Gud Yaxye iyo Dr Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 800 pm
    2. Gud. Yaxye iyo Dr. Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 8:00 pm

3. Gud. Yaxye iyo Dr. Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 800 p.m.
4. **Gud. Yaxye iyo Dr. Cali waxay caawa qabanayaan shir, marka ay saacadu tahay 8:00 p.m.**

4. Iskaa wax-u-qabso waa fikrad aad muhiim u ah waa in lagu dhaqmaa.
   1. SAX
   2. **Khald**

5. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
   1. Taangigga biyaha ee guriga noo yaalaa wuxuu qaadaa 30,5 litir oo biyo ah.
   2. Taangigga biyaha ee guriga noo yaalaa wuxuu qaadaa 30 5 litir oo biyo ah.
   3. **Taangigga biyaha ee guriga noo yaalaa wuxuu qaadaa 30.5 litir oo biyo ah.**

6. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay joogsigga.
   1. Hay'adda U.N.I.C.E.F waxay difaacdaa xuquuqda caruurta.
   2. **Hay'adda UNICEF waxay difaacdaa xuquuqda caruurta.**
   3. Hay'adda UN.IC.EF waxay difaacdaa xuquuqda caruurta.

7. Cali Beenaale wuxuu ku dhawaaqi jiray, “Hayaay!” “Waa Bahaleey!” “Hayaay!” “Isoo gaadhaay!” “Yur!” Yur!” “Yur!.” “Tolaay!” “Waa bahaleey!”

8. Maanta shirkii waxaa lagu gorfeeyey: in la dhiso dugsi cusub oo isugu jira dugsi hoose, dugsi dhexe, iyo dugsi sare.

9. Hay’adda Qaramada Midoobey ee U.N.H.C.R. ayaa waxay ka cadhootay U.S.A iyo U.K oo isku raacay in ay weerer ku qaadaan U.A.E.

10. Warar ayaa kasoo baxay Dowlada Soomaaliya. Wararkaasu waxay sheegeen in berito dadku isusoo baxaan. Waxaana laga codsanayaa in ay magaalada nadiifiyaan. Qofkii kasoo qayb-geliwaaya, waa la ganaaxayaa. Fadlan haka hadhin howshan wanaagsan. Muwaadin-kasta waa ku waajib. Waa magaaladeenii. Ha moogaan, hana ka maqnaan.

# CUTUBKA 3

# JAWAAB

1. Hakad-ka maxaa loo isticmaalaa?

**Jawaab**:
Hakad-ku wuxuu tilmaamaa in aanu qoraalkii joogsanin, laakiin nasasho yar oo gaabani dhex-gashay qoraalka.

2. Weedhahan, kuwee ayaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Hakad:

1. Waxaa agtayda fadhiya oday farxaan ah sheeko badan dabeecad fiican oo qosol badan.
2. **Waxaa agtayda fadhiya, oday farxaan ah sheeko badan dabeecad fiican,oo qosol badan.**
3. Waxaa agtayda fadhiya oday farxaan ah, sheeko badan, dabeecad fiican, oo qosol badan.

3. Taariikhdan, teebaa si sax ah u qoran:

1. 25, Oktoobar, 1980
2. 25 Oktoober 1980
3. **25 Oktoobar, 1980**
4. 25, Oktoobar 1980

4. Taariikhdan, teebaa si sax ah u qoran:

1. Salaasa 13 Febraayo, 2015
2. Salaasa, 13 Febraayo 2015
3. **Salaasa, 13 Febraayo, 2015**
4. Salaasa 13 Febraayo 2015

5. Weedhahan soo socda, waxaad hoosta ka xariiqdaa, weedhaha macluumaadka siyaaddada.

1. Gaadhigaygu, inkastoo uu gaboobey waa gaadhi fiican.
2. Gaadhigaygu, inkastoo uu gaboobey waa gaadhi fiican.
3. **Gaadhigaygu, inkastoo uu gaboobey, waa gaadhi fiican.**
4. Gaadhigaygu inkastoo uu gaboobey waa gaadhi fiican.

6. Maah-maahah Soomaaliyeed ayaa tidhaahda, “Alle ku doori.” Inkastoo ay laba micne yeelan-karto, hadana dadku meel kalya ayay u isticmaalaan. Hadii aad isku daydo in aad micnayso, sideed u maclayn lahayd. (***Waxaa ku jira 3 khalad***.

- Gabay uu tirriyey Guhaad Cabdi Gahayr (IHN), ayaa waxaa ereyadiisii ka mid ahaa:

“Isu-taga, abaabula shirweyn, aaya kama reeba.
Arxan-darran, agoonteeda cuna, hoosta ka abeeso.
Iidaha ‘Islaam’ lagu mataal, jamaca ‘Aamiinta.’
Illow-badan, sidii naag umula, foosha ku ilmeeya
Ugaadh dhego-l’a, uub-loo-qod-dheer, dabinno loo aasa.” (***Waxaa ku jira 9 khalad***).

7. Inkastoo Urrurka Bisha Cas, Laan-qayrta Cas, Libaaxa iyo Qoraxda Cas, ee marka lasoo gaabiyo loo yaqaano (Red Cross), ay caawimo fidiyaan, hadana dhaliilo badan ayaa loosoo jeediyaa. (***Waxaa ku jira 5 khalad***)

- Markaan wadanka ka dhoofay waxay ahayd Salaasa, 10 Maarso, 2015. Waxaan sii dhex-maray wadamada Itoobiya, Suudaan, Liibiya, Talyaaniga, Dhenmaark, iyo Isweedhan. (***Waxaa ku jira 7 khalad***)

8. Waxaan u sheegay, oo weliba aan u sharaxay, in aanan doonaynin. Laakiinse, isagu si khaldan ayuu ii fahmay,

inkastoo aan warkayga u cadeeyey. Waan yaabay aniguye, ma sii kale ayuu ii fahmay. (***Waxaa ku jira 5 khalad***)

# CUTUBKA 4

# JAWAAB

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta Su'aasha?

**Jawaab**:
Astaanta Su'aasha waxaa la isticmaalaa marka la qorayo su'aal toos ah.

2. Weedhahan, tee ayaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Su'aasha?

1. Cajiib! Waa sawir aan ka jaabay!
2. **Cajiib! Waa sawir aad u qurxoon.**
3. Cajiib! Waa sawir aad u qurxoon!?
4. Cajiib! Waa sawir aad u qurxoon?
5. Intuba waa khalad.

3. Weedhahan, tee ayaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Su'aasha?

1. **Askarigii wuxuu i waydiiyey sababta aan u samaysan waayay warqada-cadaynta-dhulka.**
2. Askarigii wuxuu i waydiiyey sababta aan u samaysan waayay warqada-cadaynta-dhulka?

4. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Su'aasha.

1. Ma ii sheegi kartaa inta qof ee uu qolkani qaado.
2. **<u>Ma ii sheegi kartaa inta qof ee uu qolkani qaado?</u>**

1. Jaraa'iddka Iftin wuxuu maanta soo qoray, "waa maxay sababta ay dowladu u samaynayso cashuur dhimista." Habakan aan usoo xiggtay qoraalkii Jaraa'iddka Iftiin, ma sax-baa? Mise waa khalad?
   1. SAX
   2. **<u>Khalad</u>**

2. "Xafiiskee ayaad ka shaqaysaa"? ayuu i waydiiyey.
   1. SAX
   2. **<u>Khalad</u>**

3. Goorma ayuu shirku bilaabmayaa? Imisa qof ayaa isugu imanaya? Halkee ayuu ka dhacayaa? (***Waxaa ku jira 3 khalad***).

4. Waxaan is weydiinayaa in uu iskuulkii maanta fasax-yahay iyo in kale. Waxaan isku hayaa in aan iska joogo iyo in aan iskuulka tago oo aan soo hubsado. Ma tagaa? Mise waan iska joogaa? Maxaan sameeyaa? (***Waxaa ku jira 3 khalad).***

5. Bal waxaad ka faalootaa cida ku guulaysan-doonta madaxtinimada wadanka? Ma waxaa heli doona WADDANI? Mise Kulmiye? Mise Ucid? Sideed ku ogaatay? (***Waxaa ku jira 5 khalad).***

6. Waxaan garan-la'ahay waxa ay ku kala duwan-yihiin gabayga iyo maansadu. Gabaygu muxuu kaga duwan-yahay maansada? Waxaa kale oo aan garan-la'ahay heestu waxay kaga duwan-tahay gabayga iyo maansada. Ma isku midbaa? Mise way kala duwan-yihiin? (***Waxaa ku jira 3 khalad).***

# CUTUBKA 5

# JAWAAB

1. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

1. "Weli ma akhriday "*Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*." ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?" ayuu i waydiiyey.
2. **"Weli ma akhriday '*Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*.' ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?" ayuu i waydiiyey.**
3. "Weli ma akhriday *Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*. ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?" ayuu i waydiiyey.
4. "Weli ma akhriday '*Hal ka Haleel: Sooyaalka Hadraawi iyo Suugaantiisa*. ee uu qoray Maxamed Baashe X. Xasan?'" ayuu i waydiiyey.

2. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

1. Ka dib markii aan akhriyey sheekadii gaabnayd ee Tuke iyo Tuur, waxaan jeclaystay in aan caruurtaydana usoo iibiyo.
2. Ka dib markii aan akhriyey sheekadii gaabnayd ee ‘Tuke iyo Tuur,’ waxaan jeclaystay in aan caruurtaydana usoo iibiyo.
3. **Ka dib markii aan akhriyey sheekadii gaabnayd ee “Tuke iyo Tuur,” waxaan jeclaystay in aan caruurtaydana usoo iibiyo.**

3. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

1. Askarigii wuxuu tuuggii weydiiyey halkeed joogtay xalayto markay ahayd 11:00-kii habeenimo.
2. “Askarigii wuxuu tuuggii weydiiyey, ‘Halkeed joogtay xalayto markay ahayd 11:00-kii habeenimo.’”
3. **Askarigii wuxuu tuuggii weydiiyey, “Halkeed joogtay xalayto markay ahayd 11:00-kii habeenimo.”**

4. Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Kolmo.

1. “Hadii aad akhriday maqaalkaygii “Tacliinta Maanta,” ee aan saaka kusoo qoray “Jarii’ddada Hilaac,” waad fahmi lahayd sababta aan uga niyad-jabsanay wax-barashadeena.”

2. Hadii aad akhriday maqaalkaygii “Tacliinta Maanta,” ee aan saaka kusoo qoray “Jarii’ddada Hilaac,” waad fahmi lahayd sababta aan uga niyad-jabsanay wax-barashadeena.

3. Hadii aad akhriday maqaalkaygii ‘Tacliinta Maanta,’ ee aan saaka kusoo qoray ‘Jarii’ddada Hilaac,’ waad fahmi lahayd sababta aan uga niyad-jabsanay wax-barashadeena.

5. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay Kolmo.

1. “Weligey maan arkin “fanaan sidan u cod macaan,” ayuu yidhi Cali Sugule.”

2. **<u>“Weligey maan arkin fanaan sidan u cod macaan,” ayuu yidhi Cali Sugule.</u>**

3. “Weligey maan arkin fanaan sidan u cod macaan,” ayuu yidhi Cali Sugule.”

6. Sheekh Mustafe Xaaji Ismaaciil wuxuu yidhi, “Guusha ugu saraysa ee uu qofku gaadhaa waxaa weeye in uu jannada galo.” Sheekh Mustafe wuxuu sii raaciyey, “Hadii uu qofku yahay qof faqiir ah, gob-lan ah, wax aqoon ahna aan lahayn, laakiinse uu aakhiro jannada galo, waa qof guulaystay. Hadii uu qofku leeyahay hanti aad u badan, ubad iyo haween badan iyo aqoon sare oo uu aakhiro cadaabta galo, waa qof guul-daraystay.” Hadalkaas Sheekh Mustafe waa hadal xaqiiq ah.

7. Dr. Xuseen Bulxan wuxuu buuggiisii, “Politics of Cain: One Hundred Years of Crises in Somali Politics and Soceity,” ku qoray: “Bur-burka Soomaaliya waxaa sabab u

ahaa saddex arimood.” Wuxuu si qoto-dheer u sharaxay saddexdaas arimood. Wuxuu kale oo uu ku qoray, “Siyaasiyiintu qayb lixaad leh ayay ka qaateen bur-burkii Soomaaliya.” Dood fiican ayuu soo ban-dhigay Dr. Xuseen.

8. “Wadankeenu [Soomaaliland] wuxuu u baahan-yahay in loo sameeyo ‘man-haj wax-barasho,’” ayuu yidhi Wasiirka Wax-barasahda ee Soomaaliland. “Laakiinse hadii aan si dhakhso ah loo samaynin [man-haj],” ayuu raaciyey Wasiirku, “wax-barashadeenu khatar ayay ku sugantay.”

9. Anigu ma aaminsani in ay jiraan waxa loo yaqaano “dad-qal” iyo “qori-is-maris.” Waa sheekooyinka caruurta lagu cabsiiyo (bajiyo). Ka waran “Dheg-dheer” iyo “Suul-cawro?” Iyagu ma waxay ahaayeen dad dhab ah oo jira?

10. “[B]uuggii aan qoray . . . dad badan ayaa ka cadhooday . . . dood buugga ku saab-san ayaan qabanayaa ee qofku su’aal hayaa hakasoo qayb-galo,” ayuu yidhi Dr. Cali kusoo qoray Jariiddada Hilaac. Waxa kale uu codsaday, “. . . waan faah-faahinayaa, dadkana waan ku sharaxayaa wixii aan buugga ku qoray oo si khaldan loo macneeyey.”

## CUTUBKA 6

## JAWAAB

1. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Moos.

1. Nasasho ayaan u baahanay saacado badan ayaan shaqaynaayey.
2. Nasasho ayaan u baahanay, saacado badan ayaan shaqaynaayey.
3. **<u>Nasasho ayaan u baahanay: Saacado badan ayaan shaqaynaayey.</u>**
4. Nasasho: ayaan u baahanay saacado badan ayaan shaqaynaayey.

2. Keebaa SAX ah.

1. Waxaan dhoofayaa 7 30 am
2. Waxaan dhoofayaa 7:30 a.m.
3. Waxaan dhoofayaa 7:30 A.M.
4. Waxaan dhoofayaa 7.30.a.m

3. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Moos.

1. **<u>Marka aan fasaxa helo ee safarka aan u baxo, waxaan u baahnaan-doonaa: shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.</u>**
2. Marka aan fasaxa helo ee safarka aan u baxo, waxaan u baahnaan-doonaa, shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.
3. Marka aan fasaxa helo ee safarka aan u baxo, waxaan u baahnaan-doonaa; shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.
4. Marka aan fasaxa helo ee safarka u baxo waxaan u baahnaan-doonaa shaamboo, saabuun, tuwaal, caday, cadar, kiriim, iyo saliid.

4. Weedhahan keebaa si sax ah loo isticmaalay astaanta Moos.

1. Roobku dabaylo xoogan ayuu watay, guryo badan ayay dabayshu jiingadii ka qaaday.
2. Roobku dabaylo xoogan ayuu watay guryo: badan ayay dabayshu jiingadii ka qaaday.
3. **<u>Roobku dabaylo xoogan ayuu watay guryo: Badan ayay dabayshu jiingadii ka qaaday.</u>**

5. Ayaaddan Quraan-ka, teebaa si sax ah u qoran.

1. Quraan 12.40
2. Quraan 12,40
3. **<u>Quraan 12:40</u>**
4. Quraan 12 40

6. Lacagteena hoos u dhacday si kor loogusoo qaado waa in:

1. suuqa lasoo galiyaa lacag Doolar ah oo badan
2. lacagta lagusoo iibiyo jaadka (qaadka) waa in lagu bixiyaa lacagta wadanka
3. lacagta wadanka suuqa laga saaraaa

1. Maanta marka aan suuqa taggo waxaa soo iibsanayaa waxyaabo badan: shaadh, surwaal, kabo, saacad, telefoon, shandad, iwm.

7. Madaxweynuhu wuxuu yidhi, “Nabadda wadanka hala illaaliyo.”

8. Tacliintu waxyaabo baddan ayuu qofku ka faa'iidaa:

1. xirfad gaar u ah oo uu barto
2. luqada oo uu si fiican usii barto
3. hab u fikirkiisa oo aad u fiicnaada
4. aduunka oo uu la socdo iyo
5. waxyaabo kale oo baan

9. Markii uu jaamacadii dhamaystay wuxuu gaadhay guushii uu ku hamiyaayey: shaqo fiican

# CUTUBKA 7

# JAWAAB

1. Weedhahan keeba si sax ah loo isticmaalay astaanta Far-Suul.

1. buska ugu danbeeyaa wuxuu sii marayaa burco todhgeer berbera saaxil maroodijeex hargaysa
2. Buska ugu danbeeyaa wuxuu sii marayaa Burco, Todhgeer, Ber-bera, Saaxil, Maroodi-jeex; Hargaysa.
3. **Buska ugu danbeeyaa wuxuu sii marayaa Burco, Todhgeer; Ber-bera, Saaxil; Maroodi-jeex; Hargaysa.**

2. Weedhahan keeba si sax ah loo isticmaalay astaanta Far-Suul.

1. Saynab way dhamaysay shaqadii sidaa daraadeed way bixi kartaa.

2. saynab way dhamaysay shaqadii sidaa daraadeed way bixi kartaa.
3. **<u>Saynab way dhamaysay shaqadii; sidaa daraadeed, way bixi kartaa.</u>**
4. Saynab way dhamaysay shaqadii, sidaa daraadeed way bixi kartaa.

3. Keebaa sax ah.

1. waxaynu xafiisyada soo maraynaa: 9:30am, 2:00 pm, iyo 5:50 pm.
2. Waxaynu xafiisyada soo maraynaa: 9:30 AM. 2:00 P.M. iyo 5:50 P.M.
3. **<u>Waxaynu xafiisyada soo maraynaa: 9:30 A.M.; 2:00 P.M.; iyo 5:50 P.M.</u>**

4. Sax mise khalad.

1. Quraan 76:01
2. Quraan 76.01
3. Quraan 76;01

5. Sax mise khalad.

1. Maanta casharo ayaan dhigayaa, berrito faxas ayaan ahay.
2. Maanta casharo ayaan dhigayaa; Berrito faxas ayaan ahay.
3. **<u>Maanta casharo ayaan dhigayaa; berrito faxas ayaan ahay.</u>**

6. Ciyaartii waxay ku dhamaatay bareejo; waxaa lagu daray wakhti dheeraad ah.

7. Waxaan safaro kala duwan kusoo maray: Hargaysa, Soomaaliland; Nayroobi, Kiinya; Qaahira, Masar; Landan Ingiriiska; iyo Baariis, Faransiiska.

8. Cali wuxuu dunida kaga tagey: Saynab oo ku nool Soomaaliland; Faarax oo ku nool Itoobiya; iyo Saxarla oo ku nool Ingiriiska.

9. Gaadhi ayay Farxiyi soo iibsatay; sida loo kaxeeyo ma taqaano.

10. Waxaan doonaayey in aan u dhoofo Sucuudi Rreebiya; sidaa daraadeed waa in aan baasaaboor samaystaa.

# CUTUBKA 8

# JAWAAB

1. Astaanta Dareen meelahee loo isticmaalaa?

**Jawaab**:

Astaantanta Dareen meelaha loo isticmaalo waxaa ka mid ah: “farxad,”“amakgaaga,” “la-yaabitaanka,” ama hadal “dhawaaq” ah (dhawaaq waxaan uga jeedaa: hadal sare loogu dhawaaqay), iwm.

2. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.

1. Cajiib? Waa meel aad u qurux badan?
2. **<u>Cajiib! Waa meel aad u qurux badan!</u>**
3. Cajiib!. Waa meel aad u qurux badan!.

3. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.

1. Tollaay, doqoniimadaan sameeyey.
2. Tollaay. doqoniimadaan sameeyey.
3. Tollaay! doqoniimadaan sameeyey.
4. **<u>Tollaay! doqoniimadaan sameeyey!</u>**

4. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.

1. Biis, Biis! Waar ku celi heesta.
2. **<u>Biis! Biis! Waar ku celi heesta!</u>**
3. Biis, Biis, Waar ku celi heesta!

5. Weedhahan keebaa si sax loo isticmaalay astaanta Dareen.
    1. Kir!. Kir!. Waar dameerkan yaa naga kaxaysta!. Kir!.
    2. Kir. Kir, Waar dameerkan yaa naga kaxaysta, Kir.
    3. **<u>Kir! Kir! Waar dameerkan yaa naga kaxaysta! Kir!</u>**

6. Shantan qoraal ee soo socda, dooro ka saxa ah:
   1. "Naga jooji hadalka!" ayay ku dhawaaqday.
   2. "Naga jooji hadalka" ayay ku dhawaaqday!
   3. "Naga jooji hadalka"! ayay ku dhawaaqday.
   4. "Naga jooji hadalka!". ayay ku dhawaaqday.
   5. "Naga jooji hadalka!." ayay ku dhawaaqday.

7. Saddexdan qoraal ee soo socda, dooro ka saxa ah:
   1. Aamus!! Dhegahaaga iyo afkaagu isma maqlayaane!!
   2. Aamus! Dhegehaaga iyo afkaagu isma maqlayaane!
   3. Aamus! Dhegehaaga iyo afkaagu miyaaney is maqlaynin?!

8. Astaanta Dareenka waxaa loo isticmaalaa in ______________
   1. la tilmaamo hadal dhawaaqa, farxad, mucjiso, iwm
   2. in lagusoo xidho weedho dhamaystiran, sida joogsiga
   3. in qoraalka lagu muujiyo arin cadho ama oohin ah
   4. A, b iyo C (saddexduba waa sax)

9. Weedhahan soo socda, keebaa ku haboon in loo isticmaalo Astaanta Dareen; sidaase loogu isticmaalayaa.
   1. Magacaygu waa Cabdiraxmaan
   2. Waxaasi wax dhici kara maaha!
   3. Ma yeelaayo! Mana aqbalaayo!
   4. Yeelkadaa aniga hay sheegin!

10. Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loogu isticmaalay Astaanta Dareen.

1. Dhaqankiisa ayaan la yaabay!
2. Mala yaabtay dhaqankiisa!
3. Yur! Yur! Yur!
4. Naga tag!
5. Waar na dhaaf!

# CUTUBKA 9

# JAWAAB

1. Imisa meelood ayaa Astaanta Jiitin loo isticmaalaa?

**Jawaab**:

Astaanta jiitinta waxaa loo isticmaalaa dhowr meelood. Kow, marka aad doonayso in aad isku xidho laba erey oo aan si caadi ah isugu xidhmaynin, ama fahanku fudaadanyo marka aad isku-xidho labada eray adigoo isticmaalaya Astaanta jiitinta. Laba, marka aad doonayso in aad tilmaanto maal-mo ama taariikh is daba-socota. Saddex, marka aad doonayso in aad tilmaanto umad (dad) usoo guurtay wadan cusub. Afar, marka aad qorayso da'da qof adigoo u qoraaya qoraal ahaan.

2. Weedhahan soo socda, meelaha ku haboon geli Jiitin.

1. Gar-gariir-ka waxaa keenay gor-gorka soo duuley.

3. Weedhahan soo socda, meelaha ku haboon geli Jiitin.

1. Maxay ku kala duwan yihiin, Yamani-Soomaali iyo Soomaali-Yamani?

4. Qoraaladan keebaa si sax ah u qoran.
    1. 1980-1990
    2. **<u>1980 - 1990</u>**
    3. 1980 – 1990
    4. 1980 1990

5. Geli meesha ku haboon Jiitin.
    1. Laba-kun-iyo-kowdii ayuu dhashay wiilkaygu. Laba-kun-iyo-laba-iyo-tobankiina waan soo kaxeeyey.

6. Dooro ka saxda ah.
    1. Labo iyo labaatan jir
    2. Labo-iyo-labaatan-jir
    3. **<u>Labo-iyo-labaatan jir</u>**

7. Qoraalkee ayaa si saxan loo isticmaalay Astaanta Jiitin:
    1. Qarnigii 19-aad, waxaa is-af-garad dhex-maray dowladaha Itoobiya iyo Kiiniya.
    2. Qarnigii 19 aad, waxaa is afgarad dhex maray dowladaha Itoobiya iyo Kiiniya.
    3. Qarnigii 19aad, waxaa is af garad dhexmaray dowladaha Itoobiya iyo Kiiniya.

8. Weedhahan soo socda, keebaa Astaanta Jiitin si sax ah loo isticmaalay:
    1. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay 8:00pm-10:00pm. Waxaa daawanaayey dad-weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa 150-200 oo qof.

2. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay 8:00pm 10:00pm. Waxaa daawanaayey dad weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa 150 200 oo qof.
3. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay 800pm --10pm. Waxaa daawanaayey dad-weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa 150 -- 200 oo qof.
4. Riwaayadii aanu xalayto daawanay waxay socotay dideedii ilaa tobankii. Waxaa daawanaayey dad-weyne aan ku qiyaasay inta u dhaxaysa boqol iyo konton ilaa laba boqol oo qof.

9. Weedhahan soo socda kuwee ayaa si saxan loo isticmaalay Astaanta Jiitin:
   1. Soomaali-Sujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay
   2. Soomaali sujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay
   3. Soomaali-sujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay
   4. SoomaaliSujuu aad u badan ayaa wadanka soo degay

10. Weedhahan soo socda keebaa si saxan loo isticmaalay Astaanta Jiitin
   5. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba-iyo-toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan-iyo-toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba-iyo-soddon jir.
   6. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba iyo toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan iyo toban sanadood,

iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba iyo soddon jir.

7. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba-iyo toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan-iyo toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba-iyo soddon jir.
8. Waxaan wadanka Maraykanka deganaa toddoba iyo-toban sanadood. Waxaan tagey wadankaas aniga oo jira shan iyo-toban sanadood, iminkana waxaan kasoo noqday anigoo ah laba iyo-soddon jir.

# CUTUBKA 10

# JAWAAB

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta Mareeg?

**Jawaab**:

Astaanta Mareeg waxaa la isticmaalaa marka aad doonayso in aad qoraalkaaga ku darto macluumaad siyaado ah.

2. Weedhan soo socda keebaa si saxan loogu isticmaalay astaanta Mareeg:
    1. Ardaygii si khaldan ayuu uga jawaabay (markuu shan daqiiqo aamusnaa) su’aashii.
    2. **Ardaydii si khaldan ayuu uga jawaabay su’aashii (markuu shan daqiiqo aamusnaa).**
    3. Ardaygii si khaldan (markuu shan daqiiqo aamusnaa) ayuu uga jawaabay su’aashii.
    4. Ardaygii (markuu shan daqiiqo aamusnaa) si khaldan ayuu uga jawaabay su’aashii.

3. Weedhahan keebaa si saxan loo isticmaalay astaanta Mareeg.

   1. **Markii uu gaadhigu noo yimi (inkastoo uu buuxay), kuraas nagu filan waanu helay.**
   2. Markii uu gaadhigu noo yimi, (inkastoo uu buuxay) kuraas nagu filan waanu helay.
   3. (inkastoo uu buuxay) markii uu gaadhigu noo yimi kuraas nagu filan waanu helay.

4. Magaaladan magaceedaa, tee ayaa si sax ah u qoran.

   1. Jiga Jiga
   2. Jigjiga
   3. JigJiga
   4. Jig-Jiga
   5. **Jig-jiga**

5. Shaadhkaygu waa casaan-madow dhalaalaya.

   1. **Sax**
   2. Khalad

# CUTUBKA 11

# JAWAAB

1. Maxaa loo isticmaalaa Astaanta Ardaa?

**Jawaab**:

Astaanta Ardaa waxaa loo isticmaalaa oo KALIYA marka aad doonayso in aad macluumaad siyaaddo ah dhex-geliso qoral ama hadal aad soo xiggatay.

2. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.” Weedhahan soo socda keebaa si sax ah usoo xiggtay qoraalka Gudoomiyaha:

   1. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu (Soomaaliland) waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”
   2. **Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu [Soomaaliland]waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”**
   3. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu—Soomaaliland—waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”
   4. Cabdiraxmaan Maxamed Cabdilaahi (Cirro), Gudoomiyaha Gollaha Wakiilada, ayaa wuxuu qoray, “Dowladu, Soomaaliland, waa in ay nabada wadanka ilaalisaa.”

3. Dastuurka Soomaaliland: “Qof kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.” Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loosoo xiggtay:

   1. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in “Qof kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.”
   2. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in “(q)of kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.”

3. **<u>Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in "[q]of kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka."</u>**
4. Dastuurka Soomaaliland wuxuu dhigayaa in qof kasta oo muwaadin ahi wuxuu xaq u leeyahay in uu isusoo sharaxo madax-weynaha wadanka.

4. Qudbadii Madax-weynaha Jabuuti isagoo u qudbadaynaya baayac-mushtarka wadanka Jabuuti: "Dhaqaalaha wadanku kor ayuu u kacay, sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina ka qaadataan." Weedhahan soo socda keebaa si sa ah usoo xiggtay hadalka Madax-weynaha.
   1. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay "dhaqaalaha wadanku (Jabuuti) . . . sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina (baayac-mushtarka) ka qaadataan."
   2. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay "dhaqaalaha wadanku Jabuuti sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina baayac-mushtarka ka qaadataan."
   3. **<u>Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay "dhaqaalaha wadanku [Jabuuti] . . . sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina [baayac-mushtarka] ka qaadataan."</u>**
   4. Qudbadii uu Madax-weynaha Jabuuti jeediyey wuxuu ku sheegay in uu kor-u-kacay "dhaqaalaha wadanku-Jabuuti-sidaa awgeedna waxaa loo baahan-yahay in aydun doorkiina (baayac-mushtarka) ka qaadataan."

5. Tudduc ka mid ah gabaygii Maxamed Nuur Fadal ayaa waxay ahayd, “Nimankaan dukaamada lukiyan, laba-laba u siiyey.” Weedhahan soo socda keebaa si sax ah loogu isticmaalay Astaanta Ardaa:

   1. “Nimankaan dukaamada lukiyan (camirran), laba-laba u siiyey.”
   2. “Nimankaan dukaamada lukiyan “camirran,” laba-laba u siiyey.”
   3. **“Nimankaan dukaamada lukiyan [camirran], laba-laba u siiyey.”**

# CUTUBKA 12

# JAWAAB

1. Imisa meelood ayaa loo isticmaalaa astaanta Fullul?

**Jawaab**:

Fullul waxaa loo isticmaalaa laba meelood oo kaliya. Kow, qoraal ama hadal aad soo xiggatay oo aad wax ka tagtay, ama hadal uu qof yidhi oo aanad qaybo ka mid ah si fiican u maqlin. Labo, qof hadlaayay oo hadalkiisii dhex galiyey aamusnaan gaaban.

2. Waa maxay micnaha “Fullul?”

**Jawaab**:

Fullul micnihiisu waxaa weeye “saalada lo’dda.” Saalada lo’du waa dhowr saalo is bada-yaala. Astaantanina waa saddex dhibcood oo is-dabayaala, sida saalada lo’dda.

3. Noloshaada sida aad u qiimayso, iyo sida aad u aragto, ayuunbay noqonaysaa. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loo isticmaalay Fullul:

4. Noloshaada sida aad u qiimayso, iyo sida . . . aragto, ayuunbay noqonaysaa.
5. **<u>Noloshaada sida aad u qiimayso . . . ayuunbay noqonaysaa.</u>**
6. Noloshaada sida aad u qiimayso, iyo sida aad u aragto . . . noqonaysaa.

4. Hello! Haa! Anigu! Waa si fiican, laakiin waan u sheegay, ma iminka? Hee, haa, waa sidaan kuu, haye, haye, waa runtaa. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay Fullul:

4. Hello!, Haa!, Anigu! Waa si fiican laakiin waan u sheegay, ma iminka?,…..hee!...haa!...waa sidaan kuu, haye!...haye!...waa runtaa.
5. **<u>Hello! Haa! Anigu . . . waa si fiican . . . laakiin waan u sheegay . . . ma iminka? . . . hee! . . . haa! . . . waa sidaan kuu . . . haye! . . . haye . . . waa runtaa.</u>**
6. Hello! Haa! Anigu waa si fiican, laakiin waan u sheegay, markii hore, hee, haa, waa sidaan kuu, haye, haye, waa runtaa.

5. Dr. Cali wuxuu qoray, “Waxaa aad loogu baahan-yahay, weliba si gaar-ah looga baahan-yahay aqoon-yahanada, in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.” Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay Fullul:

4. Xiggasho: Dr. Cali maqaalkiisii wuxuu ku qoray, “Waxaa …..loogu baahan-yahay, weliba ….. aqoon-yahanada, in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.”

5. Xiggasho: Dr. Cali maqaalkiisii wuxuu ku qoray, “Waxaa aad loogu baahan-yahay [. . .] in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.”

6. **<u>Xiggasho: Dr. Cali maqaalkiisii wuxuu ku qoray, “Waxaa aad loogu baahan-yahay . . . in la abuuro erey-bixin Soomaaliyeed.”</u>**

6. Jariiddadda Hilaac waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May ee Soomaaliland. Waxaana la go’aansadday in kharashkii lagu bixin-lahaa debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.” Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay Fullul:

4. Xiggasho: Jariddada Hilaac maanta waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May [. . .] Waxaana la go’aansadday in kharashkii [. . . ] debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.”

5. **<u>Xiggasho: Jariddada Hilaac waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May . . . Waxaana la go’aansadday in kharashkii . . . debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.”</u>**

6. Xiggasho: Jariddada Hilaac maanta waxay qortay, “Sanadkan waa la joojiyey debaal-deggii 18 May…..Waxaana la go’aansadday in kharashkii….debaal-degga, lagu caawiyo dadka abuuruhu aafeeyeen.”

7. Nin kuu digey, oo ku daggey, kuma dilin. Weedhahan soo socda keebaa si ah loogu isticmaalay Fullul:

4. Nin kuu digey..kuma dilin.
5. Nin kuu digey….kuma dilin.
6. **<u>Nin kuu digey . . . kuma dilin.</u>**

# CUTUBKA 13

# JAWAAB

1. Maxaa loo isticmaalaa Astaanta Qo-qob?

**Jawaab**:

Astaan Qo-qob waxaa lagu isticmaalaa laba meelood oo kaliya. Kow, Astaanta Qo-qob waxaa loo isticmaalaa oo ay u dhigantaa ereyada “iyo,” “ama.” Laba, waxaa loo isticmaalaa marka aad qorayso taariikh.

2. Taariikhahan soo socda keebaa si sax ah u qoran:
    1. 05-05/2017
    2. 05/05-2017
    3. 05,05,2017
    4. **<u>05/05/2017</u>**
    5. Dhamaan waa khalad
    6. Dhamaan waa sax

3. Weedhahan soo socda keebaa sheegaaya rag iyo/ama dumar:
    1. **<u>Rag/dumar</u>**
    2. Rag, dumar
    3. Rag-dumar

4. Weedhahan soo socda keebaa sax ah:
    1. **Caruur/ciroole**
    2. **Caruur iyo/ama ciroole**
    3. Caruur / Ciroole

5. Waxaan dhashay 05-05/1970, waxaannan ku dhashay Burco, Soomaaliland.
    1. Sax
    2. **Khalad**

# CUTUBKA 14

# JAWAAB

1. Maxaa loo isticmaalaa astaanta Ham’se?

**Jawaab**:

Astaanta Ham’se waxaa loo isticmaalaa laba meelood. Kow, magacyada dadka qaar ayaa u baahan in Ham’se loo isticmaalo. Laba, ereyo badan oo Soomaali ah ayaa iyana u baahan in lagu darro Ham’se.

2. Weedhahan soo socda, keebaa si sax ah loogu isticmaalay astaanta Ham’se?
    1. Ninkii gam,ayaa sariir gog-ladee, go,aygaan dhigtaa gidaarrada.
    2. Ninkii gamayaa sariir gogladee, goaygaan dhigtaa gidaarrada.
    3. **Ninkii gam’ayaa sariir gog’ladee, go’aygaan dhigtaa gidaarrada.**

- Naa go’ddooy, kumee?

1. **<u>Sax</u>**
2. Khalad

- Go,aan qaadashadu waa guusha badhkeed.
  1. Sax
  2. **<u>Khalad</u>**

- Jasaa'ka'Laahul khayr
  1. **<u>Sax</u>**
  2. Khalad

## CUTUBKA 15

## JAWAAB

1. Weedhahan soo socda, waxaad ka dhigtaa jan-jeedh ama hoosta ka xariiq, sida ay ugu kala haboon-yihiin.

1. Waxaan doonayaa in aan soo daawado riwaayada *Beeneey waa Run*.
2. Weligaa ma akhriday cutubka ku jiraa buugga ciwaankiisa la yidhaahdo, <u>Hagar-laawe</u>.
3. Maanta waxaan akhriyey *Jarii'ddada Wada-jir*.
4. Waa maxay micnaha kelmeda, *Burco*?
5. Heesta uu qaado Xasan Aadan Samatar ee la yidhaahdo "Daa'uus," yaa sameeyey.

## CUTUBKA 16

## JAWAAB

1. Maxaa loo isticmaalaa Astaanta Boqoley?

   **Jawaab**:
   Astaanta Boqley waxaa loo isticmaalaa si loosoo gaabiyo ereyadda boqolkiiba-qayb tilmaamaya.

2. Labadan keebaa si sax ah loo isticmaalay Astaanta Boqoley?
   1. %90
   2. **90%**
   3. Sagaashan%
   4. Boqolkiiba 90

3. Sanadkan 2017, ardayda kasoo qalin-jabisay dugsiga Sheekh Bashiir waxaa jaamaca galey:
   1. Boqolkiiba 40
   2. 40 boqolkiiba
   3. **40%**
   4. %40

4. Shaqaalaha Wasaarada Arimaha Guddaha, imisa ayaa haween ah?
   1. Waxaa haween ah boqolkiiba 30
   2. Waxaa haween ah 30 boqolkiiba
   3. Waxaa haween ah boqolkiiba soddon
   4. **Waxaa haween ah 30%**

5. Fikradda uu Xasan soo jeediyey anigu waan ku raacsanahay:
   1. Boqolkiiba%
   2. **100%**

3. %100
4. Boqolkiiba boqol

# CUTUBKA 17

## JAWAAB

1. Maxaa lagu isticmaalaa Astaanta Lacagta?

**Jawaab**:
Astaanta Lacagta waxaa lagu isticmaalaa marka aad tilmaamayso nooca ay tahay lacagta aad ka hadlaysaa.

2. Keebaa sax ah:
   1. **US$150.00**
   2. $150.00
   3. 150$

3. Lacagta Soomaaliland marka lagu sarifo lacagta doolarka wuxuu noqonayaa:
   1. **US$1.00 = SlSh9000.00**
   2. $1 = SlSh9000.00
   3. 1$ = 9000SlSh

4. Astaanta Lacagta marka la isticmaalayo waan in astaanta laga danbaysiiyaa lambarka la qoraayo: tusaale ahaan, 90$
   1. Sax
   2. **Khalad**
   3. Ma garanyo

Buuggan waxaad ka baranaysaa sida loo isticmaalo astaamaha qoraalka. Astaamaha qoraalku waxaa weeye: Xaraf-ku-Dheg (ama xarfaha la waaweyneeyo); Joogsi; Hakad; Xiggasho; Astaanta Su'aasha; Ham'se; Jiitin; iyo wixii la mid ah. Buuggani wuxuu ka kooban-yahay toddoba-iyo-tobban (17) cutub. Cutub kastaana wuxuu si qoto-dheer u sharaxayaa astaan gaar ah. Sidaa awgeed, waxaad ka baranaysaa sidda loo isticmaalo toddoba-iyo-tobban astaamood.

Isticmaalka astaamaha qoraalka aad ayay bulshadeenu ugu liidataa. Wasaaradaha dowlada, xisbiyadda siyaasadda, shirkadaha, hay'addaha, masaajiddadda, nootaa-yooyinka, jaraa'iddadda, mareegaha, dadweynaha, iyo guud ahaan bulshadeenu, si khaldan ayay u isticmaalaan astamaaha qoraalka. Taasina waxay sababtaa: 1) in qoraalka oo si khaldan loo fahmo; iyo 2) in ay muujiso aqoon-daradda qoraaga. Sidaa awgeed, buuggani wuxuu ka jawaabayaa baahidaas wadanka ku baahday.

**Qoraaga Buugga**

Cabdiraxmaan wuxuu Bachelor of Arts (BA) ka qaatay University of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku takhasusay Cilmiga Siyaasadda(Political Science) iyo Barashada Caalamka(Global Studies). Ka dib, wuxuu Masters Degree (MA) ka qaatay Saint Mary's University of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku takhasusay Maamulka iyo Maaraynta Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada(MA in Health and Human Services Adminstration). Ka dib, wuxuu Cabdiraxmaan mar labaad Masters Degree (MA) ka qaatay Saint Mary's University of Minnesota, U.S.A., waxaanu ku takhasusay Dhakhtarnimada Dhimirka(Master of Counseling and Psychological Services).

ISBN [redacted]